



XAFIISKA
HANTIDHOWRKA GUUD
EE JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA



WARBIXINTA BAARISTA
HANTIDHOWRKA GUUD EE
WARBIXIN MAALIYADEEDKA
DOWLADDA FEDERAALKA
SOOMAALIYA

Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday 31^{da} December 2025



TUSMADDA

EREYADA LA SOO GAABIYAY	iii
HORADHAC	1
Awoodaha Dastuuriga ah ee Xafiiska Hantidhowrka Guud.....	1
HIIGSIGA, HIMILADA IYO QIYAMKA.....	2
HIIGSI	2
HIMILO	2
WARBIXINTA BAARISTA HANTIDHOWRKA GUUD EE WARBIXIN MAALIYADEEDKA DOWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA, SANNAD MAALIYADEEDKA DHAMMAA- DAY 31^{DA} DECEMBER 2025	3
ARAGTI NADIIF AH (UNQUALIFIED OPINION)	3
GUNDHIGGA ARAGTIDA NADIIFKA AH (BASIS FOR OPINION)	4
Saamiga Dowladda ee Heshiiska Dheef-wadaagga ee shirkada FAVORI LLC, oo Ka hooseeya Qaddarkii Heshiiska (Tixraac 3.08, bogga 69 ^{aad})	4
Isku-xirnaanta Nidaamyada Lagu Uruuriyo Dakhliga iyo Nidaamka Guud ee SFMIS oo Qabyo ah	6
ARRIMAHA BAARISTA MUHIIMKA U AH	6
Qalabka PoS oo aan Laga Faa'iidayasan	7
WAXYAABAHA KALE EE MUHIIMADDA LEH	8
Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga	8
Baarista Nidaamyada Tiknoolojiyadeed (IS Audits)	9
Baarista Waxqabadka.....	9
Baarista Mashaariicda Bangiga Adduunku Maalgeliyo.....	9
MASUULIYADDA MAAMULKA SARE IYO SARAAKIISHA U XILSAARAN WAAJIBAADKA WARBIXINNADA MAALIYADEED	10
MAS'UULIYADDA HANTIDHOWRAHA GUUD EE BAARISTA WARBIXINTA MAALIYADEED.	11
Hannaanka mideysan ee Warbixinada Maaliyadeed (Consolidated Financial Statements)	13

EREYADA LA SOO GAABIYAY

DFS	Dawladda Federaalka Soomaaliya
JFS	Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
IPSAS	Heerka Xisaabaadka Hay'adaha Dawladdaha Caalamiga ah
ISSAIs	Heerka Hay'adaha Hantidhawrista Guud ee Caalamiga ah
DXDF	Dawladda Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka
BJFS	Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
BFS	Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya



Han. Lam#: XHG/HG585/2026

Taariikh: 30/06/2026

Ku: Guddoonka Golaha Shacabka, BJFS
Guddoonka Aqalka Sare, BJFS
Muqdisho, Soomaaliya

**Warbixinta Baarista Hantidhowrka Guud ee Warbixin Maaliyadeedka Dowladda
Federaalka Soomaaliya, Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday 31^{da} December, 2025**

Mudanayaal,

Waxa Sharaf iyo guul ii ah in aan si waafaqsan Qodobka 177^{aad} ee Dastuurka JFS idinla wadaago Baarista Warbixinta Maaliyadeed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ee Sannad Maaliyadeedka Dhammaaday 31^{da} December, 2025, sida ku faah-faahsan boggaga 3 - 13 oo la xiriira warbixin maaliyadeedka DFS ee ku lifaaqan boggaga 54 - 79.

Baarista Sanadlaha ah ee Warbixinta Maaliyadeed ee DFS ee sannad-maaliyadeedka dhammaaday 31^{da} December 2025, waxa aan fuliyey soona saaray aniga oo gudanaya waajibka ku xusan Dastuurka JFS iyo Sharciyada Hantidhowrka Guud iyo Maareynta Maaliyadda Guud ee dowladda Lr. 17, 2019 iyo Lr. 14, 2023, iyo Heerka Caalamiga ah ee Xisaabaadka Dowladda (IPSAS¹) ee lacagaha caddaanka ah.

Waxa kale oo warbixinta la socda Lifaayada 1, 2, 3, 4, 5, 6, iyo 7, iyo qoraallo sharraxaad ah oo ku faahfaahsan boggaga 83 - 134, kuwaas oo uu ila soo wadaagay Xisaabiyaha Guud ee dowladda, Sidoo kale, waxaa ku lifaaqan qoraalka Wasiirka Maaliyadda, qoraallo ku saabsan mas'uuliyadaha shaqo iyo faallo guud oo aanan baarin sidoo kalana aanan fikrad ka bixin.

Baaxadda iyo cidda mas'uuliyadda go'aanka leh

Madaxbannaanida iyo mas'uuliyadaha Xafiiska Hantidhowrka Guud waxaa lagu ilaaliyay Qodobka 177^{aad} ee² Dastuurka JFS iyo Sharciyada Hantidhowrka Guud iyo Maareynta Maaliyadda Guud ee dowladda Lr. 17 iyo Lr. 14, waxa kale oo aan baarista u sameeyey si waafaqsan Heerka Hay'adaha Hantidhowrada Guud ee Caalamiga ah kuwaas oo loo soo gaabiyo "ISSAIs" kaas oo dhigaya dhigaya in baarista Warbiixnada Maaliyadeed loo qorsheeyo loona fuliyo si lagu gaaro hubanti macquul ah (reasonable assurance) iyo in dhammaan waxyaabaha halbeegga leh loogu soo bandhigo warbixin maaliyadeedka sannadlaha si sax ah.

Hannaanka loo maray baarista waxaa ka mid ah:

- Dib-u-eegis iyo hubin lagu sameeyay caddeymaha taageeraya caddadka lacagaha iyo waxyaabaha lagu soo bandhigay warbixinta maaliyadeed;
- Qiimeyn lagu sameeyay siyaasad-xisaabeedyada ay hay'addu adeegsatay iyo qiyaasaha muhiimka ah ee uu sameeyo maamulka;

¹ *Cash Basis International Public Sector Accounting Standards (IPSAS)*

² *International Standards of Supreme Audit Institutions (ISSAI)*

- Dersid guud oo lagu sameeyay soo bandhigidda warbixinta maaliyadeed; iyo
- Tijaabinta u hoggaansanaanta sharciyada iyo xeerarka khuseeya maaraynta maaliyadda guud.

Baarista waxa kale oo ka mid ah qiimeyn iyo tijaabo lagu sameeyay asal ahaanta caddeymaha kaabaya iyo u hoggaansanaantooda ee dhammaan waxyaabaha halbeegga leh ee la xiriira sharciyada iyo xeerarka, gaar ahaan kuwa khuseeya dhaqan gelinta arrimaha maaliyadeed.

Waxyaabaha aan warbixinta baaristan maaliyadeed ku dhex tilmaamay waa waxyaabihii aan ku ogaaday baaristii aan sameeyey aniga oo ku dadaalnay intii karaankeyga ah in aan meel-mariyo dhammaan ujeedooyinka lagama maarmaanka ah ee baarista, waxaase suuragal ah in ay jiraan waxyaabo iyo cillado kale oo aysan suuragelin in aan ogaado.

Warbixinta maaliyadeed, joogteynta hubin wax-ku-ool ah iyo u hogaansanaanta shuruucda iyo xeerarka waxa ay mas'uuliyad ka saaran tahay Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda, Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa ay mas'uuliyaddiisu tahay in uu raaciyo warbixinta maaliyadeed ee DFS Aragtida Baarista (Audit Opinion).

Mahad celin,

Waxa aan u mahad-celineynaa mas'uuliyiinta kala duwan ee hay'adaha DFS kuwaas oo la shaqeeyay Hantidhowraayaasha Xafiiska Hantidhowrka Guud intii lagu guda jiray fulinta baarista sannad maaliyadeedka dhammaaday 31^{da} December, 2025.

Guuleysta Goor & Ayaan



Mudane. Axmed Ciise Guutaale
Hantidhowraha Guud, JFS

Og: Xisaabiyaha Guud ee Dowladda
Wasiirka Maaliyadda
Ra'iisul Wasaaraha, XFS
Madaxweynaha, JFS

1. HORADHAC

1.1. Awoodaha Dastuuriga ah ee Xafiiska Hantidhowrka Guud

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS waa hay'ad dastuuri ah madax-bannaan oo heer Federal ah, laguna dhisay Qodobka 177^{aad} ee Dastuurka JFS, awoodaha, waajibaadka iyo shaqooyinka Hantidhowrka Guud waxaa lagu faahfaahiyey Sharciyada Maareynta Maaliyaha Guud, Lr. 17, 2019, Hantidhowrka Guud, Lr. 14, 2023, libka Qaranka Lr. 22, 2016, iyo Wax-ka-beddelkiisa Lr. 20, 2020.

Hantidhowrka Guud waa hay'adda ugu sarreysa ee u xilsaaran hantidhowrista, diiwaangelinta iyo ilaalinta hantida danta guud iyo macaamilka maaliyadeed ee dowladda, isla markaana fulisa kormeer iyo daba-gal ku saabsan maareynta kheyraadka guud, sidoo kale waxa uu hubiyaa dhowrista iyo ku dhaqanka sharciga maareynta maaliyadda iyo miisaaniyadda Dowladda.

Marka uu gudanayo waajibaadkiisa, Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu u shaqeeyaa si madax-bannaani hay'adeed leh, waxa uuna hubiyaa diiwaangelinta iyo xaqiijinta Qandaraasyada iyo heshiisyada ay galaan hay'adaha dowladda, iyo dikreetooyinka rasmiga ah ee madaxda sare, sidoo kalena waxa uu bixiyaa talooyinka ku saabsan dhowrista iyo ku dhaqanka Sharciga.

Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu ilaaliyaa mabaadii'da maamul-wanaagga, hufnaanta, daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka, si waafaqsan Sharciga Hantidhowrka, Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Sharciga libka Qaranka iyo wax-ka-beddelkiisa iyo sharciyada kale ee khuseeya, waxa uuna waajibaadkiisa u gutaa si ka madax-bannaan dhammaan laamaha dowladda, waxa uuna u-hoggaansamaa Dastuurka iyo Shuruucda kale ee dalka.

HIIGSIGA, HIMILADA IYO QIYAMKA



HIIGSI

Xaqiijinta wax-ku oolnimada adeegyada Guud, Xoojinta daah-furnaanta, hubinta isla-xisaabtanka iyo ku dhaqanka Shuruucda.



HIMILO

Fulinta adeegyo hantidhowr oo saameyn wanaagsan iyo isbeddel togan ku yeesha nolosha muwaadiniinta Soomaaliyeed.



2. ARAGTI NADIIF AH (UNQUALIFIED OPINION)

Waxa aan baaris ku sameeyey Warbixinta Maaliyadeed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ee Sannad-maaliyadeedka dhammaaday 31^{da} December 2025, oo ku xusan bogagga 54-79. Xisaabaadka iyo diiwaannada ku lifaaqan waxa ay waafaqsan yihiin Warbixinta Maaliyadeed, mana aanan helin wax cillado ah oo saamaynaya soo bandhigiddeeda.

Xisaabaadka iyo diiwaannada ku lifaaqan waxa ay ka kooban yihiin:

- Muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka;
- Muuqaalka qulqulka lacagaha ah;
- Muuqaalka isbarbardhiga ku-talagalka miisaaniyadda iyo kharashka dhabta ah; iyo
- Xog kooban oo ku saabsan siyaasadaha muhiimka ah ee xisaabaadka iyo sharraxaadaha kale ee la xiriiira Warbixinta Maaliyadeed, kuwaas oo uu diyaariyay Xafiiska Xisaabiya-ha Guud ee Dowladda, si waafaqsan Qodobka 45^{aad} ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Lr. 17, 2019.

Warbixinta Maaliyadeed waxaa la diyaariyay iyada oo la raacayo Heerka Caalamiga ah ee Xisaabaadka Dowladda (IPSAS) ee lacagaha caddaanka ah (Cash Basis).

Sida aan aaminsannahay, intii karaankeena ah, waxa aan helnay dhammaan xogtii iyo sharrax-aadihii muhiimka u ahaa baarista.

Aragtideenna, Warbixinta Maaliyadeedka ee Sannadlaha ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay si xaqiiqada ku salaysan oo si xaq-soor leh u soo bandhigaysaa, dhammaan waxyaabaha halbeegga leh ee saamaynaya sida; muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka, muuqaalka qulqulka lacagaha, muuqaalka isbarbardhiga ku-talagalka miisaaniyadda iyo kharashka dhabta ah ee sannadka dhammaaday 31^{da} December 2025, iyada oo la raacay Heerka Caalamiga ah ee Xisaabaadka Dowladda ee lacagaha caddaanka ah iyo Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

3. GUNDHIGGA ARAGTIDA NADIIFKA AH (BASIS FOR OPINION)

Waxa aan baaristan u sameeynay si waafaqsan Heerarka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Sare. mas'uuliyaddeenna la xiriirta heerarkan caalamiga ah waxaa faahfaahin dheeriga looga bixiyay qaybta mas'uuliyadaha Hantidhowraha ee Baarista Warbixinta Maaliyadeed ee ku xusan warbixintan.

Waxa aan ka madax-bannaanahay hay'adda soo diyaarisay Warbixinta Maaliyadeed si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Xeerka Anshaxa ee Hay'adaha Hantidhowrka iyo shuruudaha kale ee anshaxa ee khuseeya baaristan. Sidoo kale, waxa aan gudannay mas'uuliyadaha kale ee anshaxeed ee naga saarnaa.

Waxa aan aaminsannahay in caddeymaha aan baarista ku helnay ay ku habboon yihiin kuna filan yihiin in aan ku gaarno gunnaanadka aragtida hantidhowriseed ee aan bixinay.

3.1. Saamiga Dowladda ee Heshiiska Dheef-wadaagga ee shirkada FAVORI LLC, oo Ka hooseeya Qaddarkii Heshiiska (Tixraac 3.08, bogga 69^{aad})

Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa labo heshiis oo dheef-wadaag ah (concession agreements) la gashay labo shirkadood si gaar ah loo leeyahay (Private Companies), kuwaas oo kala ah: **Favori LLC**, oo maamusha Garoonka Caalamiga ah ee Aadan Cadde iyo **Mogadishu Alport corp. Albayrak-Somalia** oo maamusha Dekadda Muqdisho, labada shirkadood si waafaqsan Sharciga JFS waa shirkado ay wax ku leedahay dowladda Soomaaliya hayeeshee heshiisyadaas waxaa ku kala metela dowladda Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda iyo Wasaaradda Gaadiidka iyo Duulista hawada.

Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay saami u leedahay in ay hesho **25%** guud ahaan (Gross revenue) dakhliga ay qabato shirkadda **Favori LLC**, si waafaqsan Qodobka 9.2 (9.2.2) ee heshiiska dheef-wadaagga ah ee u dhexeeya DFS iyo **Favori LLC**, iyada oo ay waajib tahay in saamiga Dowladda lagu saleeyo Warbixinta Maaliyadeed ee Sannadlaha ah ee Shirkadda **Favori LLC**, oo soo martay Baaris Hantidhowr madax bannaan (An independent external auditor) iyo warbixinta hantida sida ku cad Qodobka 12.2 (12.2.2.) muddo 90 maalin gudahood ah kaddib dhammaadka sannad maaliyadeed kasta ayna dhammaan nuquladaas la wadaagto Hay'adaha Dowladda wakiilka uga ah (Authority's Representatives) heshiiska dheef-wadaagga ah.

Sidoo kale, Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay saami u leedahay in ay hesho **62.17%** guud ahaan dakhliga ay qabato Shirkadda **Mogadishu Alport Corporation (Albayrak-Somalia)**, si waafaqsan Qodobka 10aad ee heshiiska dheef-wadaagga ah ee u dhexeeya DFS iyo shirkadda **Mogadishu Alport Corporation (Albayrak-Somalia)**, iyada oo ay waajib tahay in saamiga Dowladda lagu saleeyo Warbixinta Maaliyadeed ee Sannadlaha ah ee Shirkadda **Mogadishu Alport Corporation (Albayrak-Somalia)** oo soo martay Baaris Hantidhowr madax bannaan (An independent external auditor) sida ku cad Qodobka 11 (11.2.3 iyo 11.2.4) muddo 120 maalin gudahood ah kaddib dhammaadka sannad kasta ayna nuqulkaas la wadaagto Hay'adaha Dowladda wakiilka uga ah heshiiska dheef wadaagga ah.

Sida ku xusan tixraaca 3.08^{aad}, qabashada lacagaha caddaanka ah ee aan canshuurta ahayn ee ku jira qulqulka dakhliga iyo kharashaadka ee 31^{da} December 2025, ayaa muujinaya caddad lacageed oo dhan **US\$119,915,341.00**, waxaa ku jira haraaga wadar guud oo dhan **US\$42,235,735.14**, taas oo ah dakhliga ka soo xarooday qandaraasyada dheef-wadaagga ee kala ah (**Mogadishu Alport corp. Albayrak-Somalia** - **US\$38,081,786.42** iyo **Favori LLC** - **US\$4,153,948.72**).

Intii aan ku guda jirnay baarista, waxa aan ka dalbanay Maamulka Wasaaradda Maaliyadda in uu nala wadaago warbixinnada maaliyadeed ee qandaraasle walba oo la baaray sida ku xusan heshiisyada, hase ahaatee, ma suurogelin in aan helno warbixinta maaliyadeed ee **Mogadishu Alport corp. Albayrak-Somalia** oo soo martay baaris madax-bannaan, si loo caddeeyo sax ahaanshaha saamiga ay Dowladda ka heshay. Sidaa darteed, dakhliga heshiiska dheef-wadaagga oo dhan **US\$38,081,786.42** ayaan si madax-banaan u xaqiijin karin in uu yahay mid si sax oo xaq-soor leh loo go'aamiyay oo ay leedahay Dowladda.

Si loo hirgeliyo Qoddobka 11^{aad} (11.2.3 iyo 11.2.4) ee heshiiska dheef-wadaagga ah ee Shirkadda **Mogadishu Alport corp. Albayrak-Somalia**, kala dhexeeya dowladda Soomaaliya, kaas oo faraya in saamiga Dowladda lagu saleeyo Warbixi-Maaliyadeedka Sannadlaha ah ee Shirkadda **Mogadishu Alport Corporation (Albayrak-Somalia)** oo soo martay Baaris Hantidhowr madax bannaan Xafiiska Hantidhowrka Guud waxa uu Wasaaradda Dekadaha iyo Gaadiidka Badda, Maamulka dekedda Muqdisho iyo shirkadda **Mogadishu Alport Corporation (Albayrak-Somalia)** kala shaqeeyey hirgelinta Baaris uu fulinayo Hantidhowre madax bannaan, iyada oo shirkaddu ballan-qaaday fulinta howshaas.

Dhinaca kale Shirkadda gaarka loo leeyahay ee **Favori LLC**, oo heshiis dheef-wadaag ah kula jirta Dowladda Federaalka Soomaaliya waxa ay soosaartay sanadka 2025, dakhli dhan **US\$29,713,321.00**, sida ku xusan heshiiska dheef-wadaagga, Dowladda Soomaaliya waxa ay waxa ay xaq u leedahay in dakhligaas guud (Gross revenue), ee shirkaddu qabatay ay ka hesho **25%**, Saamiga dowladda ee dakhliga guud ayaa ah **US\$7,428,330.25**. hase yeeshee, sida ay muujisay Warbixinnada Maaliyadeed ee DFS 2025, Wasaaradda Maaliyadda ee DFS waxa ay shirkadda **Favori LLC** ka heshay dakhli dhan **US\$4,153,948.72** oo keliya, taas oo ka dhigan in dakhli dhan **US\$3,274,381.53**, oo kamid ah Saamiga Dowladda ee heshiiska uu ka maqan yahay DFS.

Maqnaanshaha qayb kamid ah Saamiga dowladda ee heshiiska dheef-wadaagga ayaa muujineysa in dakhli u bislaaday dowladda uu uga maqan yahay Qandaraaslaha iyada oo Qandarasluhu dhab ahaan og yahay dakhligaas ka maqan dowladda, taasina waxa ay wiiqeysa dhammaystirnaanta iyo saxnaanta dakhliga heshiiska dheef-wadaagga ah.

3.2. Isku-xirnaanta Nidaamyada Lagu Uruuriyo Dakhliga iyo Nidaamka Guud ee SFMIS oo Qabyo ah

Qodobka 27^{aad} ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, 2019, waxa uu farayaa in macaami-lada maaliyadeed ee dowladda lagu diiwaangeliyo hannaanka maareynta maaliyadda guud ee la ansixiyey, haddaba Intii lagu guda jiray baarista Warbixinta Maaliyadeed DFS 2025, waxa aan ogaanay in Wasaaradda Maaliyaddu ay adeegsato nidaamyo maaliyadeed oo kala duwan oo lagu ururiyo dakhliga Dowladda, Waxa aan sidoo kale helnay in Dowladda ay horumar ka samaysay isku-xirnaanta qaar ka mid ah nidaamyadan iyo SFMIS.

Haseyeeshee, intii lagu jiray baarista Maaliyadeed waxa ay muujisay in geeddi-socodka isku-xirnaanta nidaamyada ururinta dakhligu uusan weli si buuxda u dhammaystirmin, maadaama qaar ka mid ah nidaamyada ay weli si toos ah ula falgelin uguna xirnayn SFMIS-ka ama ay ku tiirsan yihiin habab kale oo lagu aqoonsado dakhliga, sidaas awgeed, waxaa weli muhiimad weyn leh joogteynta iyo sii wedista dadaallada lagu dhammaystirayo isku-xirnaanta Nidaamyada Macluumaadka ee xiriirka la leh Ururinta dakhliga dowladda iyo sidoo kale howlaha lagu xoojinayo hababka is-waafajinta ee u dhexeeya nidaamyadaas iyo SFMIS. Sida ku faahfaahsan shaxda hoose:

#	Magaca Nidaamka	Hay'adda Maamusha
1	Nidaamka Diiwaangelinta Ganacsiga Soomaaliyeed (SBRS)	Wasaaradda Ganacsiga iyo Warshadaha
2	Nidaamka Maamulka Canshuuraha Elektaroonigga (ETAS)	Wasaaradda Maaliyadda
3	Nidaamka Canshuurta Waddo Marista	Wasaaradda Maaliyadda
4	Nidaamka Canshuurta Dakhliga Kirada	Wasaaradda Maaliyadda
5	Nidaamka Dal-ku-galka Elektaroonigga ah	Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda
6	Nidaamka Elektaroonigga ah ee Dakhliga aan Canshuurta ahayn	Wasaaradda Maaliyadda
7	Nidaamka Ururinta Dakhliga ee Dowladda Federaalka Soomaaliya	Wasaaradda Maaliyadda

4. ARRIMAHA BAARISTA MUHIIMKA U AH

Arrimaha baarista muhiimka u ah waa kuwa marka loo eego go'aankeena xirfad iyo aqooneed, aan u aragnay in ay ahmiyad u leeyihiin baarista warbixin maaliyadeedka sannadkan. Si guud ahaaneed arrimahan ayaan diiradda ku saarnay xilligii aan ku gudajirnay baarista warbixinta maaliyadeed, balse qayb kama aha xiriirna lama laha aragti baariseedkeena, mana jirto aragti kale oo aan arrintan ka soo saareyno, sidaas oo ay tahay waxa aan xagga hoose ku soo bandhigeynaa sharraxaad ku aaddan sida baaristu diiradda loogu saaray.

Soo bandhigidda sharraxaaddani waxa ay ku saabsan tahay gudashada Masuuliyadaha Hantidhowrka Guud ee warbixinta baarista Maaliyadeed oo aan u fuliynay innaga oo isticmaalayna habraac baariseedka ugu habboon si aan u qiimeeyno khataraha ahmiyadda leh una soo saarno haddii ay jiraan arrimo kale oo ku jira warbixin-maaliyadeedka DFS oo Xisaabiyaha guud ee dowladdu u la soo wadaagay Xafiiska Hantidhowrka Guud 30 April, 2026.

4.1. Qalabka PoS oo aan Laga Faa'iidayan

- Sida ku xusan tixraaca 3.21 ee warbixinta maaliyadeed, maamulka Wasaaradda Maaliyaddu waxa uu soo bandhigay kharashaad hantiyeed kaas oo qiimahiisu dhan yahay **US\$74,636,271.00**, Kharashaadkaas ay dowladdu gashay waxa ku jira **US\$3,337,200.00**, kaas oo la xiriiira Heshiis **Lr. FGS/MOF/SSS/2023/011**, oo ay Wasaaradda Maaliyaddu u gashay soo iibinta, rakibidda, tijaabinta iyo hawlgelinta ni-daamka Point of Sale (PoS).
- Wasaaradda Maaliyaddu waxay heshiiskan la saxiixatay 3 Abriil 2023 shirkadaha PayGo Financial Teknoloji Hizmetleri A.S iyo Lettra Teknoloji A.S Joint Venture. Heshiisku wuxuu dhigayay in lacagaha lagu bixiyo marxalado ku xiran heerar hore loo qeexay, sida keenis-ta qalabka PoS, rakibidda iyo tijaabinta aqbalaadda (acceptance testing).

Habraacyada baarista ee lagu fuliyey arrintan muhiimka ah

- Waxa aan dib-u-eegis ku sameeynay jadwalka lacag-bixinta heshiiska iyo lacagihii la bixiyey. Waxa aan xaqiijinay in bixintii labaad, oo ahayd **US\$1,001,160.00**, la bixiyey intii lagu jiray sannad-maaliyadeedka baaristu khusayso ee 2025, isla markaana qiimaha guud ee heshiiska si buuxda loo bixiyey.
- Sidoo kale, waxa aan tagtay goobta uu yaalo qalabka PoS-ka si aan u xaqiijno jiritaanka iyo xaaladda ay ku sugan yihiin, waxa aan ogaanay in qalabka lagu kaydiyey meel aan ku habooneyn oo aan la rakibin, la hawlgelin, isla markaana aan loo adeegsan ujeeddadii loogu talagalay.
- Intaa kadib, waxa aan maamulka ka codsanay dukumentiyada taageeraya, oo ay ka mid yihiin warbixinnada rakibidda, shahaadooyinka aqbalaadda, warbixinnada hawlgelin-ta iyo dukumentiyada caddaynaya wareejinta shaqada dhameystirka shaqada. Hase yeeshee, maamulka ma soo gudbin caddeymo baariseed oo ku filan kuna habboon si ay u xaqiijiso in shuruudihii iyo heerarkii lagu sii dayn lahaa lacagaha qandaraaska la fuliyey ka hor bixinta lacagaha, gaar ahaan bixintii labaad ee qandaraaska.

Sababta Arrintan Loogu Tixgeliyey Arrin Muhiim u ah Baarista:

- Arrintan waxa aan u tixgelinnay arrin muhiim u ah baarista, maadaama qiimaha heshiisku dhan yahay **US\$3,337,200.00**, taas oo ka dhigan hanti qiimo weyn leh oo ay leedahay Dowladda Federaalka Soomaaliya. Sidoo kale, lacag-bixinta qandaraasku waxay ku xirnayd heerar waxqabad oo muhiim ah, sida keenista qalabka, rakibidda, tijaabinta iyo diyaarinta hawlgelinta nidaamka.
- Maqnaanshaha dukumentiyada muujinaya rakibidda, hawlgelinta, aqbalaadda shaqada iyo wareejinta qalabka wuxuu kordhinayaa khatarta ah in lacagaha la bixiyey aysan ku salaysnayn dhammaystirka waajibaadyadii qandaraaska. Intaa waxaa dheer, qalabka PoS-ka oo wali yaalla meel aan ku habooneyn, isla markaana aan la adeegsan, wuxuu muujinayaa khatar la xiriirta hufnaanta isticmaalka lacagaha dowladda iyo in aan weli la gaarin ujeeddooyinkii loogu talagalay.

5. WAXYAABAHA KALE EE MUHIIMADDA LEH

	Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga	1
	Baarista Nidaamyada Tiknoolojiyadeed (IS Audits)	2
	Baarista Mashaariicda Bangiga Adduunku Maalgeliyo	3

5.1. Baarista U Hoggaansanaanta Sharciga

Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxa uu Baarista U-Hoggaansanaanta Sharciga ku sameeyay laba iyo labaatan (22) hay'adood oo ka tirsan hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya, iyada oo baarista khuseysay Sannad Maaliyadeedka Dhamaaday 31^{da} December 2025.

Baaristu waxa ay qiimeysay heerka ay hay'adaha la baaray ugu hoggaansameen shuruucda, xeerarka, iyo habraacyada shaqo ee khuseeya arrimaha loo xulay baarista. Hay'adaha la baaray waxa ay ka kala ahaayeen hay'adaha maamulka, difaaca iyo amniga, dhaqaalaha, iyo adeegga bulshada.

Baaristu waxa ay diiradda saartay afar (4) mowduuc oo waaweyn (Focus Area), kuwaas oo laga sii faahfaahiyay toddoba iyo toban (17) walxo oo baariseed (Subject Matters), waxa ayna kala yihiin mowduucyadaas:

1. Walxaha la xiriira iibka;
2. Walxaha la xiriira maamulka Shaqaalaha;
3. Walxaha la xiriira maamulka hantida;
4. Walxaha la xiriira nidaamyada xakamaynta dowladda.

Arrimaha la baaray waxa ay muhiim u yihiin xoojinta u-hoggaansanaanta sharciga, hagaajinta nidaamyada xakamaynta gudaha, ilaalinta hantida dowladda, iyo kor u qaadista hufnaanta maamulka hay'adaha dowladda.

5.2. Baarista Nidaamyada Tiknoolojiyadeed (IS Audits)

Baarista Nidaamyada Macluumaadka waxay xooga saartaa qiimeynta amniga, saxnaanta, iyo wax-ku-oolnimada nidaamyada tiknoolajiyadda ee lagu maamulo xogta iyo hawlaha hay'adaha Dowladda, iyada oo ujeedadu tahay in la xaqiijiyo in nidaamyadu yihiin kuwo lagu kalsoonaan karo, isla markaana caawinaya go'aan qaadashada iyo isla xisaabtanka, waxaa si gaar ah diiradda loogu saaray meertada xogta (data lifecycle), laga bilaabo ururinta xogta, kaydinteeda, isticmaalkeeda, ilaalinteeda, ilaa tirtirkeeda. Waxa aan sameeynay sannadkan laba baaris iyo laba dabagal oo kala ah:

1. Baarista Nidaamka Maareynta Waxbarashada Heerka Sare (HEMIS);
2. Baarista Nidaamka Shaqaalaha ee Guddiga Shaqaalah Rayidka (HRIS);
3. Dabagalka Baarista Nidaamka Diiwaangelinta Ganacsiga Soomaaliyeed (SBRS);
4. Dabagalka Baarista Nidaamka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliya (SFMIS).

5.3. Baarista Waxqabadka

Sannadkan, Xafiiska Hantidhowrka Guud ee JFS wuxuu sameeyey laba Baaris Waxqabad oo diiradda lagu saaray adeegyo asaasi ah oo si toos ah u saameeynaya nolosha bulshada. Baarista koowaad waxay khusaysay adeegyada la siiyo maxaabiista ku jirta Xabsiga Dhexe ee Xamar iyo Xabsiga Guud ee Muqdisho, halka Baarista labaad ay khusaysay bixinta adeegyada caafimaadka hooyada. Labada Baaris waxay muujiyeen daldaloolo ka jira maamulka, gaarsiinta adeegyada, iyo tayada adeegyada la bixiyo.

Marka laga hadlayo adeegyada la siiyo maxaabiista, waxaan ku oggaanay daldaloolo ka jira xaaladaha nololeed, nafaqada, nadaafadda, iyo adeegyada caafimaadka. Baarista waxa aan ku ogaanay in Ciidanka Asluubta Soomaaliyeed uusan si ku haboon u maamulin adeegyada iyo xaaladaha nololeed ee ay maxaabiistu u baahan yihiin si ay u helaan nolol bani'aadamnimada oo u qalanta. Dhanka kale, Baarista adeegyada caafimaadka hooyadu waxay muujisay caqabado la xiriira hirgelinta qorshayaasha caafimaadka, gaarsiinta adeegyada, isku duwidda hay'adaha, helitaanka xarumaha daryeelka degdegga ah, iyo tayada xogta caafimaadka. Guud ahaan, labadan Baaris waxay muujiyeen baahi cad oo loo qabo in hay'adaha ay xoojiyaan maareynta, qoondaynta khayraadka, iyo tayada adeegyada si loo xaqiijiyo adeegyo wax ku ool ah oo gaara dadka loogu talagalay.

5.4. Baarista Mashaariicda Bangiga Adduunku Maalgeliyo

Sannad maaliyadeedkii dhammaaday 31^{da} December 2025, waxa aan sidoo kale baaris ku sameeynay labaatan iyo labo (22) mashruuc ee uu maalgeliyo Bangiga Adduunka, Todobo (7) mashruuc oo uu maalgeliyo Bangiga Horumarinta Afrika (AfDB), iyo 1 mashruuc oo uu maalgeliyo Sanduuqa Caalamiga ah ee Horumarinta Beeraha (IFAD).

6. MASUULIYADDA MAAMULKA SARE IYO SARAAKIISHA U XILSAARAN WAAJIBAADKA WARBIXINNADA MAALIYADEED

Madaxda sare iyo Saraakiisha Maamulka ee Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Wakaaladaha oo ah dhammaan Hay'adaha Dowladda (MDAs) oo ay ka mid yihiin Wasiirada, Agaasimayaasha Guud iyo Xoghayayaasha Joogtada ah, waxa ay mas'uul ka yihiin diyaarinta iyo bandhigista warbixinnada maaliyadeed oo sax ah, si waafaqsan Heerarka Caalamiga ah ee Xisaabaadka Dowladda (IPSAS), sida uu u qeexay Golaha Heerka Caalamiga ah ee Xisaabaadka Dowladda (PSASB), iyaga oo dhammaan Warbixinnadooda saddexdii biloodba mar u gudbinaya Xafiiska Xisaabiyaha Guud, warbixin ku saabsan dakhliga iyo kharashka u gudbiya Xisaabiyaha Guud, kuwaas oo ay ka mid yihiin warbixin xisaabeedka dhaqdhaqaaq lacagta caddaanka ah, kash-figa xisaabta dakhliga iyo kharashka ee Sanduuqa Mideysan ee Qaranka, iyo bayaan maaliyadeedka (Balance Sheet) oo ay ku lifaaqan tahay kuna caddahay ra'sul-maalka iyo daymaha lagu leeyahay dhammaadka muddada seddex biloodlaha ah iyo wixii tafaasiil kale kaddibna Xisaabiyaha Guud ayaa diyaariya warbixin Maaliyadeedka Sanadlaha ah oo aan baaris marin ee Sanduuqa Mideysan ee Qaranka una gudbiya Hanti Dhowraha Guud muddo aan afar bilood ka badnayn ka dib dhammaadka sannad maaliyadeedkaas.

Maamulku waxa uu sidoo kale mas'uul ka yahay xaqiijinta xakamaynta gudaha oo wax-ku-ool ah, taas oo lagama maarmaan u ah suurtagelinta diyaarinta warbixinno maaliyadeed oo ka madax-bannaan khaladaad ahmiyad leh (material misstatement), ha ahaadeen kuwa ka dhashay wax is-dabamarin (fraud) ama khalad (error), sidoo kalena waxa ay mas'uul ka yihiin qiimeynta wax-ku-oolka ah ee xakamaynta gudaha, maareynta khatarta iyo nidaamyada maamulka.

Madaxda sare iyo Saraakiisha Maamulka ee leh mas'uuliyadda waxaa saaran in ay hubiyaan in hawlaha, macaamilka maaliyadeed iyo xogta lagu muujiyey warbixinnada maaliyadeed ay waafaqsan yihiin sharciga iyo habraacyada kale ee khuseeya ama la adeegsan karo, sidoo kalena ay xaqiijiyaan in kheyraadka guud ee dowladda loo adeegsaday si hufan oo wax-ku-ool ah, loona isticmaalay habkii iyo ujeeddadii loo qoondayey.

Dhammaan dadka loo idmaday maamulka iyo kormeerka waxa ay mas'uul ka yihiin kor-joogtaynta hannaanka warbixinnada maaliyadeed, dib-u-eegista in go'aannada maamul iyo kuwa maaliyadeed ay u-hoggaansan yihiin Shuruucda una adeegayaan xaqiijinta maslaxadda dowladda.

7. MAS’UULIYADDA HANTIDHOWRAHA GUUD EE BAARISTA WARBIXINTA MAALIYADEED

Mas’uuliyaddaydu waa in aan baaris hantidhowr oo madax-bannaan ku sameeyo warbixinta maaliyadeed ee aan baarista marin, taas oo uu ii soo gudbiyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dowladda, si loo ilaaliyo Hantida Qaranka iyo in aan bixiyo talo hantidhowriseed lagu xoojinayo isla-xisaabtanka, daah-furnaanta iyo hufnaanta nidaamka maamulka maaliyadda ee Dowladda, sidoo kalana aan fuliyo noocyada kale baarista sida Baarista u-hoggaansanaanta sharciga, Wax-qabadka, Macluumaadda Teknolajiyadda iyo Baarisyada kale ee gaarka ah, si waafaqsan Heerarka Caalamiga ah ee Hay’adaha Hantidhowrka sare (ISSAIs), isla markaana aan soo saaro warbixin hantidhowr. Si gaar ah warbixinta baarista maaliyadeed waxa aan raaciyaa “aragtida baarista Xafiiska Hantidhowrka Guud ee ku aaddan xisaabaadka dowladda” (Audit opinion), sida ku cad Qodobka 6^{aad} ee Sharciga Xafiiska Hantidhowrka Guud, Lr. 14, 2023, waxa aan warbixinnadaas u gudbiyaa labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, Ra’isalwasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya iyo Madaxweynaha JFS, sida ku cad Qodobka 177^{aad} ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Intaa waxaa dheer, Qodobka 177^{aad} ee Dastuurka iyo Qodobbada 5aad iyo 6aad ee Sharciga Hantidhowrka Guud ee Federaalku waxa ay si gaar ah iigu waajibinayaan in aan soo bandhigo gunaanad ku saabsan in, “dhammaan arrimaha ahmiyadda leh, macaamilka maaliyadeed iyo xogta lagu muujiyey warbixinnada maaliyadeed ay waafaqsan yihiin sharciga iyo xeerarka kale ee khuseeya ee lagu hago iyo in aan Baaris ku sameeyo in kheyraadka guud ee dowladda loo adeegsaday si hufan oo wax-ku-ool ah, loona isticmaalay habkii iyo ujeeddadii loo qoonday.

Waxa kale oo Dastuurka iyo Shuruucada Maaliyadda iyo Hantidhowrku I farayaan in aan tixgelin gaar ah siiyo xoojinta hannaanka xakamaynta gudaha ee hay’adaha dowladda, si aan u bixiyo hubinti ku saabsan waxtarka xakamaynta gudaha, maareynta khatarta iyo wax-ku-oolnimada hannaanka iyo nidaamyada maamulka iyo kormeerka ee hay’adaha dowladda.

Sidoo kale, waxaa i saaran xoojinta iskaashiga, isuduwidada hawlaha shaqo ee ka dhaxeeya Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Federaalka iyo Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedyada iyo in aan taageero farsamo u fidiyo horumarinta xirfadaha Xafiisyada Hantidhowrka Guud ee dowlad-goboleedyada si waafaqsan Qodobka 177^{aad} ee Dastuurka JFS iyo Sharciga Hantidhowrka Guud.

Faahfaahin intaas ka badan oo ku saabsan mas’uuliyadaha Hantidhowraha Guud waxaa laga heli karaa mareegta rasmiga ah ee Xafiiska Hantidhowraha Guud ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya: <https://oag.gov.so/audit-authority>.

Xafiiska Hantidhowrka Guud, waa hay'ad madax-bannaan, si waafaqsan Qodobka 177^{aad} ee Dastuurka, Qodobbada 2^{aad} 4^{aad} iyo 20^{aad} ee Sharciga Hantidhowrka Guud, iyo sidoo kale ISSAI 130 ee Xeerka Anshaxa (Code of Ethics). Waxaan aan sidoo kale gataa waajibaadyada kale ee anshaxeed (other ethical responsibilities) si waafaqsan ISSAI-yada iyo shuruudaha kale ee anshaxa ee khuseeya fulinta baaritaannada hantidhowrka hay'adaha dowladda ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

**Mudane. Axmed Ciise Guutaale,
Hantidhowraha Guud, JFS**

30 June, 2026

Muqdisho, Soomaaliya

8. Hannaanka mideysan ee Warbixinada Maaliyadeed (Consolidated Financial Statements)

Si waafqsan Sharciyada Maareynta Maaliyadda Guud iyo Hantidhowrka Guud Nidaamka soosaarista Warbixinta Maaliyadeed ee dowladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ku saleysan yahay hannaanka mideysan ee Warbixinada Maaliyadeed (Consolidated Financial Statements) Saraakiisha idman ee hay'ad-dowladeed kasta oo Qoondo sama kab ku leh miisaaniyadda dowladda Federaalka ayaa saddexdii biloodba mar warbixin ku saabsan dakhliga iyo kharashka u gudbiya Xisaabiyaha Guud, kuwaas oo ay ka mid yihiin warbixin xisaabeedka dhaqdhaqaaq lacagta caddaanka ah, kashfiga xisaabta dakhliga iyo kharashka ee Sanduuqa Mideysan ee Qaranka, iyo bayaan maaliyadeedka (Balance Sheet) oo ay ku lifaaqan tahay kuna caddahay ra'sul-maalka iyo daymaha lagu leeyahay dhammaadka muddada seddex biloodlaha ah, iyo wixii tafaasiil kale kaddibna Xisaabiyaha Guud ayaa diyaariya warbixin Maaliyadeedka Sanadlaha ah oo aan baaris marin ee Sanduuqa Mideysan ee Qaranka una gudbiya Hanti Dhowraha Guud muddo aan afar bilood ka badnayn ka dib dhammaadka sannad maaliyadeedkaas.

Hanti Dhowraha Guud ayaa baaris ku sameeya warbixin Maaliyadeedka Sanadlaha ah ee Sanduuqa Mideysan ee Qaranka kaddibna Warbixintiisa baarista Maaliyadeed ee Sanadlaha ah oo la hantidhowray ama baaris martay (audited financial statement) u gudbiya Baarlamaan-ka Federaalka, Madaxweynaha JFS iyo Ra'isalwasaaraha Xukuumadda sidaas oo kalalana la wadaagga Warbiixntaas Wasiirka Maaliyadda iyo Xisaabiyaha Guud 30^{ka} bisha June sanad kasta.

Xafiiska Hantidhowrka Guud ayaa ku faafiya warbixinta baarista Maaliyadeed ee Sanadlaha ah ee Sanduuqa Mideysan ee Qaranka faafinta rasmiga ah dowladda si caam ahna ugu bandhiga Dadweynaha hal bil ka dib marka uu Warbixintiisa u gudbiyo Labada Aqal ee BFS.



DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

XAFIISKA XISAABIYAHA GUUD



2025

WARBIXIN MAALIYADEEDKA AAN LA BAARIN EE SANNADKA KU DHAMAADAY 31^{DA} DISEMBER 2025



APRIL 2026

Canshuurta Dakhliga, Iyo Faa'iidada	16,154,238	15,789,362	18,662,241	24,384,014	36,170,675
Canshuurta Agabka Iyo Adeega	21,293,612	23,429,410	32,778,666	38,614,823	51,419,944
Canshuurta Furdada	91,054,110	108,974,991	116,169,148	154,082,799	168,875,350
Wadarta Dakhliga Canshuurta	\$139,529,217	\$151,637,810	\$181,691,842	\$224,631,762	\$266,763,916
% Koror/Naaqus	-10%	17%	12%	24%	19%

WARBIXINTAAN WAXAA LOO DIYAARIYEEY SI WAAFIQASAN XEERKA CAALAMIGA AH XISABAADKA – IPSAS

CASH BASIS 2017

WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU
DHAMAADAY 31^{DA} DISEMBER 2025

SANNAD MAALIYADEEDKA

1^{DA} JANAAYO – 31^{DA} DECEMBER 2025

Waxaa soo saaray warbixintaan

XAFIISKA XISAABIIYAHGA GUUD EE DAWLADDA

WAXAAD KA HELI KARTAA WARBIXINTAAN BOGGA XAFIISKA XISAABIIYAHGA
GUUD

www.oags.gov.so

Dhismaha Wasaaradda Maaliyadda
Degmada Shangani
Mogadishu – Somalia
Email: reporting@oags.gov.so

TUSMADA WARBIXINTA

LIISKA SHAXAHA	IV
LIISKA JAANTUSYADA	V
CADDAYNTA WAAJIBAADKA	1
FAALLO GUUD	2
DIB U HABAYNTA MAARAYNTA MAALIYADDA GUUD – 2025	2
<i>Dib Habaynta Guud ee Maarayta Maalaiyada</i>	3
DIB-U-HABAYNTA DAKHLIGA – 2025	5
MACLUUMAADKA ADEEGYADA LA BIXIYAY - 2025 – QODOBBADA MUHIIMKA AH	8
MIISAANIYADDA SANNADKA 2025 IYO FALAQAYNTA WARBXINTA	22
DHABTA IYO MIISAANIYADDA DAKHLIGA EE SANNADKA 2025	23
ISBADALADA DAKHLIGA DAWLADDA - 2021-2025	27
DAKHLIGA GUDAHA.....	28
DEEQAHA DIBADDA.....	32
DHABTA IYO MIISAANIYADDA KHARASHAADKA SANNAD MAALIYADEEDKA 2025	35
ISBADALKA KHARASHAADKA DAWLADDA SANNADAHA - 2021-2025	39
DAYMAHA DAWLADDA 2021-2025.....	52
MUUQAALADA MAALIYADEED EE LA ISKU DARAY.....	54
MUUQAALKA LACAG QABASHADA IYO BIXINTA.....	54
MUUQAALKA ISBARBARDHIG DHABTA IYO MIISAANIYADDA – 2025	55
MACLUUMAAD LA XIRIIRA MUUQALADA MAALIYADEED	56
1.0 WARBIXIN GUUD	56
2.0 <i>Xeerar Xisaabeedka Dawladda</i>	56
3.0 FAAHFAAHINO LA XIRIIRA MUQAAALADA WARBIXINTA.....	66
4.0 FAAHFAAHINO DHEERI	80
LIFAAQA 1 ^{AAD} : HAY’ADAHA MIISAANIYADDA EE SANNADKA 2025	83
LIFAAQA 2 ^{AAD} : FAAHFAAHINTA ISTICMAALKA MISAANIYADDA KHARASHAADKA JOOGTADA AH - 2025	85
LIFAAQA 3 ^{AAD} : FAAHFAAHINTA ISTICMAALKA MISAANIYADDA KHARASHAADKA MASHAARIICDA - 2025 ...	107
LIFAAQA 4 ^{AAD} : LACAG BIXINNADA KALE	129
LIFAAQA 5 ^{AAD} : ISTICMAALKA MIISAANIYADDA KHARASHAADKA GUUD EE HAY’ADAHA DAWLADDA 2025.....	130
LIFAAQA 6 ^{AAD} : FAAHFAAHINTA DAYMAHA	133
LIFAAQA 7 ^{AAD} : HAYA’DAHA ISTICMAALAY LACAGA DHEERAADKA	134

LIISKA SHAXAHA

Shaxda 1 ^{aad} : Tirada Guud ee Dugsiyada La Qiimeeyay, Dowlad-goboleed.....	11
Shaxda 2 ^{aad} : Fasallada iyo Adeegyada ee Lagu Kala Saaray Dowlad-goboleed.....	12
Shaxda 3 ^{aad} : Heerka Horumarka Kaabayaasha (%)	12
Shaxda 4 ^{aad} : Qaybinta Agabka Dugsiyada (Furniture)	12
Shaxda 5 ^{aad} : Qaybinta Deeqaha ee Dowlad-goboleed kasta.....	13
Shaxda 6 ^{aad} : Ka Qaybgalayaasha Tababarka iyo Doorarka	14
Shaxda 7 ^{aad} : Qaybinta Agabka Waxbarashada ECE (TLMs) ee Degmooyinka.....	15
Shaxda 8 ^{aad} : Tirada Ardayda u Fariisatay Imtixaanka Fasalka 8 ^{aad} ee Dowlad-goboleed.....	15
Shaxda 9 ^{aad} : Horumarka Hirgelinta Barnaamijka Dib-u-soo-kabashada Soomaaliya	21
Shaxda 10 ^{aad} : Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga 2025	23
Shaxda 11 ^{aad} : Faahfaahinta Deeqda la helay Sannadka 2025	25
Shaxda 12 ^{aad} : Dhabta Dakhliga ee 2021-2025	27
Shaxda 13 ^{aad} : Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha ee sannadaha 2021-2025.....	28
Shaxda 14 ^{aad} : Dhabta Qaybaha Dakhliga Canshuraha – 2021-2025	30
Shaxda 15 ^{aad} : Dakhliyada Kale ee sannadaha- 2021-2025	32
Shaxda 16 ^{aad} : Deeqaha Dibadda, 2021-2025	32
Shaxda 17 ^{aad} : Dhabta Deeqaha labo dhinacle ah - 2021-2025.....	33
Shaxda 18 ^{aad} : Dhabta Deeqda Dhinacyada ee 2021-2025	33
Shaxda 19 ^{aad} : Deeqaha Kabka iyo Deeqaha Mashaariicda.....	33
Shaxda 20 ^{aad} : Miisaaniyadda Iyo Dhabta Kharashaadka Sannadka 2025	35
Shaxda 21 ^{aad} : Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Hay'adaha Dawladda - 2025	36
Shaxda 22 ^{aad} : Dhabta Kharashaadka Hay'adaha - 2021-2025	39
Shaxda 23 ^{aad} : Noocyada Kharashaadka la Bixiyey, 2021-2025	40
Shaxda 24 ^{aad} : Mushaaraadka Shaqaalaha, Sannadaha ee 2021-2025	42
Shaxda 25 ^{aad} : Mushaaraadka Hay'adaha Adeega Amnig iyo Hay'adaha kale.....	42
Shaxda 26 ^{aad} : Isticmaalka Agabka iyo Adeega- sannadaha 2021-2025	43
Shaxda 27 ^{aad} : Khidmadda Maalgashiga, 2021-2025	46
Shaxda 28 ^{aad} : Kaalmo Dhaqaale, 2021-2025.....	47
Shaxda 29 ^{aad} : Deeqaha la bixiyey, 2021-2025.....	47
Shaxda 30 ^{aad} : Deeqaha la siiyo Dawlad Goboleedyada, 2021-2025	48
Shaxda 31 ^{aad} : Faa'iidada Bulshada, 2021-2025	48
Shaxda 32 ^{aad} : Kharashaadka Kale.....	48
Shaxda 33 ^{aad} : Hantida aan Maaliyadda ahayn, 2021-2025	49
Shaxda 34 ^{aad} : Dib u bixinta Daymaha, 2021-2025	49
Shaxda 35 ^{aad} : Dakhliga Gudaha iyo Kharashaadka Dawladda, 2021-2025.....	50
Shaxda 36 ^{aad} : Dakhliga Gudaha Vs Mushaaraadka Shaqaalaha, 2021-2025.....	51
Shaxda 37 ^{aad} : Daymaha Dawladda Gudaha/Dibada	52
Shaxda 38 ^{aad} : Dayma Mudada Fog	53

LIISKA JAANTUSYADA

Jaantuska 1 ^{aad} : ilaha Dakhliga Dawladda ee sannad maaliyadeedka 2025	26
Jaantuska 2 ^{aad} : Saamiga Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibada.....	28
Jaantuska 3 ^{aad} : Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda	28
Jaantuska 4 ^{aad} : Qaybaha Dakhliga Gudaha 2021-2025	29
Jaantuska 5 ^{aad} : Saamiga Dakhliga Canshuuraha & Dakhliyada Kale.....	29
Jaantuska 6 ^{aad} : Kororka/Naaquska Dakhliga Gudaha ee Rubacyada - 2021-2025	30
Jaantuska 7 ^{aad} : Wadarta Dakhliga Gudaha ee Rubacyada- 2021-2025.....	30
Jaantuska 8 ^{aad} : Saamiga Qaybaha Dakhliga Canshuuraha ee Rubaca Afaraad	31
Jaantuska 9 ^{aad} : Kharashaadka Joogtada	37
Jaantuska 10 ^{aad} : Kharashaadka Mashaariicda ee Sannadka 2025	38
Jaantuska 11 ^{aad} : Saamiga Kharashaadka Hay'addaha Dawlada	39
Jaantuska 12 ^{aad} : Kharash Bixinta Rubaclaha, 2021-2025	41
Jaantuska 13 ^{aad} : kororka/Naaquska Kharash Bixinta Rubaclaha ah 2021-2025.....	41
Jaantuska 14 ^{aad} : Saamiga Mushaarka Hay'addaha Amniga & Hay'addaha kale	42
Jaantuska 15 ^{aad} : Kharashaadka Safarka & Shirarka.....	44
Jaantuska 16 ^{aad} : Kharashaadka Hawl fulinta	44
Jaantuska 17 ^{aad} : Kharashaadka Kirooyinka	45
Jaantuska 18 ^{aad} : Kharashaadka kale ee Hawlfulinta	45
Jaantuska 19 ^{aad} : Kharashaadka Hawl galinta Ciidamada.....	45
Jaantuska 20 ^{aad} : Kharashaadka Guud ee kale	46
Jaantuska 21 ^{aad} : Dakhliga Gudaha & Kharashaadka Hawlfulinta	50

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

CADDAYNTA WAAJIBAADKA

Warbixinta maaliyadeed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ee sannad maaliyadeedka ku eg 31^{ka} Diseembar 2025 waxaa loo diyaariyay si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019, iyo sidoo kale Xeerka Caalamiga ah ee Xisaabaadka Hay'adaha Dawladda (IPSAS) – Cash Basis, 2017.

Iyadoo la raacayo Qodobka 8 (2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2019, Wasiirka Maaliyaddu wuxuu leeyahay mas'uuliyadda guud ee maareynta hantida dadweynaha iyo Sanduuqa Qaranka ee la isku daray (National Consolidated Fund), waxaana saaran waajibka ah in uu hayo diiwaannada iyo xisaabaadka saxda ah ee dhammaan dakhliga, kharashaadka, iyo haraaga sanduuqaas midaysan ee qaranka.

Sidoo kale, Qodobka 45 (1) ee sharcigan wuxuu farayaa Xisaabiyaha Guud in uu diyaariyo Warbixinta Sannadlaha ah ee Maaliyadeed ee aan baaris marin (unaudited) ee Sanduuqa Midaysan ee Qaranka, isla markaana uu u gudbiyo Hantidhawrka Guud ugu dambeyn afar bilood gudahood marka uu dhammaado sannad-maaliyadeedka.

Xafiiska Xisaabiyaha Guud wuxuu si joogto ah u diyaariyaa xisaabaadka dawladda, isagoo hubinaya in lagu daro dhammaan macluumaadka iyo faahfaahinta muhiimka ah ee fududeynaya fahamka buuxa ee warbixinnada maaliyadeed iyo dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ee dawladda.

Inta aan ka ognahay, warbixinnada maaliyadeed waxay si sax ah u muujinayaan xaaladda maaliyadeed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya, waxaana nidaamyada hubinta gudaha ay si habsami leh uga soo shaqeeyeen intii lagu jiray sannad-maaliyadeedka ku eg 31^{ka} Diseembar 2025.


Maxamed Maxamuud Cabdulle
Xisaabiyaha Guud ee Dawladda




Xil. Biixi Iiman Cige
Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
30 April, 2026



FAALLO GUUD

DIB U HABAYNTA MAARAYNTA MAALIYADDA GUUD – 2025

XOOJINTA SHARCIYADEED IYO XEERARKA EE LA XIRIIRA MAARAYNTA MAALIYADDA GUUD

Intii lagu guda jiray sannad-maaliyadeedka 2025, Dawladda Federaalka Soomaaliya waxay sii waday horumarinta sharciyada iyo xeerarka la xiriira maaraynta maaliyadda, si loo hourimariyo maamulka dakhliga gudaha, isla markaana loo dhiirrigeliyo horumar dhaqaale oo waara. Dadaalkan waxa uu diiradda saarayay dejinta iyo hirgelinta sharciyo, xeerar, iyo dhismo hay'adeed oo la jaanqaadaya mudnaanta dib-u-habaynta qaranka iyo hab-raacyada ugu wanaagsan ee caalamiga ah.

Dhinaca sharciyada, waxaa la sameeyay horumar muuqda oo lagu casriyeynaayo aasaaska sharci ee nidaamyada maaliyadeed iyo dhaqaale ee Soomaaliya. Dib-u-habaynnada muhiimka ah waxaa ka mid ahaa casriyeynta Sharciga cusub ee Canshuurta Dakhliga si uu u beddelo sharcigii duugoobay, taas oo xoojisay saldhigga sharci ee ururinta dakhliga iyo u hoggaansanaanta sharicyadda dalka.

Wax-ka-beddellada lagu sameeyay sharciyada la-dagaallanka lacag-dhaqidda iyo kuwa qaybta maaliyadeed ayaa kor u qaaday hufnaanta nidaamka maaliyadeed iyo kormeerka, halka dib-u-habaynta qaab-dhismeedka Bangiga Dhexe ee Soomaaliya ay xoojisay madaxbannaanida hay'adeed iyo xasilloonida maaliyadeed.

Sidoo kale, diyaarinta Sharciga Iskaashiga Dowladda iyo Ganacsiga Gaarka loo Leeyahay (PPP Bill) ayaa abuurtay sharciyo xoojinayo maalgashi gaar loo leeyahay ee kaabayaasha iyo bixinta adeegyada dawladda, taas oo taageeraysa kobaca dhaqaale ee muddada dheer.

Iyadoo la taageerayo dadaalladan sharciyeed, dowladda waxay diyaarisay oo dhammeystirtay xeerar muhiim ah oo hirgelinaya siyaasadda maaliyadeed, isla markaana kor u qaadaya hufnaanta maamulka maaliyadda dadweynaha.

Xeerarkan waxaa ka mid ahaa kuwa khuseeya nidaamka maaliyadeed ee shidaalka, maamulka canshuurta dakhliga, dijitaalaynta nidaamyada maaliyadda dadweynaha, qiimeynta canshuuraha furdada, iyo mideynta khidmadaha qaybaha muhiimka ah. dhammaan xeerarkan ayaa yareeyay awoodda go'aan qaadashada shaqsiyeed, xoojiyay hubinta dakhliga, isla markaana kor u qaaday isla-xisaabtanka, gaar ahaan uruurinta dakhliga gudaha iyo maamulka kheyraadka dabiiciga ah.

Soo saarista xeerarka dijitaalaynta maaliyadda dadweynaha ayaa ahayd tallaabo muhiim ah oo lagu casriyeynayo siyaasadaha maaliyadeed iyo kor u qaadidda korjoogtaynta hawlaha maaliyadeed.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Tiirka muhiimka ah ee shaqada la qabtay ayaa ahaa wada-xaajoodka iyo dhammeystirka heshiisyada maaliyadeed iyo heshiis hoosaadka ee lala galay daneeyeyaasha horumarinta. Heshiisyadani waxay fududaynayaan hirgelinta barnaamijyo waaweyn oo horumarineed oo la xiriira adkeysiga magaalooyinka, maaraynta kheyraadka dadweynaha, caafimaadka, biyaha, iyo la qabsiga isbeddelka cimilada.

Iyadoo la siinayo qaab sharci oo adag oo loogu talagalay maalgelinta caalamiga ah iyo wareejinta maaliyadeed ee u dhaxeysa heerarka dowladda, dadaalladani waxay xoojiyeen isku-duwidda u dhaxeysa Dowladda Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka, taas oo adkaysay nidaamka federaalka maaliyadeed iyo taageeridda adeeg bixinta heer deegaan.

Waxaa sidoo kale la gaaray horumar la taaban karo oo ku saabsan siyaasadda canshuuraha, maareynta deynta, iyo dhisidda awoodaha hay'adaha dawladda. Hindisayaasha sida dejinta Axdiga Canshuur-bixiyaha, daabacaadda Buugga Canshuurta Dakhliga, iyo diyaarinta istiraatiijiyadaha maareynta deynta iyo qorshayaasha amaah qaadashada ayaa kor u qaaday hufnaanta maaliyadeed, ka-qaybgalka canshuur-bixiyeyaasha, iyo maaraynta deynta si masuuliyadi ku jirto.

Iskaashiga lala yeeshay hay'adaha caalamiga ah iyo dadaallada tababarkaa haya'ada ay khasayso ayaa sidoo kale xoojiyay diyaar-garowga hay'adaha si ay u hirgeliyaan dib-u-habaynta socda.

Dib Habaynta Guud ee Maarayta Maalaiyada

Sanadkii 2025, waxaa la gaaray horumar muuqda oo laga sameeyay hirgelinta ajendaha dib-u-habaynta Maareynta Maaliyadda Guud (PFM) ee Soomaaliya, gaar ahaan dhinacyada qorsheynta istiraatiijiga ah, xoojinta nidaamyada, xisaabinta iyo warbixinta maaliyadeed, maareynta deynta, dijitaalaynta, iyo dib-u-habaynta iskaashiga dowladda iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay (PPP).

Istiraatiijiyadda Dib-u-habaynta Maaraynta Maaliyadda 2026–2030:

Horumar ayaa laga sameeyay diyaarinta iyo dhammeystirka Istiraatiijiyadda Dib-u-habaynta Maareynta Maaliyadda Guud (PFM) ee 2026–2030, taas oo lagu horumariyay hawlgaal kaalmo farsamo oo ay bixisay Hay'adda Lacagta Adduunka (International Monetary Fund) oo lagu qabtay Nairobi intii u dhaxaysay 2–15 Sebtembar 2025.

Kooxaha farsamo ayaa sameeyay qiimeyn guud oo ku saabsan caqabadaha jira, waxayna qeexeen yoolalka dib-u-habaynta, isla markaana aqoonsadeen tallaabooyinka mudnaanta leh.

Istiraatiijiyadda ayaa la dhammeystiray sanadkii 2025, iyadoo la filayo in la daabaco isla markaana la diyaariyo qorshe hawleed faahfaahsan oo kharashkiisu cad yahay (costed action plan) horraanta sanadka 2026.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Horumarint Xisaabinta iyo Warbixinta Maaliyadeed:

Iyadoo qayb ka ah dib-u-habaynta joogtada ah ee Maareynta Maaliyadda Guud (PFM), u gudbidda nidaam xisaabeed ku saleysan accrual (accrual-based accounting) oo la jaanqaadaya (International Public Sector Accounting Standards) ayaa loo aqoonsaday tallaabo muhiim ah oo lagu horumarinayo u hoggaansanaanta xeerarka iyo habraacyada PFM-ka, isla markaana lagu xaqiijinayo maamul hufan oo daahfuran ee khayraadka dadweynaha.

Sidaas darteed, waxaa sannadka gudihiisa la bilaabay dhowr tallaabo oo lagu xoojinayo warbixinta maaliyadeed, iyada oo la kordhinaayo faahfaahino dheeraad ah (disclosures) si loo gaaro u hoggaansanaan buuxda oo la xiriirta (IPSAS Cash Basis), isla markaana loo dhisayo aasaaska u gudbid tartiib-tartiib ah oo ku saleysan; accrual IPSAS.

Hindisayaasha la hirgeliyay waxaa ka mid ah:

- (i) Ansixinta qorshe hawleed la fulin karo oo lagu horumarinayo muujinta si loo buuxiyo dhammaan shuruudaha Qaybta 1^{aad} iyo Qaybta 2^{aad} ee (IPSAS Cash Basis);
- (ii) Cusboonaysiinta Jaantuska Xisaabaadka Midaysan (Unified Chart of Accounts) si loo hubiyo waafaqsanaanta buuxda ee GFSM 2014 iyo IPSAS;
- (iii) Diyaarinta Buugga Habraacyada Xisaabinta (Accounting Procedures Manual); iyo
- (iv) Dejinta qaab-dhismeed wadatashi iyo ka-qaybgal daneeyayaasha ee hirgelinta IPSAS.

Ballaarinta SFMIS:

Is-afgarad ayaa laga gaaray u dhexeeya Dawladda Federaalka Soomaaliya (FGS) iyo Dawladaha Xubnaha ka ah Federaalka (FMS) oo ku saabsan u gudbidda hal nidaam oo mideysan oo Maareynta Macluumaadka Maaliyadda (FMIS), kaas oo ku dhisan wadatashiyo farsamo oo hore loo sameeyay iyo qiimeyn ku saabsan maaraynta isbeddelka oo ka dhashay baahiyaha la xiriira diyaar-garowga, isku-duwidda, iyo dhisidda awoodda fulinta.

Heshiiskan waxa uu calaamad u yahay tallaabo muhiim ah oo looga gudbayo nidaamyo kala go'an loona guurayo madal maamul maaliyadeed oo mideysan oo isku dhafan. Ballaarinta la qorsheeyay ee (Somalia Financial Management Information System) ayaa la filayaa inay xoojiso hababka fulinta miisaaniyadda, xisaabinta, khasnadda (treasury), iyo warbixinta, isla markaana suurtageliso warbixin maaliyadeed oo isku-dhafan oo waqtigeedu habboon yahay, la isku halayn karo, isla markaana si iskiisa ah uga soo baxa kana kooban FGS iyo FMS.

Danabaynta Maamulka Maaraynta Maaliyadda:

Horumar ayaa laga sameeyay horumarinta dijitaalaynta habraacyada Maareynta Maaliyadda Guud (PFM) iyada oo la soo saaray Xeerarka Dijitaalaynta PFM 2025, kuwaas oo noqday saldhig sharciyeed oo loogu talagalay socodsiinta shaqooyinka elektarooniga ah iyo xakamaynta ku saleysan nidaamyada.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Dib-u-eegis lagu sameeyay habraacyada shaqo (business process reviews) ayaa la fuliyay si loo fududeeyo nidaamyada loona yareeyo tallaabooyinka gacanta ah, halka saxiixyada danabaysan (digital signatures) lagu hirgeliyay (Somalia Financial Management Information System) si loo taageero dib-u-habaynta habraacyada bixinta lacagaha.

Sidoo kale, xakamaynta gudaha ayaa la sii xoojiyay iyada oo la hirgeliyay nidaam dabagalka biilasha (invoice tracking system), taas oo kor u qaadday hufnaanta, raadraaca, iyo kormeerka maamulka bixinta lacagaha.

Qaybta Diyaarinta Miisaaniyadda ee SFMIS:

Qaybta Diyaarinta Miisaaniyadda ee (Somalia Financial Management Information System) ayaa la xoojiyay si ay ula jaanqaaddo baahiyaha shaqo ee Dowladda, oo ay ka mid tahay jaangoynta miisaaniyadda, habraacyada xaqiijinta, iyo socodsiinta shaqooyinka la xiriira diyaarinta, dib-u-eegista, iyo dhammaystirka miisaaniyadda. Qaybtan oo la qorsheeyay in si rasmi ah loo hawlgeliyo inta lagu guda jiro diyaarinta miisaaniyadda sanadka 2027, waxay awood u siin doontaa Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha (MDAs) inay si toos ah ugu diyaariyaan, u xaqiijiyaan, uguna daabacaan miisaaniyaddooda nidaamka dhexdiisa, taas oo yarayn doonta ku tiirsanaanta nidaam ku saleysan Excel, isla markaana kor u qaadi doonta saxnaanta iyo in la dhammaystiro waqtiga ku habboon. Tababarro (Training of Trainers) ah ayaa la siiyay Waaxda Miisaaniyadda, iyadoo sidoo kalena tababarro ayaa la siin doonaa hay'adaha dawladda.

Maaraynta Deynta:

Istiraatiijiyadda Maareynta Deynta ee Muddada Dhexe (MTDS) 2026–2029 ayaa waxaa ansixiyay Golaha Wasiirrada 11-kii Nofeembar 2025, taas oo noqotay MTDS-kii ugu horreeyay ee Soomaaliya yeelato. Istiraatiijiyaddan waxay bixisaa qaab-dhismeed hagaya amaah qaadasho mas'uuliyad leh, waxayna saldhig u noqotay Qorshaha Amaah Qaadashada Sannadlaha ah. Wasaaradd Maaliyadda ayaa sidoo kale waxay horumar ka samaysay Buugga Habraacyada Shaqooyinka (SOP) ee Maareynta Deynta, taas oo xoojisay xakamaynta gudaha, bixinta daymaha, isu-waafajinta, warbixinta daymaha, iyo joogtaynta habraacyada shaqo ee la ansixiyey.

Guud ahaan, horumarka la gaaray sannadka 2025 wuxuu muujinayaa hab dib-u-habeyn PFM oo aad u nidaamsan, isku-duuban, isla markaana ku saleysan nidaamyo casri ah, taas oo dhidibada u aasaysa daahfurnaan maaliyadeed oo ka wanaagsan, hufnaan, iyo isla-xisaabtan ka dhaqan gala guud ahaan hay'adaha Dawladda.

DIB-U-HABAYNTA DAKHLIGA – 2025

Dib u habaynta la hirgeliyey ee la xiriira hagaajinta uruurinta dakhliga gudaha ee sannad-maaliyadeedka 2025 (FY2025) waxa uu ku salaysnaa dadaalo badan oo isku jira dib-u-habaynta siyaasadeed, maamul iyo mid dijitaal ah oo si wadajir ah u xoojiyay ururinta dakhliga canshuuraha iyo dakhliyada kale. Wadarta dakhliga gudaha ayaa gaartay USD 404.3 milyan, taas oo muujinaysa koror sannad-ka-sannad ah oo dhan USD 35 milyan (9.4%) marka loo eego FY2024.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Dakhliga canshuuraha ayaa gaaray USD 280.7 milyan, halka dakhliga aan canshuurta ahayn uu gaaray USD 123.6 milyan. Arrimaha ugu waaweyn ee horseeday waxqabadkan ayaa hoos lagu faahfaahiyay.

Ballaarinta Saldhigga Canshuuraha

Kobaca dakhliga ee sannad maaliyadeedka 2025 waxaa sababay ballaarinta diiwaangelinta canshuur-bixiyeyaasha, gaar ahaan canshuurta dakhliga iyo canshuurta iibka. Ololaha diiwaangelinta ganacsiyada cusub ee qaybaha kala duwan, iyo sidoo kale diiwaangelinta baaxadda leh ee guryaha kirada ah iyo gaadiidka (canshuurta waddooyinka), ayaa ballaariyay baaxadda canshuur uruurinta, isla markaana kor u qaaday dakhliga la ururiyo.

Kororka canshuurta dakhliga waxa uu muujiyay saamaynta ay yeelatay ballaarinta tirada canshuur-bixiyeyaasha iyo xoojinta fulinta waajibaadka canshuuraha shaqsigu, shirkadaha, iyo kirada, iyadoo dakhliga canshuurta uu gaaray USD 44.8 milyan. Kobaca canshuurta iibka waxa uu ka yimid kororka dakhliga laga helo soo dejinta iyo dhaqan-gelinta ee nidaamka jarista canshuurta iibka ee heerka macaamilka (merchant accounts), oo lagu xoojiyay u hoggaansanaanta shirkadaha diyaaradaha, isgaarsiinta, hoteellada, iyo korontada, taas oo keentay in wadarta canshuurta iibka ay gaarto USD 67.3 milyan.

Hagaajinta u hoggaansanaanta iyo fulinta

Xoojinta u hoggaansanaanta iyo tallaabooyinka fulinta ayaa laf-dhabar u ahaa natiijada dakhliga FY2025. Baaritaanno la beegsaday, kormeer dhow oo lagu sameeyay canshuur-bixiyeyaasha waaweyn iyo kuwa dhexdhexaadka ah, iyo hirgelinta joogtada ah ee shuruudca canshuuraha—oo ay ku jirto adeegsiga ganaaxyada—ayaa si weyn uga qayb qaatay kordhinta dakhliga, gaar ahaan canshuuraha gudaha. Diiradda waxa la saaray fulinta shuruudca jira halkii laga kordhin lahaa heerarka canshuuraha, taas oo ka caawisay in dakhliga canshuuraha gudaha laga dhigo mid deggan oo koror joogto ah leh, isla markaana hoos u dhigaysa ku tiirsanaanta dakhliga ganacsiga caalamiga ah.

Ka Faa'iidaydiga Tiknoolajiyadda

Hirgelinta iyo adeegsiga ballaaran ee nidaamyada dijitaalka ah ayaa si weyn saamayn ugu yeeshay kobcinta dakhliga. Dhinaca dakhliga aan canshuurta ahayn, nidaam dijitaal ah oo lagu ururiyo dakhliga aan canshuurta ahayn ayaa hagaajisay bixinta khidmadaha dowladda ee Wasaaradaha, Waaxyaha iyo Hay'adaha, taas oo yaraysay fursadaha musuqmaasuqa, isla markaana keentay in dakhliga aan canshuurta ahayn uu sare u kaco qiyaastii USD 102 milyan sanadkii 2024 ilaa USD 123.6 milyan sanadkii 2025.

Sidoo kale, nidaamyo kale sida (Electronic Tax Administration System), isku xirka canshuurta waddooyinka iyo nidaamka diiwaangelinta gaadiidka ee Wasaaradda Gaadiidka, iyo ballaarinta canshuurta kirada ayaa hagaajiyay ururinta dakhliga, isla markaana suurtageliyay isticmaalka xog isku dhafan si loo xoojiyo uruurinta dakhliga.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Dhaqangelinta buuxda ee nidaamka lagu maamulo canshuur uruurinta furdooyinka (SOMCAS), hirgelinta xeerarka qiimeynta ku saleysan qiimaha buugga (book value), iyo xoojinta kormeerka furdooyinka ayaa kor u qaaday saxnaanta qiimeynta, isla markaana xoojiyay hubinta shaqooyinka ee furdooyinka, gaar ahaan Dekadda Muqdisho iyo Garoonka Diyaaradaha. Inkasta oo horumarradani aysan si buuxda uga hortagi karin xaaladaha ganacsi ee taban, haddana waxay difaaceen hagaajinta dakhliga furdooyinka, waxayna dhidibada u aaseen kobac mustaqbalka marka xaaladaha ganacsi ay hagaagaan.

Wacyigelinta Canshuur-Bixiyayaasha

Marka laga soo tago la shaqaynta ganacsatada iyo daneeyayaasha kale, Wasaaradda Maaliyaddu waxay mudnaan siisay horumarinta adeegyada canshuur-bixiyayaasha si loo dhiso xiriir wanaagsan loona kordhiyo ka-qaybgalka canshuur-bixiyayaasha. Tani waxa lagu sameeyay iyada oo la adeegsanayo habab xiriir oo kala duwan sida daabacaadda shuruucda, xeerarka, iyo barnaamijyada wacyigelinta canshuuraha ee bogagga internetka, baraha bulshada, iyo warbaahintii hore. Dadaalladani waxay ujeeddadoodu tahay kordhinta fahamka canshuur-bixiyayaasha, dhiirrigelinta u hoggaansanaanta iskaa ah, iyo sare u qaadidda wacyiga guud ee anshaxa canshuuraha bixiyaha.

Dib-U-Habaynta Kale

Horumarka laga gaaray Qorshaha Dakhliga ee Muddada Dhexe (Medium Term Revenue Roadmap 2024–2027) ayaa bixiyay qorshe guud oo hagaya dib-u-habaynta sannadka. Tallaabooyinka muhiimka ah waxaa ka mid ahaa dhammeystirka Sharciga cusub ee Canshuurta Dakhliga iyo xeerarkiisa, diyaarinta buugga habraacyada maamulka canshuurta dakhliga, joojinta nidaamkii hore ee PCMIS iyadoo lagu beddelay SOMCAS, dhammeystirka isku xirka SFMIS iyo SOMCAS, iyo mideynta lambarrada aqoonsiga canshuur-bixiyayaasha (TINs).

Dib-u-habaynadani waxay xoojiyeen awoodda maamulka dakhliga, yareeyeen fursadaha musuqmaasuqa, waxayna abuureen madal isku dhafan oo loogu talagalay maamulka mustaqbalka ee ku saleysan nidaamyada ITAS. Guud ahaan, waxay sare u qaaday maamul-wanaagga, hufnaanta, iyo xakamaynta, iyadoo sidoo kale dhisay saldhig hay'adeed oo adag oo lagu sii xoojin karo waxqabadka dakhliga gudaha sannadaha soo socda.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Macluumaadka Adeegyada la Bixiyey - 2025 – Qodobbada Muhiimka ah

Adeegyada ku xusan qaybtaan waxaan kasoo uruurinay wasaarado kooban oo ay ka mid yihiin Wasaaradaha Maaliyadda, Caafimaadka, Waxbarashada, Tamarta & Biyaha.

Hagaajinta Helitaanka Adeegyada Caafimaadka Iyo Nafaqada Ee Aasaasiga Ah

Intii lagu guda jiray sannad-maaliyadeedka, Dowladda ayaa bilowday dhowr hindise oo ujeeddadoodu tahay kor u qaadista adeegyada dadweynaha ee loo fidiyo shacabka Soomaaliyeed.

Qaybtan waxay soo bandhigaysaa dulmar kooban oo ku saabsan heerka ay marayaan dhammaadka sannadka 2025 qaar ka mid ah barnaamijyada ay hirgelisay Dawladda Federaalka Soomaaliya.

Dowladdu waxay ku bixisay kharshahaad si loo sii horumariyo helitaanka adeegyada caafimaadka, iyadoo ujeeddadu tahay in la gaaro yoolalkan heer Federaal iyo heer Dawlad Goboleed labadaba:

- ✓ In la yareeyo umul raacashada hooyada iyo dhimashada dhallaanka
- ✓ In la yareeyo dhimashada carruurta ka yar shan sano, lana hagaajiyo caafimaadka iyo nafaqada carruurta
- ✓ In la yareeyo dhimashada ka dhalata cudurrada faafa iyo kuwa aan faafin
- ✓ In la xoojiyo nidaamka caafimaadka lana ballaariyo gaarsiinta adeegyada

Adeegyada la fuliyey sannadka gudihiisa waxaa ka mid ahaa kuwa soo socda:

S/N	Gobolka, ama goobta	Adeegyada	Natiijada
1.	Gobolka Hiiraan – Baladwayne, Buuloburte, Jalalaqsi, Matabaan iyo Maxaas	✓ 24 xarumood oo caafimaad ✓ 22 unugyo caafimaad aasaasi ah (PHUs) ✓ 3 isbitaal degmo ✓ Isbitaal heer gobol ✓ 10 xarumaha caafimaad oo guurguura (Mobile Clinics)	✓ Waxaa la qabtay 307,391 adeegyo bukaan-socod (outpatient consultations) ✓ 5,062 dhalmo ayaa waxaa ka qayb qaatay shaqaale caafimaad oo xirfad leh, oo ay ku jiraan 113 qalliin ah (caesarean sections) ✓ 11,460 haween uur leh ayaa dhammeystiray afar ama ka badan booqashooyinka daryeelka uurka. ✓ 9,751 carruur ah oo ka yar hal sano ayaa helay tallaalka Pentavalent 3

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

			✓ 7,803 carruur ah ayaa loo daweeeyay nafaqo-darro daran
2.	Gobolka Nugaal	✓ 1 Isbitaal heer gobol ✓ 5 isbitaal degmo ✓ 37 xarumood oo caafimaad ✓ 33 unugyo caafimaad aasaasi ah (Primary Health Units) ✓ 5 rugo caafimaad oo guur-guura ✓ 3 xarumood oo daaweynta qaaxada (TB Clinics)	✓ Waxaa la bixiyay 150,176 adeegyo bukaan-socod (outpatient consultations) ✓ 10,180 dhalmo ayaa lagu qabtay xarumaha caafimaadka (oo ay ku jiraan 223 qalliin ah – (caesarean sections) ✓ 4,454 haween uur leh ayaa dhammaystiray booqashooyinka ANC4 ✓ 8,229 carruur ah ayaa helay tallaalka Pentavalent 3 ✓ 256 gudbinno ambalaas (referrals) ayaa la diiwaangeliyay lana raacay iyada oo loo marayo nidaamka e-referral dashboards ✓ 535 bukaan ayaa adeegyo ka helay waaxyaha cusub ee indhaha, ilkaha, iyo jimicsiga daaweynta (Physiotherapy) ee Garowe General Hospital
3.	Gobolka Bakool	✓ 1 isbitaal heer gobol ✓ 3 isbitaal degmo ✓ 25 xarumood oo caafimaad ✓ 7 unugyo caafimaad aasaasi ah (PHUs)	✓ Waxaa la qabtay 167,379 adeegyo bukaan-socod (outpatient consultations) ✓ 1,686 dhalmo ayaa waxaa ka qayb qaatay shaqaale caafimaad oo xirfad leh, oo ay ku jiraan 13 qalliin ah (caesarean sections)

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

			✓ 12,038 carruur ah oo ka yar hal sano ayaa helay tallaalka Pentavalent 3 ✓ 22,525 carruur ah ayaa la siiyay kaabista Vitamin A ✓ 10,311 carruur ah ayaa loo daweeeyay nafaqo-darro daran (SAM)
4.	Gobolka Baay - Baydhabo, Buurhakaba, Berdaale, Qansaxdhere, Diinsoor	✓ 1 isbitaal heer gobol ✓ 5 isbitaal degmo ✓ 37 xarumood oo caafimaad ✓ 13 unugyo caafimaad aasaasi ah (PHUs)	✓ Waxaa la qabtay 562,494 adeegyo bukaan-socod (outpatient consultations) ✓ 10,183 haween uur leh ayaa dhammaystiray afar booqasho oo daryeelka uurka (ANC4) ✓ 5,951 dhalmo ayaa waxaa ka qayb qaatay shaqaale caafimaad oo xirfad leh, oo ay ku jiraan 109 qalliin ah (caesarean sections) ✓ 18,407 carruur ah oo ka yar hal sano ayaa helay tallaalka Pentavalent 3 ✓ 29,148 carruur ah ayaa la siiyay kaabista Vitamin A

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Helitaanka Waxbarasho Tayo leh oo loo Wada Siman Yahay (Magaalo iyo Miyiba)

Barnaamijkan wuxuu socday tan iyo sannad-maaliyadeedka 2024, iyadoo la filayo natiijooyinka muhiimka ah ee soo socda:

1. In si siman ah loo hagaajiyo heerarka akhriska iyo xisaabta iyo heerka dhammaystirka waxbarashada
2. In la xoojiyo horumarka isku dheellitiran ee akhriska, xisaabta iyo dhammaystirka waxbarashada
3. In la dhiso qaab-dhismeed adag oo xeerar iyo maalgelinta

Intii lagu guda jiray sannad-maaliyadeedka 2025, waxaa la gaaray guulaha soo socda:

Natiijo 1: Kordhinta isdiiwaangelinta dugsiyada hoose si siman

Tani waxay ku saabsan tahay kordhinta heerka guud ee isdiiwaangelinta waxbarashada hoose (primary gross enrolment rate) si siman, iyadoo loo marayo:

- (a) Ballaarinta iyo si haboon looga faa'iidaystay kaabayaasha waxbarashada ee dawlad-goboleedyada;
- (b) Dhimista caqabadaha dhaqaale ee hortaagan helitaanka waxbarashada, gaar ahaan dadka ugu nugul; iyo
- (c) xoojinta ka-qaybgalka bulshada si loo xaqiijiyo lahaanshaha iyo taageerada waxbarashada ee bulshada deegaanka.

Intii lagu guda jiray sannad-maaliyadeedka, ballaarinta kaabayaasha iyo hagaajinta helitaanka waxbarashada waxaa lagu gaaray dhismaha dugsiyada, bixinta adeegyada Biyaha, Nadaafadda iyo Fayadhowrka (WASH), iyo qalabaynta dugsiyada (furniture). Wadar ahaan 151 dugsi ayaa la qiimeeyay si loo aqoonsado mudnaanta maalgelinta, sida ku cad jadwalka hoose.

Dawlad-Goboleedka/Maamulka	Wadarta Iskuulada
Banadir	13
Galmudug	37
Hirshabelle	27
Jubbaland	44
Koofur Galbeed	30
Total	151

Shaxda 1^{aad}: Tirada Guud ee Dugsiyada La Qiimeeyay, Dawlad-goboleed

Iyadoo la raacayo qiimeynta baahiyaha, waxaa la dhisay wadar ahaan 519 fasal oo cusub, halka 263 fasal dib loo dayactiray, iyadoo sidoo kale kharashaad ballaaran lagu bixiyay adeegyada Biyaha, Nadaafadda iyo Fayadhowrka (WASH). Tani waxaa ka mid ahaa dhismaha 226 qayb oo WASH ah oo cusub iyo dib-u-habaynta 147 xarumood oo WASH ah.

Intaa waxaa dheer, waxaa la dhisay 5 maktabadood iyo 4 xarumood oo Horumarinta Carruurnimada Hore (Early Childhood Development – ECD) si loo wanaajiyo tayada iyo ka-qaybgalka goobaha waxbarashada.

DAWLADDA FEDERAALKKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Maamulka	Fasallo Cusub	Fasallo La dayactiray	WASH - Cusub	WASH – dayctiray	Maktabad la dhisay	Dhismaha ECD
Banadir	68	82	31	28	2	-
Galmudug	75	39	20	17	-	2
Hirshabelle	117	55	71	45	1	1
Jubbaland	117	42	58	33	1	-
Koofur Galbeed	142	45	46	24	1	1
Total	519	263	226	147	5	4

Shaxda 2^{aad}: Fasallada iyo Adeegyada ee Lagu Kala Saaray Dowlad-goboleed

Waxqabad guud oo aad u wanaagsan ayaa laga diiwaangeliyay horumarka shaqooyinka dhismaha dugsiyada. Sida ku cad shaxda 3^{aad}, 78.81% hawlaha dhismaha ayaa la dhammeystiray, halka 18.54% ay weli socdaan, waxaana kaliya 1.99% aan weli la bilaabin.

Dhismaha	% Boqolayda la dhammaystiray
La dhammaystiray	78.81%
Dhismaha socda	18.54%
Weli Bilaaban	1.99%
La badalay	0.66%
Total	100%

Shaxda 3^{aad}: Heerka Horumarka Kaabayaasha (%)

Bixinta agabka dugsiyada ayaa weli muhiim u ah kordhinta saameynta maalgashiga kaabayaasha, waxayna sii wadi doontaa inay gacan ka geysato hagaajinta imaanshaha ardayda, ka-qaybgalka, iyo natiijooyinka waxbarasho, gaar ahaan meelaha adeegyada yar ka jiraan.

Intii lagu jiray muddada warbixinta, qaybinta agabka dugsiyada waxaa loo fuliyay heerar kala duwan (phases). Heerka Koowaad (Phase One), wadar ahaan 3,740 miis iyo kuraas ayaa la gaarsiiyay, iyadoo laga soo qaatay qorshe ahaa 5,000, taas oo ka dhigan 74.8% hirgelin (eeg shaxda 4^{aad}). Heerka Labaad (Phase Two), oo bartilmaameedkiisu yahay in la qaybiyo 10,398 miis iyo kuraas, weli lama bilaabin.

Maamulka	Tirada Iskuulada	Agabka La qorsheeyey	Agabka La Qaybiyey	Harsan	% la Qaybiey
Banadir	25	2,540	2,540	-	100%
Southwest	14	1,260	1,020	240	80.95%
Hirshabelle	7	840	180	660	21.43%
Galmudug	3	360	0	360	0%
Grand total	49	5,000	3,740	1,260	74.8%

Shaxda 4^{aad}: Qaybinta Agabka Dugsiyada (Furniture)

Intii lagu jiray muddada warbixinta, horumar weyn ayaa laga sameeyay dhimista caqabadaha dhaqaale ee hortaagan waxbarashada, iyadoo la adeegsanayo deeqaha kabka kharashaadka dugsiyada.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Deeqahan kabka kharashaadka dugsiyada ayaa la siiyay 152 dugsi oo dowladeed, taas oo u suurtagelisay inay daboolaan baahiyaha kharashaadka hawl-scodsiinta isla markaana ay kordhiyaan helitaanka waxbarashada ee ardayda nugul. shaxda 5^{aad} ayaa muujinaysa sida loo qaybiyay dugsiyada la siiyey kabka kharashaadka ee ku kala yaalla Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Maamulka Gobolka Banaadir, taas oo keentay isu dheellitiraan gobolada dalka. Dawlad goboleed kasta waxaa la siiyay taageero la qorsheeyey oo ku saleysan shuruudo hore loo dejiyay oo qaybinta lagu saleeyay.

Maamulka	Tirada iskuulada
Banadir	20
Koofur Galbeed	33
Jubaland	33
Hirshabelle	33
Galmudug	33
Grand total	152

Shaxda 5^{aad}: Qaybinta Deeqaha ee Dowlad-goboleed kasta

Baaris iyo qiimeyn carruurta naafada ah ayaa si guul leh loo fuliyay intii lagu guda jiray sannad-maaliyadeedka 2025, iyadoo la gaaray wadar ahaan 2,668 arday oo ku jira dugsiyada bartilmaameedka ahaa. Tirada ugu badan waxaa laga diiwaangeliyay Gobolka Banaadir (736), waxaa xigay Dawlad Goboleedka Hirshabelle (672), Dawlad Goboleedka Koofur Galbeed (537), Dawlad Goboleedka Jubaland (388), iyo Dawlad Goboleedka Galmudug (335).

Hawshan baarista ahi waxay ka dhigan tahay tallaabo muhiim ah oo lagu horumarinayo waxbarashada loo wada siman yahay, maadaama ay suurtagelinayso in si hore loo aqoonsado carruurta naafada ah isla markaana la hubiyo in la siiyo taageerooyin gaar ah oo fududeeya helitaanka waxbarasho tayo leh.

Iyadoo lagu dhisayo habkii hore loo dejiyay ee ka-qaybgalka bulshada iyo abaabulka bulshada, dowladda ayaa hirgelisay dadaallo ballaaran oo lagu dhisayo awoodda daneeyeyaasha muhiimka ah ee waxbarashada heer gobol, degmo, iyo xaafad.

Wadar ahaan 2,036 qof ayaa la tababaray dhammaan dowlad-goboleedyada bartilmaameedka ah, kuwaas oo ka koobnaa xubnaha Guddiyada Waxbarashada Bulshada (CEC), maamulayaasha dugsiyada iyo wakiillada khasnadda, Saraakiisha Waxbarashada Degmooyinka (DEOs), iyo Saraakiisha Waxbarashada Gobollada (REOs), sida ku cad jadwalka hoose.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Maamulka	Saraakiil Waxb Gobol	Saraakiil Waxb ee Deg	Xubno Guddi Waxb	Kashanaji	Maamule Iskuul
Banadir	0	0	252	36	36
Koofur Galbeed	3	11	322	46	46
Jubaland	2	12	322	46	46
Hirshabelle	2	13	322	46	46
Galmudug	1	12	322	46	46
Grand total	8	48	1,540	220	220

Shaxda 6^{aad}: Ka Qaybgalayaasha Tababarka iyo Doorarka

Guud ahaan, u guuridda laga sameeyay diyaarinta qorshayaasha loona gudbay ka-qaybgal ballaaran oo daneeyayaasha ah waxay ahayd tallaabo muhiim ah oo lagu kordhinayo isdiiwaangelinta, sii socoshada waxbrashada ardayda, iyo lahaanshaha bulshada ee adeegyada waxbarashada, gaar ahaan bulshada aan si buuxda u helin adeegyadaan.

Natiijo 2: Hagaajinta si siman loo horumariyo akhriska, xisaabta iyo heerka dhammaystirka waxbarashada

Saddex kun (3,000) macallin oo la shaqaaleysiiyay sanadkii 2024 ayaa lagu sii hayay liiska mushaharka dowladda, waxayna sii wadeen inay ka shaqeeyaan dugsiyada dowliga ah. Macallimiintan waxaa la siiyay tababar iyo taageero si ay u bixiyaan waxbarasho tayo sare leh fasallada. Waxaa sidoo kale socda qorshe lagu shaqaaleysiinayo 4,000 macallin oo dheeraad ah.

Intii lagu jiray sannadka, 112 tababare ayaa la geeyay si ay u taageeraan horumarinta macallimiinta. Tababarayaashani waxay door muhiim ah ka ciyaarayaan hagidda macallimiinta, hagaajinta hababka waxbaridda fasallada, iyo hubinta tayada tababarka dhammaan goobaha waxbarashada.

Intaa waxaa dheer, dowladda waxay si guul leh u diyaarisay Agabka ka saacidaayo Waxbaridda iyo Barashada ee laba heer oo Waxbarashada Carruurnimada Hore (ECE). Agabkani wuxuu aasaas u yahay tababarka daryeelayaasha ee nidaamsan iyo horumarinta bixinta waxbarashada carruurnimada hore. Iyadoo la sii xoojinayo guushan, TLM-yada ECE ayaa la daabacay lana qaybiyay, si loo hubiyo helitaanka agabka waxbarasho ee muhiimka ah ee dowlad-goboleedyada bartilmaameedka ah.

Natiijadaas darteed, wadar ahaan 2,800 agab TLM ah ayaa la soo saaray, kuwaas oo ka kooban 1,600 buug arday, 402 buug waalidiin, iyo 798 hagayaal macallin. Agabkan waxaa loo qaybiyay lix degmo oo ku kala yaalla shan dowlad-goboleed, sida ku cad jadwalka hoose.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Maamulka	Degmada	Buugaag	Buuga Waalidka	Hagaha Macalinka
Benadir	Howlwadaag	532	134	266
Galmudug	Cadaado	267	67	133
Jubbaland	Kismaayo	267	67	133
Southwest	Baydhabo	267	67	133
Hirshabeelle	Balcad	267	67	133
Total		1600	402	798

Shaxda 7^{aad}: Qaybinta Agabka Waxbarashada ECE (TLMs) ee Degmooyinka

Helitaanka agabkan ayaa si weyn u xoojinaya bixinta adeegyada Waxbarashada Carruurnimada Hore (ECE), iyadoo la taageerayo daryeelayaasha iyada oo loo marayo hagitaan waxbarid oo nidaamsan, isla markaana la hagaajinayo natiijooyinka waxbarashada hore ee carruurta. Sidoo kale, ku darista buugaagta waalidiinta waxay kor u qaadaysaa ka-qaybgalka bulshada iyo doorka waalidiinta, kuwaas oo aad muhiim ugu ah horumarka carruurta ee marxaladaha hore.

Natiijo 3: Qaab-dhismeed sharci iyo Malgalinta

Barnaamijkan ayaa waxaa hoos imaanaya, dowladda waxay sii waday taageerada imtixaannada qaranka ee fasalka 8^{aad} ee sannad-dugsiyeedka 2024/2025. Marka la barbar dhigo sannadkii 2023/2024 (wadarta 56,188; dumar 23,938; rag 32,250), wadar ahaan 76,155 arday (33,527 dumar; 42,628 rag) ayaa u fariistay imtixaannada, kuwaas oo ka kala socday shan dowlad-goboleed: Banaadir, Galmudug, Hirshabelle, Jubaland, iyo Southwest State, sida ku cad shaxdaan hoose.

Maamul	Tirada Aradayda	Wadarta Gabdhaha	Wadarta Wiilasha
Banadir	41,655	18,646	23,009
Galmudug	7,782	3,808	3,974
Hirshabelle	6,731	2,887	3,844
Jubbaland	5,053	2,114	2,939
Koofur Galbeed	14,934	6,072	8,862
Wadarta Guud 2024 -25	76,155	33,527	42,628
Total 2023 -24	56,188	23,938	32,250

Shaxda 8^{aad}: Tirada Ardayda u Fariistay Imtixaanka Fasalka 8^{aad} ee Dowlad-goboleed

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

HAGAAJINTA HELITAANKA ADEEGYO KORONTO OO LA ISKU HALAYN KARO, WAARA, ISLA MARKAANA LA AWOODI KARO

Intii lagu jiray sannad-maaliyadeedka 2025 (FY2025), wadar ahaan USD 25.83 milyan oo kharash raasumaal ah ayaa lagu bixiyay maalgelinta helitaanka iyo rakibidda kaabayaasha tamarta la cusboonaysiin karo ee muhiimka ah, kuwaas oo laga hirgeliyay goobaha hay'adaha iyo magaalooyinka. Natiijooyinka ugu muhiimsan ee laga gaaray barnaamijkan waxaa ka mid ah:

- ✓ Nidaamyada qoraxda ku shaqeeya (solar photovoltaic – PV) ee isku dhafan (hybrid/off-grid), oo ay la socdaan kaydinta tamarta baytariyada, ayaa lagu rakibay 150 xarumood oo caafimaad iyo 215 xarumood oo waxbarasho. Qaybinta ayaa si siman loogu sameeyay Banaadir, Galmudug, Hirshabelle, Koofur Galbeed, iyo Jubaland, iyadoo gobol kasta laga hirgeliyay 30 xarumood oo caafimaad iyo 43 xarumood oo waxbarasho, kuwaas oo daboolaya magaalooyin iyo deegaano miyiga ah labadaba. Xarumaha caafimaadka waxaa ka mid ah isbitaallo gobol iyo degmo, xarumaha hooyada iyo dhallaanka (MCH), iyo xarumaha caafimaadka aasaasiga ah, halka xarumaha waxbarashada ay ka kooban yihiin jaamacado dowladeed, dugsiyo sare iyo hoose, iyo xarumaha tababarka farsamada iyo xirfadaha (TVET). Kaabayaasha waxaa sidoo kale ka mid ah qalabka koronto ee la xiriira iyo taageero laba sano ah oo dayactir iyo hawl socodsiinta ah si loo hubiyo joogtaynta adeegyada.
- ✓ Waxaa sidoo kale la helay nidaamyo loo yaqaano (mini grid) oo waaweyn oo ku shaqeeya tamarta qoraxda, kuwaas oo leh awood guud oo la qorsheeyay oo ah 22.8 MWp oo tamarta qoraxda ah iyo 44 MWh oo kaydinta baytariyada ah. Tani waxay ku jirtaa kaabayaal gudbinta korontada sida khadadka 33kV ee Garoowe iyo Gaalkacyo. Nidaamyadan waxaa laga hirgelinayaa magaalooyinka muhiimka ah iyadoo loo marayo hay'adaha NECSOM (Garoowe), NEPCO iyo GECO (Gaalkacyo), iyo BEC (Baydhabo), taas oo dhisaysa asaas adag oo loogu talagalay bixinta koronto nadiif ah oo la isku halayn karo.

Guulaha la gaaray waxay muujinayaan in koronto gelinta xarumaha caafimaadka iyo waxbarashada ay si weyn u xoojisay adeegyada dadweynaha, iyadoo la hubinayo helitaanka koronto joogto ah oo loogu talagalay hawlaha muhiimka ah, isla markaana la yareeyay ku tiirsanaanta matoorada naaftada (diesel). Isla mar ahaantaana, maalgashiga (mini grid)-yada ayaa ballaarinaya helitaanka korontada waxayna hagaajinayaan xasilloonida helitaanka koronto ee magaalooyinka waaweyn.

Guud ahaan, kharashaadka raasumaalka ah ee la sameeyay waxay ka tarjumayaan abuuridda hanti istiraatiiji ah oo leh saameyn la qiyaasi karo oo ku saabsan helitaanka tamarta, tayada adeegyada, iyo adkeysiga mustaqbalka ee qaybta korontada ee Soomaaliya.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

SOO KABASHADA DEGDEGGA AH IYO DHISMaha ADKEYSIGA MUDDADA DHEER EE MUSIIBOYINKA DABIICIGA IYO KUWA AADANAHA EE SOOMAALIYA

Dowladdu waxay bilowday barnaamij 6-sano ah oo loogu talagalay Soo Kabashada Xasaradaha Soomaaliya, si loo taageero dib-u-soo celinta nolol-maalmeedka iyo kaabayaasha deegaanada ay saameeyeen fatahaadaha iyo abaaraha, isla markaana loo xoojiyo awoodda diyaar-garowga masiibooyinka ee heer qaran. Iyadoo barnaamijku ku dhow yahay dhammaadkiisa qorshaysan ee bisha Maajo 2026, waxqabadka fulinta ayaa muujinaya heer sare oo gaarsiisan natiijooyinka la filayay. Barnaamijkani wuxuu door muhiim ah ka qaatay taageeridda soo kabashada Soomaaliya ee fatahaadaha, abaaraha, ayaxa saxaraha, amni-darrada cuntada, iyo nuglaanshaha hay'adaha.

Waxqabadka guud ee barnaamijka marka loo eego tilmaamayaasha waxqabadka muhiimka ah (KPIs) ayaa ahaa mid xooggan, iyadoo inta badan yoolalka la gaaray ama la dhaafay. Barnaamijku wuxuu gaarsiiyay 2.08 milyan qof taageero nolol-maalmeed oo la hagaajiyay marka loo eego bartilmaameedkii 1.85 milyan (113% hirgelin), taas oo ah natiijo muhiim ah marka la eego caqabadaha isdaba-joogga ah ee cimilada iyo dhaqaale. Ka-qaybgalka haweenka ayaa sidoo kale ka sarreeyay filashadii, iyadoo in ka badan 1.15 milyan haween ah la gaarsiiyay.

Helitaanka kaabayaal la hagaajiyay iyo adeegyo aasaasi ah ayaa sidoo kale si wanaagsan u socday, iyadoo 2.66 milyan qof ay ka faa'iideysteen marka loo eego bartilmaameedkii 2.47 milyan (107%). Dhismooyinka iyo dataactirka lagu sameeyay waddooyinka, kanaallada waraabka, kaabayaasha ka hortagga fatahaadaha, iyo dib-u-soo celinta xarumaha caafimaadka ayaa si muuqata u hagaajiyay helitaanka adeegyada ee degmooyinka nugul.

Maareynta khatarta fatahaadaha iyo kaabayaasha waraabka ayaa gaaray 98% bartilmaameedka, halka awoodda diyaar-garowga musiibooyinka heer qaran ay dhaaftay yoolkii la qorsheeyay iyadoo la dhammeystiray 9 nidaam, istiraatiijiyado, qorshayaal iyo qalab marka loo eego bartilmaameedkii 8. Guulahan waxay muujinayaan in barnaamijku si guul leh isugu dheellitiray wax ka qabashada degdegga ah iyo dhismaha adkeysiga muddada dheer.

Qaybta taageerada abaaraha iyo ka hortagga hore ayaa si gaar ah u muujisay waxqabad sare, iyadoo gaartay 1.7 milyan qof (128% bartilmaameedka), taas oo caddeyneysa jawaab celinta degdegga ah ee barnaamijka ee cadaadiska amni-darrada cuntada.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Guulaha Muhiimka ah

Natiijo 1: Adeegyada Aasaasiga ah ee Degdegga ah iyo Taageerada Nolol-maalmeedka

Natiijooyinka qaybtan ayaa aad u xooggan. Barnaamijyada “lacag ku beddel shaqo” (cash-for-work) iyo lacagaha shuruudeysan ayaa gaarsiiyay 263,364 qof (110% bartilmaameedka), halka taageerada wax-soo-saarka beeraha ay gaartay 33,200 qoys. Daaweynta xoolaha ayaa dhaaftay bartilmaameedka iyadoo la gaarsiiyay 1.91 milyan xoolo, taas oo ka caawisay ilaalinta nolol-maalmeedka reer miyiga. Taageerada adeegyada caafimaadka ayaa si weyn uga sarreysay filashada iyadoo gaartay 110,631 qof (184%), halka tababarrada shaqaalaha caafimaadka ee la xiriira rabshadaha ku saleysan jinsiga (GBV) ay sidoo kale dhaafeen yoolalkii la qorsheeyay.

Natiijo 2: Kaabayaasha Soo Kabashada ee Muddada Dhexe

Hagaajinta kaabayaasha ayaa keentay horumar muuqda. Biyo xireenada webiyada iyo kanaallada fatahaadaha ayaa gaaray 100% dhammeystir, kanaallada waraabka ayaa gaaray 133% bartilmaameedka, halka inta badan dayactirka xarumaha caafimaadka la dhammeystiray. Dayactirka waddooyinka ayaa weli ah qaybta ugu weyn ee aan si buuxda loo dhammeyn, iyadoo 22.95 km la dhameeyay marka loo eego bartilmaameedkii 41 km. Si kastaba ha ahaatee, shaqooyin firfircoon ayaa ka socday waddooyinka Jowhar iyo Baraawe intii lagu jiray muddada warbixinta, taas oo muujinaysa in natiijooyinka haray la dhammeyn karo ka hor xiritaanka barnaamijka.

Natiijo 3: Diyaar-garowga Musiibooyinka

Natiijadan si guul loo gaaray, iyadoo Xarunta Hawlgallada Degdegga ah ee Qaranka (National Emergency Operations Centre) ay shaqaynayso, isla markaana nidaamyada adkeysiga musiibooyinka la dhammaystiray. Barnaamijku wuxuu si muuqata uga qayb qaatay dhisidda nidaamka maaraynta musiibooyinka ee Soomaaliya.

Natiijo ahaan, faragelinnada dowladda ee barnaamijkan ee hoos taga, nidaamyada u hoggaansanaanta deegaanka iyo bulshada ayaa sii shaqeynayay, iyadoo aan la diiwaangelin wax dhacdooyin ah oo la xiriira GBV, xadgudub galmo (SEA/SH), ama amni darro intii lagu jiray FY2025. Nidaamyada cabashooyinka (GRM) ayaa sidoo kale sii shaqeynayay, iyadoo hal cabasho oo keliya la soo gudbiyay lana xalliyay si rasmi ah. Tani waxay muujineysaa xakamayn shaqooyinka oo adag intii lagu jiray fulinta.

Iyadoo barnaamijku ku dhow yahay dhammaadkiisa, mudnaanta harsan waxaa ka mid ah dhammeystirka shaqooyinka kaabayaal ee haray, xaqiijinta madaxbannaan (independent verification), ururinta dukumentiyada xiritaanka, iyo diiwaangelinta casharrada laga bartay si loogu diyaargarooobo barnaamijyada xiga. Marka la eego baaxadda natiijooyinka la gaaray iyo duruufaha adag ee fulinta, barnaamijkan waxaa loo tixgelin karaa mid waxqabad sare leh oo ku guuleystay soo kabasho iyo dhisidda adkeysiga, isla markaana leh saameyn qaran oo muuqata iyo xoojinta nidaamyada dowladda ee wax ka qabashada xasaradaha mustaqbalka.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Shaxda 9^{aad} ee hoose waxay bixinayasaa faahfaahinta natiijooyinka barnaamijka lixda sano ah ee Dib-u-soo-kabashada Soomaaliya ee la qorsheeyay inuu dhammaado May 2026.

Qaab-dhismeedka Natiijooyinka (Results Framework)								
Tirada	Magaca Tilmaame (Indicator Name)	Halbeega			Waxqabadka Hirgelinta			Fulinta Yoolka
					Yoolka	La gaaray	La gaaray (%)	
1	Tirada dadka helay tageero wanaagsan oo ku saabsan taageerada nolol-maalmeedka (iyadoo loo kala saarayo jinsiga)	Qoys			1,850,207	2,083,804	113%	Yoolka waa la Dhaafay
					885,875	1,157,144	131%	Yoolka waa la Dhaafay
2	Tirada dadka helay kaabayaal iyo adeegyo aasaasi ah oo la hagaajiyay (iyadoo loo kala saarayo jinsiga)	Qof			2,473,167	2,658,341	107%	Yoolka waa la Gaaray
					1,236,583	1,432,322	116%	Yoolka waa la Dhaafay
3	Tirada dadka ka faa’iidaystay hagaajinta maaraynta khatarta fatahaadaha iyo kaabeyaasha waraabka	Qof			572,802	562,102	98%	Yoolka waa la gaaray
4	Awoodda qaran ee u diyaar-garowga iyo ka jawaabista musiibooyinka oo la xoojiyay	Xarun			8	9	113%	Yoolka waa la Gaaray
5	Tirada dadka ka faa’iidaystay gargaarka abaaraha iyo taageerada hore (anticipatory support) ee wax looga qabanayo cunto-yaraanta la xiriirta abaaraha	Qof			1,322,955	1,698,712	128%	Yoolka waa la Dhaafay
Tilmaamayaasha Natiijooyinka (Outcome Indicators)								
Natiijada 1: Adeegyada Aasaasiga ah ee Degdegga ah iyo Taageerada Nolol-maalmeedka								
1.1	Baaxadda dhulka (hektar) ee laga xakameeyay ayaxa	Hiktar			68,841	68,841	100%	Yoolka waa la Gaaray
1.2	Tirada dadka ka faa’iidaystay barnaamijyada lacag-kushaqaysiga (cash-for-work) iyo lacag-bixinta shuruudaysan (iyadoo loo kala saarayo jinsiga)	Qof			240,000	263,364	110%	Yoolka waa la Gaaray
					80,000	115,308	144%	Yoolka waa la Gaaray
1.3	Tirada qoysaska ka faa’iidaystay agabka beeraha (iyadoo si gaar ah loo kala saarayo qoysaska ay hoggaamiyaan haweenka)	Qoys			33,000	33,200	101%	Yoolka waa la Gaaray
					10,000	12,869	129%	Yoolka waa la Gaaray
1.4	Tirada xoolaha la dawceeyay ama laga hortagay cudurrada (iyo tirada qoysaska ka faa’iidaystay)	Neef			1,830,000	1,911,086	104%	Yoolka waa la Gaaray
		Qoys			36,461	30,982	85%	Yoolka waa la Gaaray
1.5		Qof			60,000	110,631	184%	Yoolka waa la Dhaafay

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Qaab-dhismeedka Natiijooyinka (Results Framework)								
Tirada	Magaca Tilmaame (Indicator Name)	Halbeega			Waxqabadka Hirgelinta			Fulinta Yoolka
					Yoolka	La gaaray	La gaaray (%)	
	Tirada dadka ka faa’iidaystay adeegyada caafimaadka (iyadoo loo kala saarayo jinsiga)				40,000	72,308	181%	Yoolka waa la Dhaafay
1.6	Tirada shaqaalaha caafimaadka iyo shaqaalaha caafimaadka bulshada (CHWs) ee lagu tababaray arrimaha rabshadaha ku saleysan jinsiga (GBV) (iyadoo loo kala saarayo qaybaha kala duwan)	Qof			118	147	125%	Yoolka waa la Dhaafay
					30	54	180%	Yoolka waa la Dhaafay
Natijada 2: Dib-u-soo-kabashada fatahaadaha ee muddada dhexe								
2.1	Dhererka (km) ee waddooyinka dib loo dayactiray	KMs			41	22.95	56%	Yoolka Qayb ahaan waa la gaaray
2.2	Dhererka (Km) ee dib loo dayactiray ee biya xireenada webiyada iyo kanaallada ka hortagga fatahaadaha	KMs			17	17	100%	Yoolka waa la gaaray
2.3	Tirada kanaallada waraabka ee dib loo dayactiray	Kanaal			12	16	133%	Yoolka waa la Dhaafay
2.4	Tirada xarumaha caafimaadka ee dib loo soo celiyay (la dayactiray)	Xarun			10	9	90%	Yoolka waa la gaaray
Natijada 3: U diyaar-garowga muddada fog ee halista musiibooyinka								
3.1	Tirada daraasadaha, habraacyada (SOPs), nidaamyada, iyo qorshayaasha/istaraatiijiyadaha la xiriira adkeysiga, u diyaar-garowga, iyo ka jawaabista musiibooyinka, ee si rasmi ah ay u ansixiyeen hay’adaha ay khusayso.	Tirada			7	9	129%	Yoolka waa la Dhaafay
3.2	Xarunta Qaran ee Hawlgallada Degdegga ah (NEOC) oo si buuxda u shaqaynaysa	Xarun Dhexe			1	1	100%	Yoolka waa la gaaray
Natijada 4: Maareynta Barnaamijka								
4.1	Tirada guddiyada ama kooxaha go’aan-qaadashada muhiimka ah ee ay haweenku ka yihiin ugu yaraan 30% xubnaha	Guddi			5	4	80%	Yoolka waa la gaaray
4.2	Boqolkiiba cabashooyinka la xiriira mashruuca ee la xalliyay (la xiray) gudaha 60 maalmood	Boqolay			100	100	100%	Yoolka waa la gaaray
4.3	Boqolkiiba ka-faa’iidaystayaasha la qiimeeyay ee ku qanacsan	Boqolay			70	95	95%	Yoolka waa la gaaray

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Qaab-dhismeedka Natijoooyinka (Results Framework)								
Tirada	Magaca Tilmaame (Indicator Name)	Halbeega			Waxqabadka Hirgelinta			Fulinta Yoolka
					Yoolka	La gaaray	La gaaray (%)	
	kaabeyaasha iyo adeegyada aasaasiga ah ee la bixiyay (iyadoo loo kala saarayo qaybaha kala duwan)							
Natijada 5: Qaybta Jawaabta Degdegga ah ee Kaabista (Contingency Emergency Response Component)								
5.1	Boqolkiiba dadka uu saameeyay COVID-19 ee lagu ogaaday, lagu daweeeyay, laguna taageeray xarumaha caafimaadka	Boqolay			75%	95%	95%	Yoolka waa la gaaray
Natijada 6: Taageerada Ka Hortagga iyo Dib-u-soo-kabashada ee Wax ka Qabashada Cunto-yaraanta								
6.1	Tirada dadka ay saameysay cunto-yaraanta ee helay fursad ka wanaagsan oo ay ku helaan biyo iyo kaabeyaasha maaraynta ciidda iyo biyaha ee heer deegaan	Qof			200,000	299,932	150%	Yoolka waa la Dhaafay
6.2	Tirada qoysaska ka faa’iidaystay agabka beeraha iyo xoolaha (iyadoo si gaar ah loo muujinayo qoysaska ay hoggaamiyaan haweenka)	Qoys			146,338	166,916	114%	Yoolka waa la Dhaafay
6.3	Tirada qoysaska ka faa’iidaystay xirmooyinka agabka kalluumaysiga	Qoys			23,750	22,241	94%	Yoolka waa la gaaray
6.4	Tirada dadka ka faa’iidaystay kaabeyaasha kalluumaysiga iyo suuq-geynta kalluunka ee dib loo dayactiray, taageerada farsamo (TA), iyo kobcinta awoodda (iyadoo loo kala saarayo jinsiga)	Qof			71,250	75,098	105%	Yoolka waa la Dhaafay
		Qof			28,500	33,215	117%	Yoolka waa la Dhaafay

Shaxda 9^{aad}: Horumarka Hirgelinta Barnaamijka Dib-u-soo-kabashada Soomaaliya

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

MIISAANIYADDA SANNADKA 2025 IYO FALAQAYNTA WARBXINTA

Xisaabxirkani waxaa si joogta ah loogu soo gudbiyaa hawlqabadka Dawladda ee dhinaca maaliyadda ee sannad kasta iyo sannadka gudahiisa. Sidaas darteed, warbixintani waxa ay khusaysaa hawlqabadka Dawladda sannad maaliyadeedka ku dhammaaday 31^{da} December 2025 sida ku cad muuqaalka dakhliga iyo kharashaadka. Sidaas si la mid ah, warbixin maaliyadeedkani waxa uu akhristaha u siinayaa fursad in uu si faahfaahsan u helo sida ay u dheceen dhammaan dhaqdhaqaaqyada maaliyadeed ay dawladdu fulisay iyo muuqaalka maaliyadeed ee Dawladda ee sannad maaliyadeedka 2025. Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladda ayaa isku keenay warbixin maaliyadeedka, guud ahaan Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda kaddibna soo saaray warbixintaan.

Xisaab-xirka sannad maaliyadeedka 2025, waxaa lagu soo gudbiyey dhacdooyinka maaliyadeed ee Dawladda kuna jira miisaaniyadda guud ee Dawladda kaasoo horay u ansixiyeen labada aqal ee Baarlamaanka Soomaaliya. Sidaas darteed, iyada oo la eegayo qodobka 1.4.8 ee Halbeegga Xisaabaadka Caalamiga ah ee Hay'adaha Dawladda, Lacagaha Caddaanka ah (Cash Basis IPSAS, 2017), Xisaab-xirkani waxaa uu khuseeyaa warbixinta dakhliga la helay iyo kharashaadkii la bixiyey ee ku jiray qiyaasta Miisaaniyadda Dawladda iyo dakhliga iyo kharashaadka dheeriga sannad maaliyadeedka 2025.

Guud ahaan, saadaasha miisaaniyadda iyo warbixinta dhabta dakhliga ee soo galay Dawladda iyo sidoo kale kharashaadka sida dhabta ah ugu baxay hawlaha Dawladda, waxaana loo soo bandhigay sidii ay ugu suurto galin lahayd bulshada Soomaaliyeed in ay helaan xogaha maaliyadeed ee dawladda iyo faahfaahino la xariira dakhliga dawladdu heshay iyo kharashaadkii la bixiyey sannad maaliyadeedka 2025.

Hay'adaha Dawladda ee ku jiray qoondada Miisaaniyadda Dawladda ee laga soo diyaariyay warbixintaan ka eeg faahfaahinada hoose lifaaqa 1^{aad} ee warbixinta

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

DHABTA IYO MIISAANIYADDA DAKHLIGA EE SANNADKA 2025

Sida ku xusan shaxda 10^{aad} oo is barbardhigayso dakhliga wadarta uruursan ee la helay intii u dhaxaysay bilaha Jan-Dec iyo miisaaniyad sannadeedka 2025. Sannadka 2025 waxaa la helay dakhli dhan **\$920M** oo u dhiganta **69%** wadarta odoroska dakhliga miisaaniyad sannadeedka 2025. Dakhliga Gudaha waxaa la helay **\$404M** oo u dhigma **94%** odoroskii miisaaniyad sannadeedka 2025, halka deeqaha dibadda la helay **\$515M** oo u dhiganta **57%** odoroskii deeqaha dibadda ee miisaaniyad sannadeedka 2025.

	Faah-Faahin	Dhabta Sannadka 2025	Kutalagalka Miisaaniyadda	%
11	Canshuur			
111	Canshuurta dakhliga, Faa'iidada iyo Faa'iidada Raasumaalka	44,793,741	38,031,213	118%
114	Canshuurta Agabka iyo Adeegga	67,252,659	56,111,497	120%
115	Canshuuraha Ganacsiga Caalamiga	158,395,474	186,211,437	85%
116	Canshuuraha Kale	10,237,119	14,935,112	69%
	Wadarta Canshuurta	280,678,993	295,289,259	95%
14	Dakhliga Kale			
141	Dakhliga Hantida	932,170	-	0%
142	Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	119,915,341	135,052,170	89%
143	Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	1,331,313	-	0%
145	Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay	1,455,710	-	0%
	Wadarta Dakhliyada Kale	123,634,534	135,052,170	92%
	Wadarta Dakhliga Gudaha	404,313,527	430,341,430	94%
13	Deeq Dibadda			
	Kab Miisaaniyadeed	173,791,163	169,967,500	102%
	Kab Mashaariic	341,708,498	731,660,654	47%
	Wadarta Deeqaha Dibadda	515,499,662	901,628,154	57%
	Wadarta Dakhliga Dawladda	\$919,813,189	\$1,331,969,583	69%
16	Iibka Hantida			
165	Iibinta Hantida Maaliyadeed	3,631,915	-	0%
	Wadarta Iibinta Hantida	3,631,915	-	0%
15	Deyn			
151	Amaahda Gudaha Lacagta kasoo Xaroota	20,500,000	-	0%
	Wadarta Daynta Dawladda	20,500,000	-	0%
32	Hantida Maaliyadeed			
321	Hantida Maaliyadeed	14,350,597	-	0%
	Wadarta Hantida Dawladda	14,350,597	-	0%
	Wadarta Lacag Qabadashada	\$958,295,700	-	0%

Shaxda 10^{aad}: Dhabta iyo Miisaaniyadda Dakhliga 2025

Qaybaha Dakhliga Canshuuraha; Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada waxaa la helay \$45M oo u dhiganta 118% odoroskii miisaaniyadda sannadka 2025. Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa lasoo uruuriyey dakhli dhan \$67M oo 120% ka ah odoroskii miisaaniyad sannadeedka Canshuurta Agabka iyo Adeega.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Canshuurta Ganacsiga Dibadda waxaa ku jirtay qiyaasta miisaaniyad sannadeedka \$186M waxaana lasoo uruuriyey dakhli dhan \$158M oo u dhiganta 85% miisaaniyad sannadeedka 2025, Canshuuraha Kale ayaa la helay \$10M, waxa ayna ka tahay 69% odoroskii miisaaniyad sannadeedka 2025 ee Canshuuraha Kale.

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada iyo Canshuurta Agabka iyo Adeega waxaa la dhaafay 18% iyo 20% sida ay u kala horeeyaan, qiyaastii miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxaana sabab u ah dib habayn lagu sameeyey sharciyadda iyo habka uruurinta canshuuraha ee sannad maaliyadeedka 2025. Dhaqangelinta Sharciga Dakhliga, horumarinta nidaamyada canshuur uruurinta; sida danabaynta uruurinta canshuurta, dhaqangelinta canshuurta gadista ee suuqyada ayaa qayb wayn ka qaatay in la dhaafay saadaalinta miisaaniyadda canshuuraha sare ku xusan.

Canshuurta Ganacsiga Caalamiga ayaa 15% ka hoosaysa qiyaastii miisaaniyad sannadeedka 2025, waxaa lagu sababeeyey hoos u dhac ku yimid badeecadaha kasoo dagi jiray Dekadda iyo Garoonka diyaardaha. Sidoo kale canshuuraha kale ayaa aad ugu hooseeysa qiyaasta miisaaniyadda sannadeedka 2025, waxayn ka hoosaysaa 31% qiyaastii miisaaniyadda sannadka 2025.

Dakhliyada kale; dakhliyada kale waxaa ka soo xarootay \$124M oo u dhiganta 92% wadarta odoroska miisaaniyadda sannad maaliyadeedka 2025, wuxuuna ka hooseeyaa 8% saadaalintii miisaaniyad sannadeedka 2025. Wuxuuna ka yahay 31% wadarta dakhliga gudaha ee la helay sannadka 2025.

Iibka Hantida ee ka muuqda shaxda 1^{aad} waa lacaga caadaan ah oo laga soo wareejiyey haraa ku jirtay xisaabaad bangi caalaami ah oo Dawladda ugu furnaa dibadda wixii ka horeeyey 1991^{dii} waxaana la soo wareejiyey lacag dhan **\$3.6M**, waxaana lagu soo shubay khasnadda Dhexe ee Dawladda.

Daymaha Gudaha ee lasoo qaatay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2025, waxaa laga soo qaatay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya lacag dhan \$20.5M oo horumaris ama dayn muddo gaaban si loogu bixiyo kharashaadka hortabinta u leh Dawladda.

Waxaa lagu soo shubay khasandda dhexe dawladda \$14M oo ah dayn ay soo celiyeen bangiyada gaarka loo leeyahay, Wasaarada Maaliyadda ayaa horay u daymisay bangiyada gaarka loo yahay si loogu maalgaliyo ganacsiyada yar yar dalka. Waxaana Wasaaradda Maaliyadda uga wakiil ah maamulkeeda, laguna maamulaa heshiis ay Shirkadda Gargaara la gashay bankiyada gaarka loo leeyahaya.

Lacagtaan ayaa markii hore waxaa ugu deeqay Dawladda Bangiga Aduunka waxaa laga bixiyey Mashruuca Scaled-up sannadihii lasoo dhaafay.

DAWLADDA FEDERAALKKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Qaybaha Deeqaha Dibadda; Deeqaha dibada waxaa loo kala qaadaa kab miisaaniyadeed iyo mashaariic. Kabka Miisaaniyadda waxaa la helay initii lagu guda jiray sannad Maaliyadeedka 2025 deeq dhan \$174M oo u dhiganta 102% odoroskii miisaaniyad sannadeedka 2025, sidoo kale, kabka mashaariicda waxaa la helay dakhli dhan \$342M oo u dhiganta 47% odoroskii miisaaniyad sanadeedka 2025.

Waxaan hoos looga dhacay 53% odoroskii miisaaniyad sannadadeedka ee mashaariicda oo la filaayey in lasoo xareeyo sannad maaliyadeedka 2025.

Deeqaha kabka miisaaniyadda waxay laga kala helay, Dawladaha Turkiga iyo Imaaraatka Carabta, iyo Bangiga Adduunka iyo Midawga Yurub. Dawladda Turkiga ayaa la filaayey in ay Dawladda ugu deeqo \$30M, waxaana laga helay sannad maaliyadeed 2025 deeq dhan \$7.5M oo u dhiganta 25% wadarta deeqda la filaayey in laga helo Dawladda Turkiga. Dawladda Imaaraatka Carabta ayaa sidoo kale laga filaayey in la helo \$12M, waxaana la helay \$11M oo u dhiganta 92% wadarta deeqda laga filaayey in Dawladda Imaartka Carabta laga helo.

Bangiga Adduunka ayaa laga helay kabka miisaaniyadda deeq dhan \$143M oo u dhiganta 125% wadarta kabka miisaaniyadeed ee laga filaayey in lag helo Bangiga Adduunka. Waxaa lagu saadaaliyey miisaaniyada sannadeedka 2025 in laga heli doono deeq dhan \$114M, waxaana muuqato inay hoosaysay saadaalinta miisaaniyad sannadeedka 2025 ee kabka miisaaniyadda Bangiga Adduunka laga filaayey in laga helo.

Midawga Yurub ayaa laga helay kab miisaaniyadeed oo dhan \$12M oo u dhiganta 123% wadarta deeqda laga filaayey in laga helo miisaaniyad sannadeedka 2025. Waxaa la saadaaliyey in laga heli doono deeq dhan \$10M.

Miisaaniyadda Kabka Mashaariicda ayaa la helay 342M oo u dhiganta 47% odoroska miisaaniyad sannadeedka 2025. Bangiga Adduunka ayaa laga helay \$311M oo u dhiganta 49% wadarta miisaaniyad sannadeedka ee kabka mashaariicda laga filaayey Bangiga Adduunka in laga helo, waxaana laga filaayey in Bangiga Adduunka dawlada ugu deeqo kab mashaariicd oo dhan \$630M. Bangiga Horumarinta Afrika ayaa laga helay \$18M oo 27% ka ah wadarta deeqda Bangiga Horumarinta Afrika laga filaayey in la helo sannad maaliyadeedka 2025. Mashaariicd uu maaligaliyo Midawga Yurub ayaa la helay \$11M oo 38% ka ah wadarta kabka mashaariic ee Midawga Yurub laga filaayey in la helo sannad maaliyadeedka 2025.

Cida Bixisay Deeqda	Kab Miisaaniyadeed	Kab Mashaariic	Wadarta Deeqda	Wadarta %
Dawladda Turkiga	7,500,000		7,500,000	1.5%
Dawladda Imaaraatka Carabta	11,058,444		11,058,444	2.1%
Bangiga Adduunka	142,884,750	310,898,235	453,782,985	88.0%
Bangiga Horumarint Afrika		18,019,043	18,019,043	3.5%
Midowga Yurub	12,347,970		12,347,970	2.4%
Barnaamijka Adkaynta Hab-Nololeedka reer Miyiga (RLRP)		1,963,558	1,963,558	0.4%
Hay'adda Caalamiga ah ee Waxbarashada		10,827,663	10,827,663	2.1%
Wadarta	\$173,791,164	\$341,708,499	\$515,499,662	100%
% Deeqda	34%	66%	100%	


Shaxda 11^{aad}: Faahfaahinta Deeqda la helay Sannadka 2025

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Sida ku xusan shaxda 11^{aad} Deeqaha la helay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2025 waxay isugu jirtaa kab miisaaniyadeed iyo mid mashaariic. Kabka miisaaniyadeed ayaa 34% ka ahaa wadarta deeqaha la helay, halka kabka mashaariicda ay ka ahayd 66% wadarta deeqda la helay. Kabka miisaaniyaddu waa deeq dawladdu ka heshay dawlado saaxiib la ah Dawladda Soomaaliya iyo Bangiga Adduunka. Waxa ay Dawladu ku maalgalisaa kharashaadka hawl-fulinta sida mushaaraadka shaqaalaha iyo kharash- socodsiinta hawlaha Dawladda. Kabka mashaariicduna waa deeq loogu talagalay in lagu maalgaliyo mashaariic horumarineed oo dalka gudahiisa laga fuliyo.

Deeqda ugu badan waxa ay Dawladdu ka heshay Bangiga Adduunka intii u dhaxaysay Jan - Dec ee sannad maaliyadeedka 2025, wuxuuna ugu deeqay deeq dhan \$454M oo u dhiganta 88% wadarta deeqaha dawladdu heshay. Sidoo kale Bangiga Horumarinta Africa ayaa Dawlada ugu deeqay \$18M oo u dhiganta 3.5% wadarta deeqaha la helay bilaha Jan - Dec ee sannad maaliyadeedka 2025, halka Hay'adda Caalamiga ee Waxbarashada ay Dawladda ugu deeqday \$11M oo u dhiganta 2.1 %. Barnaamijka adkaynta Hab-nololeedka reer Miyiga ayaa ugu deeqay Dawlada 2M oo u dhiganta 0.4% Marka loo fiiriyo wadarta deeqaha la helay intii lagu dhax jiray bilaha Jan – Dec ee sannad maaliyadeedka 2025.

Dhanka Dawladaha; Dawlada Turkiga ayaa ugu deeqday Dawladda Soomaaliya deeq gaarayso \$7.5M oo u dhiganta 1.5% wadarta deeqaha la helay intii u dhaxaysay bilaha Jan– Dec ee sannad maaliyadeedkan 2025. Sidoo kale Dawladda Imaaraatka Carabta ayaa ugu deeqday Dawladda Soomaaliya deeq dhan \$11M oo u dhiganta 2.1% wadarta deeqaha. Midawga Yurub ayaa sidoo kale Dawlada ugu deeqay 12M oo u dhiganta 2.4% wadarta guud ee deeqada dawladdu heshay sannad maaliyadeedka 2025.



Jaantuska 1^{aad}: ilaha Dakhliga Dawladda ee sannad maaliyadeedka 2025

Sida ka muuqata shaxda 1^{aad} Dakhliga Canshuuraha waxaa la helay intii u dhaxaysay bilaha Jan – Dec ee sannad maaliyadeedka 2025 canshuur dhan \$281M oo u dhiganta 31% wadarta dakhliga dawladda, dakhliyada kale waxaa ka soo xarooday dakhli dhan \$123M una dhigma 13% wadarta dakhliga uruursan ee ay Dawladu heshay intii u dhaxaysay bilaha Jan – Dec sannad Maaliyadeedka 2025.

Deeqaha Dibadda, kab miisaaniyadeedka waxaa la helay deeq dhan \$174M oo u dhiganta 19% wadarta dakhliga Dawladdu heshay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2025, halka kabka mashaariicda la helay intii lagu guda jiray bilaha Jan – Dec ee sannad maaliyadeedka 2025 deeq dhan \$342M oo u dhiganta 37% marka loo eego wadarta dakhliga Dawladdu heshay intii u dhaxaysay bilaha Jan – Dec 2025.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

ISBADALADA DAKHLIGA DAWLADDA - 2021-2025

Sida ka muuqato shaxda 12^{aad}, wadarta dakhliga Dawladda ee la helay sannad maaliyadeed 2025 ayaa ah \$920M, wuxuuna 1% ka badan yahay wadarta dakhligii la helay sannad maaliyadeedka 2024. Sannad maaliyadeedka 2024, wadarta dakhliga Dawladda ayaa ahaa \$913M wuxuuna kordhay 24% marka la barbardhigo wadarta dakhliga Dawladda heshay sannad maaliyadeedka 2023.

Faahfaahinta	2021	2022	2023	2024	2025
Dakhliga Gudaha	229,561,321	262,669,745	329,491,711	369,353,791	404,313,527
Deqaha Dibadda	146,975,019	459,241,797	408,531,180	543,361,927	515,499,662
Wadarta Dakhliga Dawladda	376,536,340	721,911,542	738,022,892	912,715,718	919,813,189
Daymaha/Horumaris	96,365,574	44,040,950	8,000,000		20,500,000
Iibinta Hantida		3,285,354	12,500		3,631,915
Hantida Maaliyadeed					14,350,597
Wadarta Lacag Qabashada Kale	96,365,574	47,326,304	8,012,500	-	38,482,512
Wadarta Guud	\$472,901,913	\$769,237,846	\$746,035,392	\$912,715,718	\$958,295,700

Shaxda 12^{aad}: Dhabta Dakhliga ee 2021-2025

Dakhliga gudaha ayaa la helay sannad maaliyadeedka 2025 \$404M, wuxuuna 9% ka badan yahay wadarta dakhliga gudaha ee la helay sannadka 2024. Sidoo kale dakhliga gudaha ayaa la soo uruuriyey sannadka 2024 369M oo ka badan 12% wadarta dakhliga gudaha ee la helay sannad maaliyadeedka 2023. Sannadka 2022 ayuu wadarta dakhliga dawladda kororkii ugu badnaa sameeyey shantii sano ee la soo dhaafay, waxaana la helay \$722M oo ka badan 92% wadarta dakhliga dawladda ee la helay sannad maaliyadeedka 2021.

Wadarta deeqaha dibadda ee la helay sannadka 2025 ayaa ahayd \$515M oo 5% ka hoosaysa wadarta deeqaha dibadda ee la helay sannadka 2024. Balse sannad maaliyadeed 2024 ayaa la helay 543M oo 33% ka badan wadarta deeqaha dibadda ee la helay sannadka 2023. Sannadka 2022 ayuu sameeyey kororkii ugu badanaa, waxaana la helay \$459M oo ka badan 212% wadarta deeqaha dibadda ee la helay sannad maaliyadeedka 2021.

Wasaaradda Maaliyadda ayaa Bangiga Dhexe kasoo qaadatay dayn muddo gaaban ama horumaris dhan \$20.5M intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2025, sidoo kale sannadka 2023 waxay soo qaadatay \$8M, sannadka 2021 waxay soo qaadatay \$22M, si loogu bixiyo kharashaadka hortabinta leh ee dawladda. Inta badan daymaha mudada gaaban waxaa la soo qaataa marka dakhliga dawladda ku filnaan waayo bixinta kharashaadka lagama maarmaanka ah, sida musharaadka shaqaalaha dawladda, iyo kharashaadka hawl socodsiinta hay'daha dawladda. Waxaana dib loo bixiyaa daymaha inta lagu guda jiro sannad maaliyadeedka lasoo qaatay.


Sanadaha 2021 waxay dawladda ka heshay lacag SDR ah oo hanti iyo qoondo isla eg tiro ahaan, waxay dawladda codsatay in la sarifo qayb ka mid hantida ay heshay loona badalo lacagta dollarka maraykanka. Sannadka 2021 waxaa lagu shubay khasnadda dhexe ee dawladda 74M oo dollar oo ka timid hatida-SDR la sarifafy, sidoo kale sannadka 2022 ayaa dawladda heshay \$44M. Marka ay dawladda sarifato SDR oo loo badalo lacagta dollar maraykan waxaa loo aqoon sanayaa dayn dawladda lagu leeyahay ilaa dib loogu celinaayo lacagata SDR.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025


Libinta Hantida ee ka muuqata sannadaha 2025 iyo 2022, waa lacaga laga soo wareejiyey xisaab bangi oo dibadda uga furnaa dawladda wixii ka horeeyey sannadkii 1991^{dii}, dawladda ayaa codsatay in hantida ay dawladda Soomaaliya lahayd lagu soo shubo khasnadda dhexee dawladda. Sannadka 2025 waxaa la soo wareejiyey \$3.6M, halka sannada 2022 lasoo wareejiyey \$3.2M.

Sida ka muuqato jaantusyada 3^{aad} iyo 2^{aad}, dakhliga gudaha ee la helay sannadka 2025 wuxuu ahaa \$404M wuxuuna ka ahaa 44% wadarta dakhliga dawladda, halka deeqaha dibadda la helay isla sannadka ahayd \$515M waxayna ka tahay 56% wadarta dakhliga dawladda.

Sannadka 2024 dakhliga gudaha waxaa la soo uruuriyey \$369M oo 40% ka ahaa wadarta dakhliga Dawladda, halka deeqaha dibadda la helay \$543M oo 60% ka ahyd wadarta dakhliga Dawladda ee la helay sannad maaliyadeedka 2024.



Jaantuska 3^{aad}: Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda



Jaantuska 2^{aad}: Saamiga Dakhliga Gudaha & Deeqaha Dibadda

Sannadka 2021 dakhliga gudaha ayaa la helay \$230M wuxuuna ka ahaa 61% wadarta dakhliga dawladda la helay, halka deeqaha dibadda la helay 147M oo 39% ka ahaa wadarta dakhliga dawladda ee la helay. Shanta sano ee lasoo dhaafay waa sannadka kaliya dakhliga gudah ka badan yahy deeqaha dibadda, waxaana jiray hoos dhac dhanka deeqaha dibadda. Celcelis ahaa dakhliga gudah wuxuu ahaa 45% wadarta dakhliga dawladda ee la helay 2021-2025.

DAKHLIGA GUDAHA

Dakhliga Gudaha ayaa samaynaayey koror joogto ah intii u dhaxaysay sannadaha 2021 - 2025. Dakhliga Gudaha waa dakhliga ugu muhiimsan Dawladda oo ay ku bixiso kharashaadka Joogtada ah sida; mushaaraadka shaqaalaha dawladda, iyo kharashaadka hawl socodsinta hay'adaha Dawladda. Dakhliga Gudaha waxaa loo kala qaadaa laba qaybood oo waawayn; Dakhliga Canshuuraha iyo Dakhliyada Kale (dakhliga aan canshuurta ahayn).

Faahfaahin	2021	2022	2023	2024	2025
Canshuuraha	162,766,910	181,691,842	224,631,762	266,763,916	280,678,993
Dakhliga Kale	66,794,410	80,977,903	104,859,950	102,589,875	123,634,534
Wadarta Dakhliga Gudaha	\$229,561,321	\$262,669,745	\$329,491,711	\$369,353,791	\$404,313,527
% Koror/Naaqus	9%	14%	25%	12%	9%


Shaxda 13^{aad}: Dhabta Qaybaha Dakhliga Gudaha ee sannadaha 2021-2025

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025


Sida ka muuqata shaxda 13^{aad}, wadarta dakhliga gudaha ee la helay sannad maaliyadeedka 2025 ayaa \$404M oo 9% ka badan wadarta dakhliga gudaha ee lahay sannad maaliyadeedka 2024.

Sidoo kale dakhliga gudaha ee lasoo uruuriyey sannadka 2024 ayaa \$369M wuxuuna ka badan yahay 12% wadarta dakhliga gudaha ee lasoo uruuriyey sannadka 2023. Kororkii ugu badanaa waxaa la diiwaan galiyey sannadka 2023 intii lagu guda jiray shanta sano ee lasoo dhaafay.

Sida ka muuqata jaantusyadda 4aad iyo 5aad, waxaa lagu soo bandhigay qaybaha dakhliga gudaha. Canshuuruhu waa isha ugu muhiimsan ee dakhliga gudaha. Sannadka 2025, dakhliga canshuuraha lasoo uruuriyey canshuur dhan \$281M, taas oo ka dhigan 69% wadarta dakhliga gudaha, halka dakhliga kale uu gaaray \$124M, oo u dhiganta 31% wadarta dakhliga gudaha.



Jaantuska 4^{aad}: Qaybaha Dakhliga Gudaha 2021-2025




Jaantuska 5^{aad}: Saamiga Dakhliga Canshuuraha & Dakhliyada Kale


Sidoo kale, sannadka 2024 waxaa la helay canshuur dhan \$267M oo 72% ka ah wadarta dakhliga gudaha, halka dakhliga la helay \$103M oo 28% ka ah wadarta dakhliga gudaha. Celcelis ahaan canshuuraha ayaa 70% ka aha wadarta dakhliga gudaha ee la helay shanta sano ee lasoo dhaafay, halka dakhliyada kale ka haa 30% wadarta dakhliga gudaha.

Jaantuska 6^{aad} wuxuu soo bandhigayaa wadarta Dakhliga Gudaha ee soo xarooday rubacyada 1^{aad}, 2^{aad}, 3^{aad} iyo 4^{aad} ee sannadaha 2021-2025; rubacii afaraad ee sannad maaliyadeedkii 2021 waxaa la helay Dakhliga Gudaha lacag dhan \$67M, halka rubaca afaraad ee sannadkan 2025 dakhliga gudaha ee soo xarooday uu dhan yahay \$118M. Wuxuuna sameeyey dakhliga guduha koror dhan 77% marka la is barbar dhigo rubaca afaraad ee sannadaha 2021 iyo 2025.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025



Jaantuska 7^{aad}: Wadarta Dakhliga Gudaha ee Rubacyada- 2021-2025



Jaantuska 6^{aad}: Kororka/Naaquska Dakhliga Gudaha ee Rubacyada - 2021-2025

Sida ka muuqato jaantuska 7^{aad}, wuxuu soo bandhigayaa kororka iyo naaqska wadarta Dakhliga Gudaha ee la helay saddex biloodlaha koowaad, labaad, saddexaad iyo afaraad ee sannadanaha 2021-2025. Wuxuuna isbabardhig ku samaynayaa dakhliga la helay rubacyada koowaad, labaad, saddexaad iyo afaraad ee sannadaha 2021-2025. Laga soo bilaabo rubaca afaraad ee sannadka 2021, dakhliga guduuhu waxa uu samaynaayay koror joogto ah.

Dakhliga Gudaha ayaa rubaca afaraad ee sannadka 2021 waxaa la helay \$67M wuxuuna ka badan yahay 14% marka loo fiiriyo rubaca afaraad ee sannadkii ka horeeyey 2020, balse rubaca kowaad ee sannadka 2021 ayaa la helay \$52M oo 12% ka hooseeyaa wadarta dakhliga gudaha ee la helay rubaca koowaad ee sannadka 2020.

Rubaca afaraad ee sannadka 2022 ayaa la helay \$91M wuxuuna sameeyey kororkii ugu badnaa wuxuuna kordhay 36% marka la barbardhigo rubaca afaraad ee sannadka 2021. Dakhliga gudaha ee la helay rubaca afaraad ee sannadka 2025 wuxuu ka badan yahay 16% wadarta dakhliga gudaha ee la helay rubaca afaraad ee sannadka 2024.

Rubaca saddexaad ee sannadka 2023 ayaa waxa uu kordhay dakhliga gudaha 68% marka lala barbardhigo rubaca saddexaad ee sannadka 2022.

DAKHLIGA CANSHUURAHA

Shaxd 14^{aad} waxay faahfaahinaysaa qaybaha dhabta dakhliga canshuuraha ee la soo uruuriyey sannadaha 2021-2025. Sannadka 2025 waxaa la helay canshuur dhan \$281M oo ka badan 5% wadarta dakhliga canshuuraha ee la helay sannadka 2024. Sidoo kale, sannadka 2024 ayaa la helay canshuur dhan \$267M oo 19% ka badan wadarta canshuuraha ee la helay sannadka 2023.

Madax	Canshuurta	2021	2022	2023	2024	2025
111	Canshuurta dakhliga, Faa'iidada iyo Faa'iidada Raasumaalka	15,789,362	18,662,241	24,384,014	36,170,675	44,793,741
114	Canshuurta Agabka iyo Adeegga	23,429,410	32,778,666	38,614,823	51,419,944	67,252,659
115	Canshuuraha ganacsiga caalamiga	108,974,991	116,169,148	154,082,799	168,875,350	158,395,474
116	Canshuuraha Kale	14,573,148	14,081,788	7,550,126	10,297,947	10,237,119
	Wadarta Dakhliga Canshuurta	\$162,766,910	\$181,691,842	\$224,631,762	\$266,763,916	\$280,678,993
	% Koror/Naaqus	17%	12%	24%	19%	5%


Shaxda 14^{aad}: Dhabta Qaybaha Dakhliga Canshuuraha – 2021-2025

DAWLADDA FEDERAALKKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Kororka ugu badan waxaa la helay sannadka 2023, waxaana la helay canshuur dhan \$225M oo ka badan 24% wadarta canshuuraha ee la helay sannadka 2022. Wadarta canshuuraha la helay sannadka 2022 ayaa ka badan 12% wadarta canshuuraha la helay sannadkii ka horeeyey.

Sida ka muuqata shaxda 14^{aad} Dakhliga Canshuuraha ee la helay sannad maaliyadeedka 2025 wuxuu ka badan yahay 5% wadarta dakhliga canshuuraha ee la helay sannadka 2024. Jaantuska 8^{aad} ayaa soo bandhigay boqolayda qaybaha dakhliga canshuuraha kasoo xarooday shantii sanno ee la soo dhaafay.

Dakhliga canshuuraha waxaa ugu badan canshuurta ka soo xaroota Canshuurta Ganacsiga Caalamiga ah. Sannad-maaliyadeedka 2025 waxaa la helay Canshuurta Ganacsiga Caalamiga ah \$158M una dhiganta 56% wadarta Dakhliga Canshuuraha.



Canshuurta Dakhliga iyo Fa'iidada ayaa la helay \$45M una dhiganta 16%, halka Canshuurta Agabka iyo Adeega laga helay \$67M oo u dhiganta 24% wadarta Dakhliga Canshuuraha ee la helay sannadka 2025. Sidoo kale Dakhliga ka soo xarooda canshuuraha kale sannad maaliyadeedkani waxa uu noqday \$ 10M oo u dhiganta

Jaantuska 8^{aad}: Saamiga Qaybaha Dakhliga Canshuuraha ee Rubaca Afaraad

4% Marka loo fiiriyo wadarta dakhliga canshuuraha ee soo xarooday sannadka 2025.

Saamiga ugu badan Dakhliga Canshuuraha waxa ay ka soo xarooday Canshuurta Ganacsiga Caalamiga ah, waxaana ka soo xaroday celcelis ahaan 64% wadarta Dakhliga Canshuuraha ee la helay sannadaha 2021-2025. Waxa ayna ka soo xarootaa canshuuraha laga qaado badeecadaha ka soo daga Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha magaalada Muqdisho.

Canshuurta Agabka iyo Adeega ayaa laga helaa saamiga labaad ee ugu badan Dakhliga Canshuuraha, waxaana ka soo xarooto celcelis ahaan 19% wadarta Dakhliga Canshuuraha. Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ayaa waxaa laga helay 12% wadarta dakhliga canshuuraha ee la helay sannadaha 2021-2025.

DAKHLIYADA KALE

Sida ka muuqato shaxda 15^{aad} wadarta Dakhliiyada Kale ee la helay sannadka 2025 wuxuu ka badan yahay 21% wadarta dakhliiyada kale ee la helay sannadka 2024. Sannadkii 2024 waxaa la helay \$103M oo 2% ka horeeyo wadarta dakhliiyada kale ee la helay sannadka 2023. Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeega ayaa ah dakhliga ugu muhiimsan ee laga helo dakhliiyada kale, wuxuuna kasoo xaroodaa khidmadaha maamul ee ay bixiso Dawladda, sida bixinta shatiyada ganacsiga, dal-ku-galka ajaanibta, bixinta shatiyada ganacsiga, bixinta baasaboorada, khidmadaha laga qaado diyaaradaha mara hawada Soomaaliya iyo adeegyada kale ay dawladdu ka bixiso Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha magaalada Muqdishu.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Madax	Dakhliga	2021	2022	2023	2024	2025
141	Dakhliga Hantida	-	-	2,674,732	-	932,170
142	Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	66,794,410	80,977,903	102,123,040	102,021,111	119,915,341
143	Ganaaxa, Cigaabta	-	-	62,178	568,764	1,331,313
145	Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka	-	-	-	-	1,455,710
	Wadarta Dakhliyada Kale	\$66,794,410	80,977,903	\$104,859,950	\$102,589,875	\$123,634,534
	% Koror/Naaqus	-7%	21%	29%	-2%	21%

Shaxda 15^{aad}: Dakhliyada Kale ee sannadaha- 2021-2025

Sannadka 2025, Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga waxaa ka mid ah dakhliga ka soo xaroodo Khidmadaha Maamul ee Dekadda iyo Garoonka Diyaaradaha Muqdisho oo laga helay \$36M oo u dhiganta 29% wadarta Dakhliyada Kale, khidmadaha laga qaado diyaaradaha mara hawada Soomaaliya waxaa laga helay \$20M oo u dhiganta 16% wadarta Dakhliyada Kale ee la helay sannad maaliyadeedka 2025.

Adeegyada dalkugalka iyo bixinta baasaboorada waxaa ka soo xarootay \$19M oo u dhiganta 15% wadarta dakhliyada kale ee la helay sannadka 2025. Wadarta Khidmadaha maamul ee laga helay Dekadda, Garoonka diyaaradaha Muqdishu, iyo diyaaradaha mara hawada Soomaliya ayaa ahayd \$56M oo u dhiganta 45% wadarta Dakhliyada Kale ee la helay sannad maaliyadeedka 2025.

DEEQAHA DIBADDA

Deeqaha dibadda ee la helay sannadka 2025 ayaa ahayd \$515M waxayna ayna 5% ka hosaysaa deeqdii la helay sannadkii ka horeeyey ee 2024 oo la helay \$543M, sida ka muuqata shaxda 18^{aad}. Deeqaha ugu badan ee la helo ayaa ah deeqaha dhinacyada badan. Sannadka 2022 ayuu sameeyey kororkii ugu badanaa waxa \$459M oo ka badan tahay 212% wadarta deeqda la helay sannadkii ka horeeyey. Sannadka 2021 waxa la helay deeqdii ugu hooseesay oo ah \$146M, waxa ayna 49% ka hosaysay deeqdii la helay sannadka 2020. Deeqaha dhinacyada badan, inta badan waxaa lagu bixiyaa kharashaadka mashariicda laga fuliyo dalka gudahiisa.

Madax	Dakhliga	2021	2022	2023	2024	2025
131	Deeqaha Dowladaha Shisheeye	2,500,000	37,100,000	8,304,387	29,698,555	18,558,444
132	Deeqaha Hay'adaha Caalamiga	144,475,019	422,141,797	400,226,793	513,663,372	496,941,218
	Wadarta Deeqaha Dibadda	\$146,975,019	\$459,241,797	\$408,531,180	\$543,361,927	\$515,499,662
	% Koror/Naaqus	-49%	212%	-11%	33%	-5%

Shaxda 16^{aad}: Deeqaha Dibadda, 2021-2025

Shaxda 17^{aad} waxay muujinaysaa wadamada laga helay deeqaha dawladda shisheeye loogu deeqay Dawladda sannadaha 2021-2025. Sannad maaliyadeedka 2025, Dawladda Imaaraatka Carabta ayaa ugu deeqaday dawladda deeq dhan \$11M, sidoo kale sannadka 2024, Dawlada Imaaraatka Carabtu waxa ay Dawlada ugu deeqday \$15M, Halka Dawlada Turkiga ay ugu deeqday Dawlada Soomaaliya deeq lacageed oo dhan \$7.5M iyo \$15M sanadaha 2025 iyo 2024 sida ay u kala horeeyaan.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Cidda Bixisay	2021	2022	2023	2024	2025
Turkiga	2,500,000	27,500,000	7,500,000	15,000,000	7,500,000
Imaaraatka Carabta	-	9,600,000	0	14,698,555	11,058,444
Shiinaha	-	-	804,387	-	-
Wadarta	\$2,500,000	37,100,000	\$8,304,387	\$29,698,555	\$18,558,444

Shaxda 17^{aad}: Dhabta Deeqaha labo dhinacle ah - 2021-2025

Wadarta Deeqda Hay'adaha Caalamiga ee la helay ee sannadka 2025 waxa ay ka hosaysaa 3% wadart deeqda hay'adaha caalamiga ah ee la helay sannadkii ka horeeyey ee 2024.

Shaxda 18^{aad} ayaa soo bandhigayso hay'adaha laga helay deeqaha hay'adaha caalamiga ah ee la helay sannadaha 2021-2025. Bangiga Adduunka ayaa laga helay deeq dhan \$454M oo u dhiganta 94% wadarta deeqaha Hay'adaha Caalamiga ah ee loogu deeqay Dawladda sannad maaliyadeedka 2025.

Deeqda Bixisay	2021	2022	2023	2024	2025
Bangiga Adduunka	138,208,302	401,115,730	368,607,429	490,090,601	453,782,985
Bangiga Hourmarinta Afrika	4,283,285	4,937,177	7,442,149	7,160,945	18,019,043
Midowga Yurub	-	13,717,520	22,293,681	9,917,970	12,347,970
Qaramada Midoobay	-	-	-	-	1,963,558
Ha'yadda Iskaashaiga Waxbarashada (GPE)	1,983,433	2,371,371	1,883,536	3,463,856	10,827,663
OPEC- Wadama soo Saara Shidaalka	-	-	-	3,030,000	-
Wadarta Deeqada	\$144,475,019	\$422,141,797	\$400,226,793	\$513,663,372	\$496,941,218
% Koror/Naaqus	-47%	192%	-5%	28%	-3%

Shaxda 18^{aad}: Dhabta Deeqda Dhinacyada ee 2021-2025

Bangiga Adduunka ayaa ugu deeqaday dawladda sannadka 2025 deeq dhan \$454M, waxayna ka hoosaysaa 7% wadarta deeqda Bangiga Adduunka ugu deeqday Dawladda sannadka 2024. Balse sannadka 2024, Bangiga Adduunka ayaa Dawladda ugu deeqay \$490M oo 33% ka badan deeqdii Bangiga Aduunka ugu deeqada dawladda sannad maliyadeedka 2023.

Bangiga Horumarinta Afrika ayaa ugu deeqay dawladda sannadka 2025 deeq dhan \$18M oo 152% ka badan wadarta Bangiga Horumarinta Afrika ugu deeqada Dawladda sannadka 2024.

Sida ka muuqato shaxda 19^{aad} oo soo bandhigaysa kala soocidda Deeqaha Dibadda oo ay Dawladdu heshay sannadaha 2021-2025. Deeqaha la helay sannadka 2025, waxaa kab miisaaniyadeed ka ahaa \$174M oo u dhiganta 34%, halka kabka mashaariicda ka ahayd \$341M oo u dhigtan 66% wadartii deeqaha la helay sannad maaliyadeedka 2025.

Nooca	2021	2022	2023	2024	2025
Kabka Miisaaniyadda	29,569,562	176,655,196	128,314,697	186,892,475	173,791,163
Kabka Mashaariicda	117,405,457	282,586,602	280,216,483	356,469,452	341,708,498
Wadaarta Deeqda	\$146,975,019	\$459,241,797	\$408,531,180	\$543,361,927	\$515,499,662

Shaxda 19^{aad}: Deeqaha Kabka iyo Deeqaha Mashaariicda

Sidoo kale sannadka 2024, waxaa la helay kabka miisaaniyadeed deeq dhan \$187M oo 34% ka ah wadarta deeqda, halka kabka mashaariicda la helay \$356M oo 66% ka ahaa wadarta deeqaha dibadda ee la helay sannadka 2024.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Kabka miisaaniyadeed ee yarayd shanta sano ee soo dhaafay waxaa la helay sannadka 2021, waxaana la la helay \$30M oo 20% ka ahayd wadarta deeqda la helay sannadka 2021. Guud ahaad wadarta deeqda la helay 49% ka hosaysay wadarta deeqdii la helay sannadka 2020.

Kab miisaaniyadeedku waa deeq Dawladda loogu deeqay inay ku bixiso kharashaadka joogtada ah, iyadoo lagu salaynaayo mudnaanta kharash bixinta ee hay'adaha Dawladda, sida inay ku bixiso kharashaadka mushaaraadka shaqaalaha dawladda iyo hawlfulinta hay'adaha Dawladda. Kabka miisaaniyadda waxaa lagu maalgaliyaa mashaariicda ay ka fuliynayaan dalka hay'adaha bixiyey deeqda.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

DHABTA IYO MIISAANIYADDA KHARASHAADKA SANNAD MAALIYADEEDKA 2025

Sida ka muuqata shaxda 20^{aad}, kharashaadka la bixiyay sannad maaliyadeedka 2025 ayaa ahayd \$970M oo u dhiganta 71% odoroska wadarta miisaaniyadda guud ee kharashaadka sannad maaliyadeedka 2025. Kharashaadka joogtada ah waxaa laga bixiyey \$620M oo u dhiganta 95% wadarta miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah, halka kharashaadka mashariicda laga bixiyey \$350M oo u dhiganta 49% wadarta kharashaadka miisaaniyada mashaariicda ee sannad maaliyadeedka 2025.

	Faah-Faahin	Dhabta 2025	Isbedelka Miisaaniyadda ee Kalawareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
	Kharashaadka Joogtada				
21	Mushaarka Shaqaalaha	366,423,511	371,515,477	365,755,765	99%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	125,630,644	137,700,586	139,587,608	91%
24	Khidmadda Maalgashiga	6,351,284	8,141,862	13,800,000	78%
26	Deeqaha	98,916,010	99,537,310	91,641,266	99%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	22,252,527	32,754,873	17,269,034	68%
	Wadarta Kharashaadka Joogtada	619,573,976	649,650,109	628,053,674	95%
	Kharashaadka Mashaariicda		-		
21	Mushaarka Shaqaalaha	4,640,201	6,203,340	4,244,860	75%
22	Isticmaalka Agabka & Adeega	128,251,674	261,108,390	256,865,498	49%
25	Kaalmo Dhaqaale	12,633,876	13,177,722	13,280,000	96%
26	Deeqaha	80,803,253	131,223,594	147,022,709	62%
27	Faa'idada Bulshada	19,110,000	76,824,000	77,000,000	25%
28	Kharashaadka Kale	52,147,684	63,444,328	68,416,928	82%
31	Hantida aan Maaliyadda Ahayn	52,383,744	158,082,844	164,830,659	33%
	Wadarta Kharashaadka Mashaariicda	349,970,431	710,064,219	731,660,654	49%
	Wadarta Kharashaadka Guud	\$969,544,407	\$ 1,359,714,328	\$1,359,714,328	71%
	Lacag Bixinnada Kale				
32	Hantida Maaliyadeed	3,705,000	-	-	-
29	Dib u bixin Daymaha/Horumaris	22,275,145	-	-	-
	Wadarta Lacag Bixinnada Kale	25,980,145	-	-	-
	Wadarta Lacag Bixinta Guud	\$995,524,552	-	-	-

Shaxda 20^{aad}: Miisaaniyadda Iyo Dhabta Kharashaadka Sannadka 2025

Miisaaniyada kharashaadka joogtada, Mushaarka Shaqaalaha ee sannad maaliyadeedka 2025 waxaa la bixiyay lacag dhan \$366M oo u dhiganta 99% qiyaastii miisaaniyad sannadeedka mushaaraadka shaqaalaha, soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ayaa lagu bixiyey \$22M oo 68% miisaaniyadda soo iibshashada Hantida aan Maaliyadda ahayn, sidoo kale Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa lagu bixiyey kharash dhan \$126M oo u dhiganta 91% miisaaniyadda kharashaadka joogtada ee Isticmaalka Agabka iyo Adeega.

DAWLADDA FEDERAALKKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Miisaaniyadda Kharashaadka Mashaariicda, Mushaarka shaqaalaha waxaa laga bixiyay Kharashaadka Mashaariicda mushaar dhan \$4.6M oo u dhiganta 75% marka loo eego qiyaastii miisaaniyad sannadeedka kharashaadka Mashaariicda ee mushaaraadka, Kharashaadka Kale ayaa lagu bixiyey \$52M oo u dhiganta 82% miisaaniyad sannadeedka, deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyay \$81M oo u dhiganta 62% miisaaniyad sannadeedka deeqaha. Isticmaalka Agabka iyo Adeega ayaa sidoo kale lagu bixiyey bilaha Jan-Dec kharash dhan \$128M oo u dhiganta 49% odoroska miisaaniyad sannadeedka ee 2025.

Sida ka muuqata shaxda 21^{aad}, Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2025, kharashka ugu badan waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Adeega Maamulka, waxaana lagu bixiyey \$272M oo u dhiganta 96% miisaaniyadda Hay'adaha Adeega Maamulka. Hay'adaha Amniga ayaa lagu bixiyey \$266M oo u dhiganta 99% wadarta miisaaniyadda Hay'adaha Adeega Amniga.

Faahfaahinta	Dhabta 2025	Isbedelka Miisaaniydda ee Kalawareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	% Fulinta
Kharashaadka Joogtada				
Hay'adaha Maamulka	270,294,183	283,804,529	273,973,094	95%
Hay'adaha Amniga	265,921,250	268,732,431	257,147,965	99%
Hay'daha Dhaqaalaha	37,918,980	45,275,916	45,127,551	84%
Hay'daha Bulshada	45,689,564	51,837,232	51,805,063	88%
Wadarta Kharashaadka Joogtada ah	619,823,976	649,650,109	628,053,674	95%
Kharashaadka Mashaariicda				
Hay'adaha Maamulka	108,057,860	146,395,981	164,634,351	74%
Hay'adaha Dhaqaalaha	123,680,402	286,147,948	289,506,013	43%
Hay'daha Bulshada	118,232,169	277,520,289	277,520,289	43%
Wadarta Kharashaadka Mashaariicda	349,970,431	710,064,219	731,660,654	49%
Wadarta Kharashaadka Guud	\$969,794,407	\$1,359,714,328	\$1,359,714,328	71%
Lacag Bixinta Kale				
Hay'adaha Maamulka	25,980,145	0	0	0%
Wadarta lacag Bixinta Guud	\$995,524,552	0	0	0%


Shaxda 21^{aad}: Dhabta iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Hay'adaha Dawladda - 2025

Kharashaadka mashaariicda, Intii lagu guda jiray bilaha sannad maaliyadeedka 2025, kharashka ugu badan waxaa lagu bixiyey Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha, waxaana lagu bixiyey kharash dhan \$124M oo ah 43% marka loo fiiriyo wadarta miisaaniyadda loo ansixiyey Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha. Hay'adaha Adeega Bulshada iyo Maamulka waxaa lagu kala bixiyey 118M oo u dhiganta 43% iyo \$108M oo u dhiganta 74% sida ay u kala horeeyaan, marka loo fiiriyo wadarta miisaaniyadda loo ansixiyey Hay'adaha Adeega Bulshada iyo Adeega Maamulka.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

KHARASHAADKA JOOGTADA AH

Miisaaniyadda Kharashaadka Joogtadu waa miisaaniyad loogu talagalay in lagu bixiyo kharasahaadka hawl socodsiinta hay'adaha Dawladda, sida mushaaraadka shaqaalaha, iyo kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee hay'adaha Dawladda. Waxaana lagu maalgaliyaa Dakhliga Gudaha Dawladda ka soo uruuriso iyo kabka miisaaniyadeedka ay Dawladdu ka hesho deeqaha dibadda.



Jaantuska 9^{aad}: Kharashaadka Joogtada

Sida ka muuqataq jaantusta 9^{aad}, Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2025, Mushaaraadka Shaqaalaha Dawladda ayaa lagu bixiyey \$366M oo u dhiganta 59% wadarta kharashaadka joogtada ah.

Kharashaadka Agabka iyo Adeega waxaa lagu bixiyey \$126M oo u


dhiganta 20% wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2025; kharashaadka lagu bixiyey waxaa ka mid ah, howl socodsiinta hay'adaha Dawladda, raashinka iyo shidaalka ciidamada, sahay safarada iyo kharashaadyo kale oo ku baxa adeegyada la siiyo hay'adaha ah Dawladda.

Dulsaarka daymaha ayaa lagu bixiyey kharash dhan \$8M oo u dhiganta 1% wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey sannadka 2025. Deeqaha la siiyo Dawlad goboleedyada dalka waxaa loo wareejiyey lacag dhan \$99M oo ka ah 16% wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey bilaha Jan-Dec ee sannadka 2025. Soo iibsashada hantida aan maaliyadda ahayn ayaa lagu bixiyey \$22M oo u dhiganta 4% wadarta kharashaadka joogtada ah. Waxaa lagu bixiyey lacagtaan soo iibsashada hantida maguurtada ah intii u dhaxaysay bilaha Jan - Dec ee sannadka 2025.

KHARASHAADKA MASHAARIICDA

Jaantuska 10^{aad} wuxuu soo bandhigayaa kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2025 iyo meelihii ay ku baxeen.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025



Jaantuska 10^{aad}: Kharashaadka Mashaariicda ee Sannadka 2025

sannad maaliyadeed 2025. Kharashaadka latalinta ayaa ahaa kharashka ugu badan ee Kharashada Agabka iyo Adeega ee la bixiyey sannadka 2025, waxaana lagu bixiyaa lataliyayaasha iyo xiriiririyaasha mashaariicda iyo shirkadaha siiya dawladda adeegyada la xiriira latalinta.

Kharashaadka kaalmo dhaqaale waxaa la bixiyey \$13M oo u dhiganta 4% wadarta kharashaadka mashaariicda. Deeqaha ayaa lagu bixiyey \$81M oo u dhiganta 23% wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey intii u dhaxaysay bilaha jan – Dec sannadka 2025.

Soo iibshada hantida aan maaliyada aheyn ayaa lagu bixiyey \$52M oo u dhiganta 15% marka loo fiiriyo wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2025. Sidoo kale kharashaadka Mashaariicda waxa laga bixiyay Lacagaha lagu bixiyay kharashaadyada kale qadar dhan \$52M oo u dhigma 15%. Kharashaadka Faa'iidada bulshada ayaa sidoo kale lagu bixiyay qadar dhan \$19M oo u dhiganta 5% wadarta guud ee kharashaadka Mashaariicda.

Mushaaraadka shaqaalaha ayaa lagu bixiyey \$ 4.6M oo u dhiganta 1% marka loo eego wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey intii lagu guda jiray bilaaha Jan-Dec ee sannad maaliyadeedka 2025.

Kharashaadka Agabka iyo Adeega ayaa lagu bixiyey \$128M oo ah 37% wadarta kharashaadka mashaariicda la bixiyey intii u dhaxaysay bilaha Jan - Dec ee

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025


ISBADALKA KHARASHAADKA DAWLADDA SANNADAHA - 2021-2025

Sida ka muuqato shaxda 22^{aad} wadarta kharashaadka la bixiyey sannadka 2025 wuxuu ka badan yahay 7% wadarta kharashaadka la bixiyey sannadka 2024. Kharashaadka la bixiyey sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 27% wadarta kharashaadkii la bixiyey sannadka 2023.

Hay'adaha	2021	2022	2023	2024	2025
Hay'adaha Adeega Maamulka	180,332,582	294,259,313	285,284,894	319,486,556	378,102,043
Hay'adaha Adeega Amniga	159,984,079	169,968,796	191,551,570	235,280,151	265,921,250
Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha	40,026,607	56,987,807	78,274,154	129,328,774	161,599,382
Hay'adaha Adeega Bulshada	80,437,924	198,221,377	154,325,069	219,427,968	163,921,733
Wadarta Kharashka¹	\$460,781,191	\$719,437,293	\$709,435,688	\$903,523,449	\$969,544,407
Lacag Bixinnada Kale					
Hay'adaha Adeega Maamulka	\$35,061,554	\$11,997,573	\$18,843,737	\$1,679,539	\$25,980,145
Wadarta Lacag Bixinnada	\$495,842,745	\$731,434,866	\$728,279,425	\$905,202,987	\$995,524,552

Shaxda 22^{aad}: Dhabta Kharashaadka Hay'adaha - 2021-2025

Kharashaadka la bixiyey sannadka 2025; kharashaadka joogtada wuxuu ka ahaa 64% wadarta kharashaadka la bixiyey, halka 36% ka ahaa kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey sannadka 2025. Sannadka 2024 kharashaadka joogtada wuxuu ka ahaa 59%, halka kharashaadka mashaariicdana ka ahaa 41% wadarta kharashaadka la bixiyey sannadka.



Jaantuska 11^{aad}: Saamiga Kharashaadka Hay'addaha Dawlada

Sida ka muuqato jaantuska 12^{aad} oo soo bandhigaya saamiga kharashaadka dawladda ee lagu kala bixiyey hay'adaha dawladda oo loo kala soocay sida ay shaqo ahaan iskula xiriiraan.

Sannad maaliyadeedka 2025, Hay'adaha Maamulka ayaa lagu bixiyey \$380M oo 39% ka ah wadarta kharashaadka dawladda, Hay'adaha Amniga ayaa lagu bixiyey \$266M oo 27% ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey

sannadka 2025. Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey \$162M oo 17% ka ah wadarta kharashaadka dawladda. Sidoo kale Hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey \$164M oo 17% ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey sannadka 2025.

Jaantuska 11^{aad} ayaa sidoo kale soo badhigaayo saamiga kharashaadka dawladda lagu kala bixiyey haya'daha dawladda sannad maaliyadeedka 2024. Hay'aydaha Maamulka ayaa lagu bixiyey \$321M oo 35% ka ah wadarta kharashaadka, Hay'adaha Amniga ayaa lagu bixiye \$235M oo 26% ka ah wadarta kharashka, Hay'adaha Dhaqaalaha ayaa lagu bixiyey \$129M oo

¹ Waxaan ka saaray daymahii ku jiray, waxaa isbadal ku imaanayaa wadarta aan soo bandhignay sannadkii hore

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

14% ka ah wadarta kharashaadka, hay'adaha Bulshada ayaa lagu bixiyey \$219M oo 24% ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey sannad maaliyadeedka 2024.

Tirada guud ee hay'adaha dawladda ayaa ah 68, Hay'adaha Adeega Maamulka waa ku jira 31 hay'adood, Hay'adaha Adeega Amniguna waa 8 hay'adood, Hay'adaha Adeega Dhaqaalaha waxa ku jira 20 hay'adood, halka Hay'daha Adeega Bulshada ay ka kooban yihiin 9 hay'adooda. Faahfaahinta magacyada haya'adaha waxaa ka heli kartaa lifaaqyada warbixinta.

Noocyada Kharashaadka

Sida ka ka muuqato shaxda 23^{aad} oo soo bandhigaysa noocyada kharashaadka la bixiyey sannadaha 2021-2025, musharaadka shaqaalaha dawladda ee la bixiyey sannadka 2025 ayaa ahaa \$371M oo 38% ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey sannadka 2025.

Kharashaadka Adeega iyo Agabka ayaa la bixiyey \$254M oo u dhiganta 26% wadarta kharashaadka la bixiyey. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka ayaa lagu bixiyey \$180M oo u dhiganta 19% wadarta kharashaadka la bixiyey sannadka 2025. Kharashaadka soo iibsashada Hantida aan maaliyada ahyan ayaa lagu bixiyey \$74M oo u dhiganta 8% wadarta kharashaadka la bixiyey sannadka 2025.

Madaxa	Nooca Kharashka	2021	2022	2023	2024	2025
21	Magdhawga Shaqaalaha	250,099,404	259,578,811	292,244,712	341,574,738	371,063,711
22	Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	106,055,549	140,670,111	138,201,059	204,503,361	253,882,318
24	Khidmadda Maalgashiga	1,535,754	693,046	2,354,470	5,824,192	6,351,284
25	Kabka	1,271,695	5,115,305	5,400,231	8,952,366	12,633,876
26	Deeqaha	45,850,523	111,242,917	94,746,471	119,662,309	179,719,262
27	Faa'iidooyinka Bulshada	39,864,848	188,936,115	130,554,139	153,810,594	19,110,000
28	Kharashaadka Kale	-	-	31,526,834	40,676,493	52,147,684
31	Hantida aan Maaliyadda ahayn	16,103,418	13,200,988	14,407,773	28,519,394	74,636,271
	Wadarta Kharashaadka	\$460,781,191	\$719,437,293	\$709,435,688	\$903,523,449	\$969,544,407
	Lacag Bixinnada Kale					
32	Hantida Maaliyadeed	-	-	-	-	3,705,000
29	Dib-u-Bixin	35,061,554	11,997,573	18,843,737	1,679,539	22,275,145
	Wadarta Lacag Bixinnada Kale	35,061,554	11,997,573	18,843,737	1,679,539	25,980,145
	Wadarta Guud	\$495,842,745	\$731,434,866	\$728,279,425	\$905,202,987	\$995,524,552

Shaxda 23^{aad}: Noocyada Kharashaadka la Bixiyey, 2021-2025


Sannadka 2024, mushaarka shaqaalaha ayaa lagu bixiyey \$342M oo 38% ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey, Kharashaadka Faa'iidada Bulshada ayaa lagu bixiyey \$154M oo ka ah 17% wadarta kharashaadka la bixiyey, Kharashaadka Agabka iyo Adeega ayaa lagu bixiyey \$205M oo ka ah 23% wadarta kharashaadka la bixiyey. Deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada ayaa lagu bixiyey \$120M oo 13% ka ah wadarta kharashaadka la bixiyey sannadka 2024.

Sida ka muuqato jaantusyada 12^{aad} iyo 13^{aad} oo soo bandhigaayo kororka iyo naaquska wadarta guud ee bixinta kharashaadka dawladda sannadka gudahiisa, waxayna is barbardhig ku samaynayaan kororka iyo naaquska rubacyada sannadka dhexdiisa ee sannadaha 2021 ilaa 2025.


DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Rubaca afaraad ee sannad maaliyadeed 2022 waxaa la bixiyey kharash dhan \$310M oo 115% ka badan wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2021. Sidoo kale rubuca labaad ee sannad maaliyadeedka 2024 ayaa la bixiyey \$249M oo 109% ka badan wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2023. Waxaa sidoo koror macno leh kordhay rubca koowaad ee sannadka 2025 waxaana la bixiyey kharash dhan \$187M oo ka badan 48% wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey rubca kowaad ee sannadka 2024.

Dhammaadka sannadka 2021 lama bixin deeqaha lasiiyo mamaul goboleedyada dalka oo ku xiran helidda kabka miisaaniyadeed ee uu bixiyo Bangiga Adduunka. Rubaca labaad ee sannadka 2023 waxaa hoos u dhacay kharash bixinta waxaana la bixiyey \$119M oo 31% ka hooseeya wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey rubaca labaad ee sannad maaliyadeedka 2022.



Jaantuska 12^{aad}: Kharash Bixinta Rubacalaha, 2021-2025



Jaantuska 13^{aad}: kororka/Naaquska Kharash Bixinta Rubacalaha ah 2021-2025

Sida ka muuqata jaantusyada 12^{aad} iyo 13^{aad}, kororka iyo naaquska inuusan joogta ahayn is badalkuna ku badan yahay bixinta kharashaadka ee rubacyada sannadka gudahiisa, waxaan saamaynta ugu badan ku leh kororka iyo naaquska kharash bixinta kharashaadka mahsaariicda. Kharashka ugu badan waxaa la bixiyey rubaca afaraad ee sannadaha 2022-2025, waxaa sabab u ah bixinta deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada oo la bixiyo dhammaad sannadka, waxayna ku xiran tahay helidda kab miisaaniyadeed ee Bangiga Adduunka oo la helo dhammaadka sannad kasto. Rubaca labaad ee sannadka 2024 waxaana la bixiyey kharashaadka faa'iidada bulshada oo laga bixiyey mashruuca baxnaano, waana lacag badan oo la bixinaayo hal mar sannadka gudahiisa.

MUSHAARAADKA SHAQAALAHA

Shaxda 24^{aad} waxay soo bandhigaysaa bixinta musharaadka shaqaalaha dawladda ee la bixiyey sannadaha 2021-2025. Sannadka 2025 waxaa la bixiyey \$371M oo 9% ka badan musharaadka shaqaalaha ee la bixiyey sannadka 2024. Sidoo kale sannadka 2024 waxaa lagu bixiyey musharaadka shaqaalaha \$342M oo ka badan 17% musharaadkii la bixiyey sannadka 2023.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Madaxa	Nooca Kharashka	2021	2022	2023	2024	2025
2111	Mushaarka - Lacag Cadaan ah	150,268,709	154,445,010	166,440,783	196,909,725	204,258,299
2113	Gunnayin - Lacag Cadaan ah	83,953,941	89,665,201	104,614,514	116,369,839	130,609,419
2114	Kharshaadka kale ee Shaqaalaha	15,876,754	15,468,601	21,189,415	28,295,174	36,195,993
	Wadarta Mushaarka	\$250,099,404	\$259,578,811	\$292,244,712	\$341,574,738	\$371,063,711
	% Koror/Naaqus	10%	4%	13%	17%	9%

Shaxda 24^{aad}: Mushaaraadka Shaqaalaha, Sannadaha ee 2021-2025


Kharashaadka Mushaaraadka shaqaalaha ee la bixiyey sannadka 2025 waxaa kharashaadka joogtada ka baxay 99% wadarta mushaaraadka shaqaalaha, Halka mushaarka laga bixiyey kharashaadka mashaariicda uu ahaa 1% wadarta mushaaraadka shaqaalaha la bixiyey sannadka 2025.

Mushaaraadka hay'adaha amniga ayaa waxaa ku korortay \$17M oo dhiganta 58% wadarta kororka mushaaraadka shaqaalaha dawladda, sidoo kale mushaaraadka lagu bixiyey Wasaaradda Waxbarashada ayaa ku korortay sannadka 2025 mushaar dhan \$8M oo 28% wadarta kororka mushaaraadka shaqaalaha dawladda ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2025.

Hay'adaha	2021	2022	2023	2024	2025
Hay'adaha Adeega Amniga	129,314,838	134,197,275	153,519,424	186,477,532	203,711,098
Hay'adaha kale	120,784,566	125,381,536	138,725,288	155,097,206	167,352,614
Wadarta Mushaarka	\$250,099,404	\$259,578,811	\$292,244,712	\$341,574,738	\$371,063,711

Shaxda 25^{aad}: Mushaaraadka Hay'adaha Adeega Amniga iyo Hay'adaha kale

Mushaaraadka la bixiyey sannadka 2025, shaqaalaha Hay'adaha Amniga waxaa lagu bixiyey



Jaantuska 14^{aad}: Saamiga Mushaarka Hay'addaha Amniga & Hay'addaha kale

\$ 204M oo u dhiganta 55% wadarta mushaarka la bixiyey. Hay'adaha ay ku baxeen mushaaradku waxa ka mid ah; Ciidamada Xooga Dalka, Ciidanka Booliska Soomaaliyeed, iyo hay'adaha kale ee hoos yimaada Hay'adaha Adeega Amniga. Hay'adaha aan hoos imaanin Hay'adaha kale waxaa lagu bixiyey \$167M oo u dhiganta 45% wadarta mushaaraadka la bixiyay sannadka 2025.

Sidoo kale sannad maaliyadeedka 2024 waxaa lagu bixiyey hay'adaha amniga

\$186M oo u dhiganta 55% wadarta mushaarka la bixiyey, hay'adaha kale waxaa lagu bixiyey \$155M oo u dhigant 55% wadarta mushaaraadka la bixiyey sannadka 2024.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

KHARASHAADKA ISTICMAALKA AGABKA IYO ADEEGA

Madaxa	Nooca Kharashka	2021	2022	2023	2024	2025
	Safarka iyo Shirarka	5,742,417	10,888,143	12,512,933	15,842,280	19,927,427
2211	Kharashka Safarka iyo Shirarka	5,742,417	10,888,143	12,512,933	15,842,280	19,927,427
	Kharashaadka Hawl-Fulinta	16,364,332	26,288,354	21,330,342	33,651,123	31,690,653
2221	Hawlaha Guud	4,043,631	5,712,650	4,923,288	5,763,053	6,873,369
2222	Isgaarsiinta	-	315,589	594,107	1,148,354	1,398,170
2223	Shidaalka iyo Saliidaha	5,843,470	7,987,866	7,740,361	9,541,614	10,173,200
2224	Agabka iyo Alaabaha	3,875,697	6,852,946	6,027,532	14,052,052	9,088,160
2225	Dayactir iyo Hagaajin	2,601,534	5,419,303	2,045,055	3,146,050	4,157,755
	Kharashaadka Kirooyinka	2,158,553	2,704,079	2,656,414	6,520,917	5,598,691
2231	Kirooyin	2,158,553	2,704,079	2,656,414	6,520,917	5,598,691
	Kharashaadka kale ee Hawl-Fulinta	36,284,996	56,146,683	59,530,952	97,300,893	141,317,995
2241	Kharashaadka Waxbarashada iyo Tababaradda	3,769,304	4,328,632	2,393,235	3,160,521	6,339,022
2242	Adeegga Latalinta iyo Khidmadda Latalinta	27,284,515	43,515,965	45,605,920	81,102,044	116,670,543
2243	Adeegyadda Bangiga	5,228,749	8,095,411	8,174,839	11,910,486	15,398,865
2244	Xayeysiinta iyo Heshiis Wax kala Ibsi	-	172,073	299,578	957,655	541,838
2245	Caymiska Dadka Guud	2,428	34,601	3,057,380	170,187	2,367,727
	Hawlgaladda Ciidamada	14,886,013	4,253,752	6,821,082	5,597,070	6,716,864
2251	Boolis- Agabka iyo adeegga Ciidanka	6,817,660	120,000	220,000	360,000	420,000
2252	Sirdoonka- Agabka iyo Adeegga Ciidanka	7,171,655	3,593,752	5,281,082	3,637,070	3,528,516
2253	Xoogga- Agabka iyo Adeegga Ciidanka	896,698	540,000	1,320,000	1,600,000	2,768,348
	Kharashaadka Guud ee kale	30,619,238	40,389,100	35,349,335	45,591,078	48,630,688
2261	Kharashyada Guud ee kale ee Agabka iyo Adeegyada	30,619,238	40,389,100	35,349,335	45,591,078	48,630,688
	Wadarta Kharashaadka	\$106,055,549	\$140,670,111	\$138,201,059	\$204,503,361	\$253,882,318
	% Koror/Naaqus	31%	33%	-2%	48%	24%


Shaxda 26^{aad}: Isticmaalka Agabka iyo Adeega- sannadaha 2021-2025

Sida ka muuqato shaxda 26^{aad}, kharashaadka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey sannadka 2025 waxa uu dhan yahay \$254M wuxuu ka badan yahay 24% kharashaadka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey sannadka 2024. Sidoo kale sannadka 2024 waxaa la bixiyey \$205M oo ka badan 48% kharashaadka Agabka & Adeega ee la bixiyay sannadka 2023. Balse kharashaadka la bixiyey sannad maaliyadeedka 2023 waxaa la bixiyey \$138M oo 2% ka hooseeyso wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2022.


Kharashaadka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey sannadka 2025 waxaa kharashaadka joogtada laga bixiyay \$126M oo ka badan 14% wadarta la bixiyey sannadka 2024, wuxuuna 49% ka yahay wadarta kharashaadka Agabka iyo Adeega la bixiyay, halka kharashaadka mashaariicda laga bixiyey ay ahayd \$128M oo ka badan 36% wadarta la kharashaadka agabka iyo adeega ee la bixiyey sannadka 2024, wuxuuna ka yahay 51% wadarta kharashaadka Agabka iyo Adeega la bixiyey sannadka 2025.

Kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeegga ee la bixiyey wuxuu 26% ka ahaa wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey ee sannadka 2025. Sidoo kale sannadka 2024 kharashaadka isticmaalka agabka iyo adeega wuxuu ka ahaa 23% wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2024.

DAWLADDA FEDERAALKKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025



Jaantuska 15^{aad}: Kharashaadka Safarka & Shirarka



Jaantuska 16^{aad}: Kharashaadka Hawl fulinta

Kharashaadka Safarka iyo Shirarka waxaa ku baxday sannadka 2025 kharash dhan \$20M oo 26% ka badan wadarta Kharashaadka safarka iyo shirarka ee la bixiyey sannadka 2024. Waxayna 8% ka tahay wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey sannadka 2025.

Sannadka 2024 waxaa la bixiyey Kharashaadka Safarka iyo Shirarka \$16M oo 27% ka badan wadarta kharashaadka Safarka iyo Shirarka ee la bixiyey sannadka 2024, waxayna ka ahayd 8% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey sannadka 2024.


Kharashaadka Joogtada ah waxaa laga bixiyey Safarka iyo Shirarka kharash dhan \$8M oo u dhiganta 40% wadarta kharashaadka safarka iyo shirarka ee la bixiyey sannadka 2025, kharashaadka mashaariicdane waxaa laga bixiyey \$12M oo u dhiganta 60% wadarta kharashaadka safarka iyo shirarka ee la bixiyey sannadka 2025.

Kharashaadka hawlfulinta waxaa la bixiyey sannadka 2025 qadar dhan \$32M waxa ay ka yar tahay 6% kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey sannadka 2024. Sidoo kale, sannadka 2024 waxaa la bixiyey \$34M waxa ay 58% ka badan wadarta kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey sannadka 2023.

Kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey saddex biloodkii afaraad sannadka 2025 waxay 12% ka tahay wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka & Adeega ee la bixiyey sannadka 2025.


Kharashaadka Hawlfulinta ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2025, waxaa laga bixiyey Kharashaadka joogtada ah lacag dhan \$25M oo u dhiganta 79% wadarta kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey sannadka 2025, halka kharashaadka mashaariicda laga bixiyey \$7M oo 21% ka ah wadarta kharashaadka hawlfulinta ee la bixiyey sannadka 2025.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025



Jaantuska 17^{aad}: Kharashaadka Kirooyinka


bixiyey \$3M oo 55% ka ah wadarta kharashaadka Kirooyinka, halka kharashaadka mashaariicda laga bixiyey \$3M oo 45% ka ah wadarta kharashaadka kirooyinka ee la bixiyey sannadka 2025.



Jaantuska 18^{aad}: Kharashaadka kale ee Hawl-Fulinta

ka badan 63% wadarta kharashaadka kale hawlfulinta ee la bixiyey sannadka 2023.

Kharashaadka joogtada waxaa laga bixiyey \$34M oo dhiganta 24% wadarta kharashaadka kale



Jaantuska 19^{aad}: Kharashaadka Hawl galinta Ciidamada

Kharashaadka kirooyinka waxaa la bixiyey sannadka 2025 kharash dhan \$6M, waxayna ka yar tahay 14% wadarta kharashaadkii kirada ee la bixiyey sannadka 2024. Kharashaadka kirooyinka waxay 2% ka tahay wadarta kharshaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey sannadka 2025. Sidoo kale kharshaadka la bixiyey sannadka 2024 \$7M oo 145% ka badan wadarta kharashaadka kirooyinka ee la bixiyey ee sannadka 2023.

Kharashaadka joogtada waxaa laga

Kharashaadka kale ee hawlfulinta waxaa la bixiyey sannadka 2025 lacag dhan \$141M, waxayna ka badan tahay 45% wadarta kharashaadka kale hawlfulinta ee la bixiyey sannadka 2024. Kharashaadka kale ee hawlfulinta waa kharashka ugu badan ee laga bixiyey Kharasahaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega, wuxuuna ka yahay 56% wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey sannadka 2025. Sannadka 2024 waxaa la bixiyey \$97M oo


ee hawlfulinta, halka kharashaadka mashaariicda la bixiyey \$107M oo u dhiganta 76% wadarta kharashaadka kale hawlfulinta ee la bixiyey sannadka 2025.

Kharashaadka hawlgalada ciidamada waxaa bixiyey sannadka 2025 lacag dhan \$7M waxayna ka badan tahay 20% wadarta kharashaadka hawgalada ciidanka ee la bixiyey sannadka 2024. Kharashaadka hawlgalada ciidamad ee la bixiyey sannadka 2024 wuxuu ka badan yahay 18% marka la barbardhigo

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

wadarta kharashaadka hawl galada ciidamda ee la bixiyey sannadka 2023.

Kharashaadka baxay ee hawl galada ciidamada 100% waxaa laga bixiyey miisaaniyadda kharashaadka joogtada ah.



Jaantuska 20^{aad}: Kharashaadka Guud ee kale

Kharashaadka kale ee Guud waxaa la bixiyey sannadka 2025 qadar dhan \$49M, wuxuuna ka badan tahay 7% wadarta kharashaadka kale ee la bixiyey sannadka 2024. Halka sannadka 2024 la bixiyay \$46M oo ka badan 29% wadarta kharashaadka kale ee la bixiyey sannadka 2023. Kharashaadka kale ee la bixiyey sannadka 2025 wuxuu 19% ka yahay wadarta kharashaadka Isticmaalka Agabka iyo Adeega ee la bixiyey. Kharashaadka joogtada ah ayaa laga bixiyey 100% wadarta

kharashaadka kale ee la bixiye sannadka 2025.

Khidmadda Maalgashiga

Shaxda 27^{aad} waxay muujinaysaa Khidmadda Maalgashiga ee la bixiyey sannadaha 2021 ilaa 2025. Waxaa la siiyaa hay'adaha caalamiga ah ee daynta mudada fog kulahaa Dawladda. Sannadka 2025 waxaa la bixiyey \$7M waxa ay ka badan tahay 9% wadarta kharashaadka Kharashaadka Maalgashiga ee la bixiyey sannadka 2024. Sidoo kale sannadka 2024 waxaa la bixiyey \$6M oo ka badan 147% wadarta Kharashaadka Maalgashiga ee la bixiyey sannadka 2023.

Madaxa	Kharashka	2021	2022	2023	2024	2025
2411	Khidmada Maalgashiga la Siinayo Dadka aan Deganayn Dalka	1,175,043	693,046	2,354,470	5,824,192	6,351,284
2421	Khidmada Maalgashiga la Siinayo Dadka Deganaa ee aan ahayn Dowladda Guud	360,711	-	-	-	-
	Wadarta	\$1,535,754	\$693,046	\$2,354,470	\$5,824,192	\$6,351,284

Shaxda 27^{aad}: Khidmadda Maalgashiga, 2021-2025

Kaalmo Dhaqaale

Shaxda 28^{aad} waxay soo bandhigaysaa kharashaadka lagu bixiyey maalgelinta lasiiyo shirkadaha yaryar ee ku ganacsada dalka gudihiisa, waxaa laga bixiyaa mashaariicda uu maalgaliyo Bangiga Adduunka. Sannadka 2025 waxaa la bixiyey lacag dhan \$12M, waxa ay ka badan tahay 41% marka la barbardhigo kaalmada dhaqaale ee la bixiyey sannadka 2024. Halka sannad maaliyadeedka 2024 ay Dawladdu bixisay qadar lacageed oo dhan \$9M oo ka badan 66% wadarta kaalmada dhaqaale ee la bixiye sannadka 2023.

	Kharashka	2021	2022	2023	2024	2025
2521	Kabka lasiiyo Shirkadaha Gaarka ah aan ka Shayqaynin Maaliyadda	1,271,695	5,115,305	5,400,231	8,952,366	4,941,376
2533	Kabitaannada la siiyo qaybaha kale ee dawladda	-	-	-	-	7,692,500

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

	Wadarta	\$1,271,695	\$5,115,305	\$5,400,231	\$8,952,366	\$12,633,876
--	---------	-------------	-------------	-------------	-------------	--------------

Shaxda 28^{aad}: Kaalmo Dhaqaale, 2021-2025

DEEQAHA

Kharashaadka deeqaha la siiyo dawlad goboleedyada dalka, Maamulka Gobolka Banaadir iyo lacagaha la siiyo hay'adaha caalamiga ah ee ay dawladdu xubinta ka tahay, waxaa la bixiyey \$180M oo u dhiganta 19% wadarta guud ee kharashaadka la bixiyey sannadka 2025. Kharashaadka Deeqaha ayaa sameeyay kor u kac dhan 12% marka loo fiiriyo kharashaadkii la bixiyey sannadka 2024. Sidoo kale sannadka 2024 waxaa la bixiyey \$120M, wuxuuna uu sameeyay kor u kac u dhigma 26% marka la barbardhigo deeqaha la bixiyey sannadka 2023.

Madaxa	Nooca Kharashka	2021	2022	2023	2024	2025
2621	Deeqaha Joogtada ee La Siiyo Hay'adaha Caalamiga ah	1,197,901	1,342,666	2,332,718	1,943,753	4,324,010
2631	Deeqaha Joogtada ah ee La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda	44,652,622	100,513,688	77,599,121	97,157,159	125,477,589
2632	Deeqaha Raasumaalka ah ee Qaybta kale ee Dowladda	-	9,386,564	14,814,631	20,561,396	49,917,663
	Wadarta Deeqada	\$45,850,523	\$111,242,917	\$ 94,746,471	\$ 119,662,309	\$179,719,262
	Korork/Naaquska	-43%	143%	-15%	26%	50%

Shaxda 29^{aad}: Deeqaha la bixiyey, 2021-2025

Shaxda 30^{aad} waxay soo bandhigaysaa faahfaahinta lacagaha loo wareejiyey dawlad goboleedyada dalka, Maamulka Gobolka Banaadir iyo hay'adaha kale ee dawladda sannadaha 2021-2025. Waxay isugu jirtaa lacaga laga bixiyey miisaaniyadda kharashadka joogtada iyo Miisaaniyadda Kharashaadka Mashariicda oo ay maalgigliyaan hay'adaha caalamiga ah. Maamulka Gobolka Banaadir ayaa loo wareejiyey \$41M oo u dhiganta 25% wadarta lacagaha loo wareejiyey dawlad goboleedyada sannad maliyadeedka 2025. Dawlad goboleedyada Galmudug ayaa loo wareejiyey lacag dhan \$25M oo u dhiganta 15% wadarta lacagaha loo wareejiyey dawlad goboleedyada dalka.

Waxaa ka mid ah lacagaha laga bixiyey deeqaha lacag loo wareejiyey Gobolka Awadal, waxaa lagu bixiyey taakuleen maaliyadeed ee abaaraha, waxaana la bixiyey lacag dhan \$500K. Waxaa kaloo laga bixiyey madaxaan lacag dhan \$9.6M oo loo wareejiyey Maamulka Dekadda Xamar, waxaana lagu bixiyaa horumarinta dekadada Muqdishu si waafaqsan heshiiska lala galay shirkadda maamusha Dekadda.

Dawlad Goboleedyada/Maamulka	2021	2022	2023	2024	2025
Bangiga Horumarinta Soomaaliya	528,434	555,816	728,532	807,808	755,028
Rugta Ganacsiga Soomali	528,434	555,816	728,532	807,808	755,028
Dawlad Goboleedka Somaliland	18,000	12,763,000	28,000	-	-
Dawlad Goboleedka Puntland	7,822,910	20,588,798	6,528,636	16,376,387	12,884,992
Dawlad Goboleedka Jubbaland	6,014,444	13,859,217	17,518,935	14,071,823	33,389,301
Dawlad Goboleedka Koofur-galbeed	6,325,581	18,027,674	15,659,062	22,191,403	27,583,315
Dawlad Goboleedka Galmudug	4,329,093	13,656,929	11,466,183	15,414,983	24,875,574
Dowlad Goboleedka Hirshabeelle	3,232,734	10,383,632	10,902,089	14,014,906	23,209,189
Maamulka Gobolka Benadir iyo Dawladda Hoose ee Muqdishu	15,852,993	18,209,372	28,853,784	34,033,437	41,281,825
Dawlad Goboleedka Waqooyi Bari	-	-	-	-	591,000
Wadarta	\$44,652,622	\$108,600,252	\$92,413,752	\$117,718,556	\$165,325,252

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

% Kororka/Naaquska	-44%	143%	-15%	27%	40%
---------------------------	-------------	-------------	-------------	------------	------------

Shaxda 30^{aad}: Deeqaha la siiyo Dawlad Goboleedyada, 2021-2025

Dawlad goboleedka Jubbaland ayaa loo wareejiyey lacag dhan \$33M oo u dhiganta 20% wadart deeqaha loo wareejiyey sannadka 2025. Dawlad goboleedka Koofur Galbeed ayaa loo wareejiyey \$28M 17% wadarta lacagaha loo wareejiyey dawlad goboleedyada dalka, Putland \$12M (8% wadarta), halka Dawlad goboleedka waqooyi bari loo wareejiyay qadar lacageed oo dhan 0.6M oo u dhiganta 0.4% wadarta lacagaha loo wareejiyey dawlad goboleedyada dalka sannad maaliyadeedka 2025.

FAA'IIDADA BULSHADA

Shaxda 31^{aad} waxay muujinaysaa kharashaadkii lagu bixiyey Faa'iidada Bulshada sannadaha 2021-2025. Sannadka 2025 waxa la bixiyay kharash dhan \$19M oo u dhiganta 2% wadarta guud ee kharashaadka la bixiyay sanadka 2025, wuxuuna ka hooseeyaa 88% wadarta kharashaadka Faa'iidada Bulshada, halka laga bixiyey sannadka 2024 qadar dhan \$154M oo ka badan 18% wadarta Kharashaadka Faa'iidada Bulshada ee la bixiyey sanadka 2023. Kharashkan waxaa laga bixiyaa mashaariicda Bangiga Adduunka uu dawladda ugu deeqay, waana lacag caddaan ama wax u dhigma oo la siiyo barakacayaasha iyo qoysaska nugul ee ku nool dalka gudahiisa.

Madax	Nooca Kharashka	2021	2022	2023	2024	2025
2711	Dheefta Badbaadada Bulshada - Lacag Cadaan ah	6,149,166	96,941,343	78,710,424	114,464,338	19,110,000
2712	Dheefta Badbaadada Bulshada - Lacag ahayn	-	24,241,281	25,843,715	-	-
2721	Gargaarka Bulshadda - Lacag ahaan	33,715,682	61,753,491	-	-	-
2722	Gargaarka Bulshadda - Lacag ahaan	-	6,000,000	26,000,000	39,346,256	-
	Wadarta	\$39,864,848	\$188,936,115	\$130,554,139	\$153,810,594	\$19,110,000

Shaxda 31^{aad}: Faa'iidada Bulshada, 2021-2025

Kharashaadka kale

Sida ka muuqato shaxda 32^{aad}, kharashaadka kale waxaa markii ugu horaysay la bixiyey \$52M oo u dhiganta 5% wadarta kharashaadka guud ee la bixiye sannad maaliyadeedka 2025, waxaana la siiyey hay'ada caalami oo adeegyo ka fuliyo gudaha dalka. Waxay lagu bixiyaa adeegyo kala duwan, sida caafimaadka iyo caawinta bulshada nugul ee ku nool gobolada dalka.

Madax	Faahfaahin	2021	2022	2023	2024	2025
2821	Wareejimaha Kale ee aan Meelna Lagu Qeexin	-	-	31,526,834	40,676,493	52,147,684
	Wadarta	\$-	\$-	\$31,526,834	40,676,493	\$52,147,684

Shaxda 32^{aad}: Kharashaadka Kale

Kharashaadkaan ku xusan shaxda 32^{aad} ayaa laga bixiye mashaariicda hoos timaada Wasaaradda Caafimaadka, waxaa adeegyo caafimaad looga fuliyey gobolada dalka. Kharashaadkaan waxaa lagu fuliyey adeegyo bulsho oo laga fuliyey gobolada dalka, waxaana lagu bixiyey adeegyo caafimaad oo kala duwan sida iibinta qalabayn isbitaalo kala duwan.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Soo Iibsashada Hantida aan maaliyada ahayn (hantida maguurtada ah)

Shaxda 33^{aad} waxaa ka muuqda kharashaadka ku baxay soo iibinta hantida maguurtada ah ee la bixiyey sannadaha 2021-2025. Sannadka 2025 waxaa lagu bixiyey \$74M oo u dhiganta 8% wadarta kharashaadka guud ee la bixiyey sannadka 2025. Wuxuuna sameeyay koror dhan 162% marka la barbardhigo kharashka lagu bixiyey soo iibinta hantida maguurtada ee sannad maaliyadeedka 2024.

Kharashaadka joogtada waxaa laga bixiyey \$22M oo ah 30% wadarta kharashaadka soo iibsashada hanti aan maaliyadda ahayn ee la bixiyey sannadka 2025. Kharashaadka mashaariicda waxaa laga bixiyey \$52M oo u dhiganta 70% wadarta kharashaadka ku baxay soo iibinta hantida maguurtada ah ee la bixiyey sannadka 2025.

Madaxa	Nooca Kharashka	2021	2022	2023	2024	2025
3111	Dhismooyinka iyo Qaabdhismeedka	2,120,088	930,992	477,784	128,980	8,956,853
3112	Qalabka iyo Mashiiinadda	7,035,990	4,220,699	10,066,564	16,737,751	59,713,066
3113	Hantida kale ee Maguurtada ah	6,947,340	8,049,297	3,863,425	11,347,663	5,866,902
3114	Nidaamyada Hubka	-	-	-	105,000	99,450
3144	Hantida aan Qiimo Dhicin ee an la Taaban Karin	-	-	-	200,000	-
	Wadarta	\$16,103,418	\$13,200,988	\$14,407,773	\$28,519,394	\$74,636,271
		-13%	-18%	9%	98%	162%

Shaxda 33^{aad}: Hantida aan Maaliyadda ahayn, 2021-2025

Kharashaadka mashaariicda ayaa laga bixiyey \$26M oo u dhigant 49% wadarta kharashaadka mashaariicda ee la bixiyey sannadka 2025, waxaa lagu soo iibiyey qalabka korontada laga dhaliyo oo la siiyo goobaha adeeyada caafimaad iyo waxbarasho bixiya, sida iskuulada goobaha caafimaad. Waxaana laga bixiyey Mashaariicda hoos yimaad Wasaaradda Tamarta iyo Khayraadka Biyaha.

DIB U BIXINTA DAYAMAHA

Shaxda 34^{aad} waxay muujinaysaa kharashaadkii ku baxay dib u bixinta daymaha gudaha ee sannadaha 2021 – 2025. Sanadaha 2025 waxaa la bixiyey \$22M. Sannadka 2024 waxaa la bixiyey \$1.6M. daymahan waxay isugu jiraan dib u bixin daymaha Bangiga Dhexe, iyo daymaya mudada fog ee lasiiyo Bangiga Adduunka.

Madaxa	Nooca Kharash	2021	2022	2023	2024	2025
2911	Deynta Gudaha	35,061,554	11,997,573	18,843,737	1,679,539	22,275,145
	Wadara	\$35,061,554	\$11,997,573	\$18,843,737	\$1,679,539	\$22,275,145

Shaxda 34^{aad}: Dib u bixinta Daymaha, 2021-2025

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025


Dakhliga Gudaha iyo Kharashaadka Hawlfulinta Dawladda

Shaxda 35^{aad} waxay isbarbardhigaysaa dhabta dakhliga gudaha oo ay dawladdu soo uruurisay sannadaha 2021-2025, iyo kharashaadka joogtada ah ay dawladdu bixisay isla sannadaha 2021-2025. Kharashaadka joogtada ee la barbardhigi doono dakhliga gudaha kuma jiraan kharashaadka mashaariicda laga maalgaliyo kabka mashaariicda oo ay dawladdu heshay xiliyada la is barbardigaayo. Sidoo kale waxaa laga reebay lacagaha loo wareejiyo dawlad goboleedyada dalka ee laga bixiyo kabka miisaaniyadeed ay dawladdu hesho.

Faahfaahin	2021	2022	2023	2024	2025
Dakhliga Gudaha	\$229,561,321	\$262,669,745	\$329,491,711	\$369,353,791	\$404,313,527
Kharashaadka Joogtada	\$351,864,040	\$404,148,790	\$422,819,961	\$488,547,927	\$563,659,461
% Dakhliga Gudaha	65%	65%	78%	76%	72%

Shaxda 35^{aad}: Dakhliga Gudaha iyo Kharashaadka Dawladda, 2021-2025

Sida ay soo bandhigayso shaxda 34^{aad}, Dakhliga Gudaha ayaa daboolay 72% wadarta kharashaadka joogtada ah ay dawladdu bixisay sannadka 2025. Sidoo kale, sannad maaliyadeedka 2024 Dakhliga Gudaha wuxuu daboolay 76% wadarta kharashaadka joogtada ah oo ay Dawladdu bixisay sannadka 2024.



Jaantuska 21^{aad}: Dakhliga Gudaha & Kharashaadka Hawlfulinta

Farqi ka muuqda jaantuska 21^{aad} ee u dhaxeeya dakhliga gudaha iyo kharashaadka joogtada ah ee Dawladda, waxaana laga bixiyaa haraaga Khasnadda Dawladda ee kasoo wareega sannadkii ka horeeyey iyo deeqaha kabka miisaaniyadda oo ay dawladdu ka heshay deeqaha dibadda ee la helay sannadaha 2021-2025.

Sida ku cad jaantuska 21^{aad}, dakhliga gudaha kuma filna in lagu bixiyo kharashaadka joogtada ah ee Dawladda ee la bixiyey sannadaha 2021-2025. Wuxuuna faahfaahinayaa farqiqa u dhaxeeya dakhliga gudaha ee kharashaadka joogtada ah ee Dawladda ee la bixiyey sannadaha 2021-2025. Sannadka 2025 waxaa lagu kabay kharashaadka joogtada ah ee dawladda lacag dhan \$159M oo u dhigtanta (28%) wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey. Sidoo kale sannadka 2024 ayaa lagu kabay \$119M oo u dhiganta (24%) wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey sannadkaas. Sannadka 2023 ayaa lagu kabay kharashaadka joogtada ah lacag dhan \$93M oo u dhiganta (22%) wadarta kharashaadka joogtada ee la bixiyey sannadka 2023.

Sannadaha 2022 iyo 2021 ayaa lagu kabay \$141M iyo \$122M kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey isla sannadahaas, waxayna u dhigmaan labadaba 35% wadarta kharashaadka joogtada ah ee la bixiyey isla sannadahaas.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Shaxda 36^{aad} waxay soo bandhigaysaa isbarbardhiga dakhliga gudaha iyo wadarta kharashaadka mushaaraadka shaqaalaha Dawladda ee la bixiyey sannadaha 2021 - 2025. Sida ku cad shaxda sare sanad maaliyadeedka 2022 – 2025 dakhliga gudaha ayaa daboolay 100% bixinta mushaaraadka shaqaalaha dawladda, waxaana la helay dakhliga gudaha oo ka badan wadarta kharashaadka mushaaraadka shaqaalaha dawladda ee la bixiyey sannadaha 2022-2025.

Faahfaahinta	2021	2022	2023	2024	2025
Dakhliga Gudaha	\$229,561,321	\$262,669,745	\$329,491,711	\$369,353,791	\$404,313,527
Mushaarka Shaqaalaha	\$247,830,243	\$257,943,107	\$290,114,157	\$338,162,791	\$366,423,511
Farqiga	\$(18,268,922)	\$4,726,638	\$39,377,554	\$31,191,000	\$37,890,016
% Farqiga	-7%	2%	14%	9%	10%

Shaxda 36^{aad}: Dakhliga Gudaha Vs Mushaaraadka Shaqaalaha, 2021-2025

Sannadka 2025 Dakhliga gudaha ee usoo xarooday dawladda waxa uu ka badan yahay kharashaadkii mushaarka shaqaalaha ee ay dawladu bixisay oo ahayd \$366M, halka sannad maaliyadeedka 2021 Dakhliga gudahu ka yar yahay wadarta kharashaadka mushaarka shaqaalaha lacag dhan (\$18M) una dhiganta 7% wadarta mushaaraadka shaqaalaha ee la bixiyey sannad maaliyadeedka 2021.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

DAYMAHA DAWLADDA 2021-2025

Daymaha dawladda waxaa loo kala qaaday labo qaybood; qaybta koowaad waa dayn lasoo qaatay sannadahaan danbe oo loo isticmaalay in lagu bixiyo kharashaadka joogtada ah ee ku jira miisaaniyadda sannadaha lasoo qaatay daynta, qaybta labaad waa daymaha muddada fog oo ay soo qaadatay dawladdii dhexe wixii ka horeeyey sannadkii 1991^{dii}.

Faahfaahin	2021	2022	2023	2024	2025
Daymaha Gudaha	21,992,191		8,000,000		20,500,000
Daymaha Dibadda	74,373,383	44,040,950			
Wadarta Daymaha	\$96,365,574	\$44,040,950	\$8,000,000	\$-	\$20,500,000

Shaxda 37^{aad}: Daymaha Dawladda Gudaha/Dibada

Shaxda 38^{aad} waxay soo bandhigaysaa dayamaha ama horumariska ay dawladdu soo qaadatay sanadaha 2021-2025. Waxayna dawladda ku bixisaa kharashaadka Dawladda ee ku jira miisaaniyadda Dawladda, waxayna qayb ka tahay maamulka lacag bixinta Dawladda. Daymaha Gudaha ayaa laga soo qaatay Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, Daymaha Dibadda waxaa laga soo qaatay Hay'adda Lacagta Adduunka (IMF)ta.

Sannad maaliyadeedka 2025 waxay Dawladu ka qaadatay Bangiga Dhexe Soomaaliya dayn dhan \$21M oo horumaris. Lacagahan ayaa lagu bixiyey kharashaadka joogtada ah ee Dawladda intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2025. Sidoo kale sannadka 2021 waxay Hay'adda Lacagta Adduunka kasoo daynsatay \$74M oo lagu bixiyey kharashaadka joogtada ah. Sidoo kale sannadka 2022 ayaa laga soo qaatay Hay'adda Lacagta Adduunka dayn dhan \$44M oo lagu bixiyey kharashaadka hortabinta u leh Dawladda. Sannadka 2024 wax dayn masoo qaadan Dawladu.

Sida kor ku xusan, daymaha Gudaha waa lacago horumaris ah oo Wasaaradda Maaliyadda ka daynsatay Bangiga Dhexe si loogu bixiyo mushaaraadka shaqaalaha dawladda, dhammaan horumariska laga qaatay Bangiga Dhexe waxaa dib loo siiyey isla sannadka daynta la qaatay gudiisa, waxayna ka muuqan doontaan qaybta hoose ee lacag bixinta Dawladda.

Daymaha Mudda Fog

Shaxda 38^{aad}, waxay soo bandhigaysaa daymaha muddada fog lagu leeyahay dawladda, waxaana soo qaatay daymaha ka muuqda shaxda dawladdii dhexe mudadii ka horaysay sannadka 1991dii . Waxay isugu jirtaa daynta ka muuqata shaxda, lafahii daynta dawladda soo qaadatay iyo dulsaarkii daymaha oo sii kordhaayey laga soo bilaabo marka daynta lasoo qaatay.

Sannadkii dhammaaday ee 2025 daynta ugu badan waxaa nagu leh wadama la isku yiraahdo kooxaha aan ku jirin naadiga Paris (non-Paris Club). Waxayna dawladda ku leeyihiin \$799M oo u dhiganta 54% wadarta daymaha mudada fog ee lagu leeyahay dawladda. Daymaha Dhinacyada badan waxay nagu leeyihiin \$634M oo u dhiganta 43% wadarta daymaha ku haray dawladda dhammaadka sannad maaliyadeedka 2025.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Hay'adaha	2021	2022	2023	2024	2025
Daymaha Ganacsiga	2,440,000	2,530,000	2,600,000	2,670,000	2,730,000
Daymaha Dhincayada Badan	1,080,680,000	1,039,480,000	669,468,941	685,100,967	634,450,000
Kooxaha aan ku jirin Paris (non-Paris)	724,770,000	735,490,000	764,380,000	779,320,000	798,780,000
Kooxda Paris (Paris Clup)	2,678,030,000	2,662,250,000	1,381,220,000	47,707,356	46,320,000
GRAND TOTAL	\$4,485,920,000	\$4,439,750,000	\$2,817,668,941	\$1,514,798,323	\$1,482,280,000
	-1%	-1%	-37%	-46%	-2%

Shaxda 38^{aad}: Dayma Mudada Fog

Sannadka 2025, daymaha dhinacyada badan waxay ka hoosaysaa 7% wadartii daymaha dawladda lagu lahaa dhammaadka sannadka 2024. Intii lagu guda jiray sannadka 2025, Sanduuqa Lacagta ee Carabta ayaa ka cafiyey dawladda dayn dhan \$102M oo 34% wadarta daymaha ee Sanduuqa Lacagta ee Carabta ku lahaa dawladda dhammaadka sannadka 2024.

Daymaha Kooxaha aan kujiran Naadiga Baariis ayaa sare ku kacsay 2% wadarta daymaha lagu lahaa dhammaadka sannadka 2024, waxaana sababay kororka daymaha kororka dulsaarka daymaha, maadaama lagu guuldaraystay bixinta daynta. Halka Daymaha wadamada ku jiraa naadiga Baariis ay hoos u dhacday 4% wadarta daynta lagu lahaa dawladda dhamaadka sannadka 2024. Waxaana la bixiyey \$1.9M dawladda Ruushka ku lahayda dawladda intii lagu guda jiray sannadka 2025.

Laga soo bilaabo sannadka 2020, dawladda waxaa laga cafiyey daymaha muddada fog qaarkood iyadoo ka faa'iidayso barnaamijka dayn cafinta oo ay dawladdu kala shaqaysay Hay'adda Lacagta Aduunka (IMFta), sannadka 2020 waxaa la cafiyey 14% wadarta daynta dawladda lagu lahaa dhammaadka sannadka 2019. Daynta cafinta ugu badan dawladda waxaa loo sameeyey sannadaha 2023 iyo 2024.

Sannadka 2023 waxaa laga cafiyey dawladda \$1.7B oo u dhiganta 40% daynta lagu lahaa dawladda dhamaadka sannadka 2022. Sannadka 2024 waxaa dawladda laga cafiyey \$1.3B oo u dhiganta 46% wadarta daymaha muddada fog ee dawladda lagu lahaa dhamaadka sannadka 2023. Isku darka daymaha laga cafiyey dawladda sannadaha 2023 iyo 2024 ayaa ahayd \$3.1B oo u dhiganta 70% wadarta daymaha mudada fog ee lagu lahaa dawladda dhamaadka sannadka 2022.

Sannadka 2024 Kooxaha ku midoobay naadiga Paris (Paris Club), marka laga reebo labo dawladdood dhammaan waa cafiyeen daymaha ay dawladda ku lahaayeen dhammaadka sannadka 2023. Dhammaadka sannadka 2024 Dawladaha Ruushka iyo Spain kaliya ayaa dawladda Soomaaliya dayn ku leh wadama la isku yiraahdo naadiga Paris (Paris Club). Wadamada la isku yiraahdo kooxaha aan ku jirin naadiga Paris (non-Paris Club) wax dayn ah ma cafin, balse sannad kasta waxaa sii kodhaayey wadarta daymaha ay leeyhiin dawladda, waxaa sii kordhinaayey dulsaarka daymaha maadaama aan la bixin lafahii daynta ay laahyeen wadamada ku midoobay kooxaha aan ku jirin naadiga Paris (non-Paris club). Faahfaahinta iyo isbadalada daymaha mudada fog ee 2021-2025 lasoo dhaafay, dawladaha iyo hay'adaha ku leh daynta dawladda waxaad ka heli kartaa lifaaqa 6^{aad} ee warbixinta ee la socdo. Daymaha la cafiyey, kuwa aan la cafin iyo wadarta daymaha kordhay waxaad ka heli kartaa lifaaqa.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

MUUQAALADA MAALIYADEED EE LA ISKU DARAY
MUUQAALKA LACAG QABASHADA IYO BIXINTA
(2025 iyo 2024)

Faahfaahin	Faahfaahin Dheeri ah	2025	2024
		Lacag Qabasho & Bixin	Lacag Qabasho & Bixin
Lacag Qabashada			
Canshuurta dakhliga, Faa'iidada iyo Faa'iidada Raasumaalka	3.01	44,793,741	36,170,675
Canshuurta Agabka iyo Adeegga	3.02	67,252,659	51,419,944
Canshuuraha ganacsiga caalamiga ah	3.03	158,395,474	168,875,350
Canshuuraha Kale	3.04	10,237,119	10,297,947
Wadarta Canshuuraha		280,678,993	266,763,916
Deeqaha Dowladaha Shisheeye	3.05	18,558,444	29,698,555
Deeqaha Hay'adaha Caalamiga	3.06	498,900,341	513,663,372
Wadarta Deeqaha		517,458,785	543,361,927
Dakhliga Hantida	3.07	932,170	-
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	3.08	123,280,858	102,021,111
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	3.09	1,331,313	568,764
Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay	3.10	1,455,710	-
Wadarta Dakhliga Kale		127,000,051	102,589,875
Wadarta Dakhliga Dawladda		925,137,830	912,715,718
Lacag Qabashada Kale			
Iibinta Hantida Maaliyadeeds	3.11	3,631,915	-
Iibka Hantida		3,631,915	
Amaahda Gudaha Lacagta kasoo Xaroota	3.12	20,500,000	-
Deyn		20,500,000	
Hantida Maaliyadeed	3.13	14,350,597	-
Hantida Maaliyadeed		14,350,597	
Wadarta Lacag Qabashada		\$963,620,341	\$912,715,718
Magdhawga Shaqaalaha	3.14	372,218,681	341,574,738
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	3.15	256,720,241	204,503,361
Khidmadda Maalgashiga	3.16	6,351,284	5,824,192
Kabka	3.17	12,633,876	8,952,366
Deeqaha	3.18	179,726,066	119,662,309
Faa'iidooyinka Bulshada	3.19	19,123,000	153,810,594
Kharashaadka Kale	3.20	52,199,445	40,676,493
Hantida aan Maaliyadda ahayn	3.21	75,841,603	28,519,394
Wadarta Kharashaadka		974,814,195	903,523,449
Lacag Bixinnada Kale			
Hantida Maaliyadeed	3.22	3,705,000	-
Dib-u-Bixin	3.23	22,275,145	1,679,539
Wadarta Lacag Bixinta		\$1,000,794,340	\$905,202,987
Dheeri/Dhiman		\$(37,173,999)	\$7,512,730
Haraaga Lacagta ee bilowga Sannadka	3.24	106,270,139	98,757,409
Haraaga Dhammaadka Sannadka	3.24	\$69,096,140	\$106,270,139

Sida ku cad faahfaahinta tirsi 3.24 lacag gaarayso US\$ 28,849,242 & US\$ 37,267,341 oo ku jirta muuqaalka haraaga xisaabaadka Dawladda dhammaadka sannadaha 2025 & 2024 waxa ay gaar tahay mashaariicda dibedda laga maalgaliyo, loomana isticmaali karo ujeedo ka baxsan sida lagula heshiiyey deeq bixiyayaasha, waana lacaga ay xadidan tahay isticmaalka. Intaa wixii ka baxsan Dawladu waxay ku maalgelinta kartaa kharaashaadkeed joogtada.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

MUUQAALKA ISBARBARDHIG DHABTA IYO MIISAANIYADDA – 2025

Faahfaahinta	2025				
	Dhabta - 2025	Isbedelka Miisaaniydda ee Kalawareejimaha	Kutalagalka Miisaaniyadda	Haraa/Dheeri	% Fulinta
Lacag Qabashada					
Canshuurta dakhliga, Faa'iidada iyo Faa'iidada Raasumaalka	44,793,741	38,031,213	38,031,213	6,762,528	118%
Canshuurta Agabka iyo Adeegga	67,252,659	56,111,497	56,111,497	11,141,162	120%
Canshuuraha ganacsiga caalamiga ah iyo wax kala iibsiga	158,395,474	186,211,437	186,211,437	(27,815,963)	85%
Canshuuraha Kale	10,237,119	14,935,112	14,935,112	(4,697,993)	69%
Wadarta Canshuuraha	280,678,993	295,289,259	295,289,259	(14,610,267)	95%
Deeqaha Dowladaha Shisheeye	18,558,444	42,000,000	42,000,000	(23,441,556)	44%
Deeqaha Hay'adaha Caalamiga	496,941,218	859,628,154	859,628,154	(362,686,936)	58%
Wadara Deeqaha	515,499,662	901,628,154	901,628,154	(386,128,492)	57%
Dakhliga Hantida	932,170	-	-	932,170	0%
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	119,915,341	135,052,170	135,052,170	(15,136,829)	89%
Ganaaxa, Ciqaabta iyo Luminta Dacwadaha	1,331,313	-	-	1,331,313	0%
Kharashka, Khidmadaha, iyo Sheegashooyinka hadda jira aynu lee nahay	1,455,710	-	-	1,455,710	0%
Dakhliga Kale	123,634,534	135,052,170	135,052,170	(11,417,636)	92%
Wadarta Dakhliga	919,813,189	1,331,969,583	1,331,969,583	(412,156,394)	69%
Lacag Qabashada Kale					
Iibinta Hantida Maaliyayees	3,631,915	-	-	-	0%
Wadarta Iibka Hantida	3,631,915	-	-	-	0%
Amaahda Gudaha Lacagta kasoo Xaroota	20,500,000	-	-	-	0%
Wadarta Deynta	20,500,000	-	-	-	0%
Hantida Maaliyadeed	14,350,597	-	-	-	0%
Wadarta Hantida Maaliyadeed	14,350,597	-	-	-	0%
Wadarta Lacag Qabashada	\$958,295,700	\$-	\$-	\$-	0%
Lacag Bixinta					0%
Mushaarka Shaqaalaha	371,063,711	377,718,817	370,000,625	6,655,106	98%
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	253,882,318	398,808,976	396,453,106	144,926,658	64%
Khidmadda Maalgashiga	6,351,284	8,141,862	13,800,000	1,790,578	78%
Kaalmada Dhaqaale	12,633,876	13,177,722	13,280,000	543,846	96%
Deeqaha	179,719,262	230,760,905	238,663,975	51,041,642	78%
Faa'iidooyinka Bulshada	19,110,000	76,824,000	77,000,000	57,714,000	25%
Kharashaadka Kale	52,147,684	63,444,328	68,416,928	11,296,644	82%
Hantida aan Maaliyadda ahayn	74,636,271	190,837,717	182,099,693	116,201,446	39%
Wadarta Lacag Bixinta	\$969,544,407	\$1,359,714,328	\$1,359,714,328	\$390,169,920	71%
Lacag Bixixnada Kale					
Hantida Maaliyadeed	3,705,000	-	-	-	0%
Dib-u-Bixin	22,275,145	-	-	-	0%
Wadarta Lacag Bixinta	\$995,524,552	\$-	\$-	\$-	0%
Saafiga Lacagta	(37,228,852)	-	-	-	

MACLUUMAAD LA XIRIIRA MUUQALADA MAALIYADEED

1.0 WARBIXIN GUUD

Xarunta ugu weyn ee ay ku shaqayso xiligaan Dawladda Federaalka Soomaaliya waa magaalada Muqdisho oo isla markaana ah magaala madaxda dalka. Hay'adda soo gudbisay warbixintaan waxaa laga heli karaa cinwaankaan hoose ku xasan:

Xafiiska Xisaabiyaha Guud ee Dawladda
Dhismaha Wasaarada Maaliyadda, Degmada Shingaani
Muqdisho, Soomaaliya

Hawlaha loo igmaday Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo hay'adaha hoos yimaada waxaa ka mid ah in muwaadinka Soomaliyeed ka haqab tirtiro adeegyada dawladeed ee ay ugu baahanyihiin si joogto ah.

Sharciyada maaliyadeed ee lagu maamulay hawlaha la xiriiira maaliyadda Dawladda waxaa ka mid ah:-

1. Sharciga Qoondada Miisaaniyada ee 2025
2. Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019 iyo Xeer nidaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ayaa isna la ansixiyay 2022.
3. Sharciga wax iibsiga Dawladda ee (Procurement Act), 2016

December 2019 Baarlamaanka Dawladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ansixiyay Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, sidoo kale Xeer nidaamiyaha Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ayaa isna la ansixiyay 2022.

Sharciga cusub ee Maamulka Maaliyadda waxa uu beddeli doonaa Sharcigii hore ee Habraaca Maaliyadda iyo Xisaabaadka Dawladda ee 1961 ee markii danbe 1971 wax looga badalay. Sharcigaan cusub waxana uu sii adkaynayaa baahidii loo qabay in la soo saaro warbixin maaliyadeed ee uu farayay sharcigii hore ee la beddelay. Sidaas daraadeed, waxa uu farayaa in Xisaab-xirka loo soo diyaariyo hab waafaqsan xeerarka caalamiga ah ee xisaabaadka Dawladda sida ku cad qodobka 94^{aad} faqradiisa 4aad, halka qodobka 104aad ee Sharciga cusub kusii kordhinaayo faahfaahinada dheeriga ah ee loo baahanyahay in la raaciyo Xisaab-xirka.

2.0 Xeerar Xisaabeedka Dawladda

Waxaa jira mabaadi'da, saldhigyada, xeerarka, iyo habraacyada ay Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya qaadatay marka ay diyaarinayso oo soo bandhigayso warbixinnada maaliyadeed. Siyaasadaha xisaabinta ee loo adeegsaday diyaarinta warbixinnadan maaliyadeed ee Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa hoos ku xusan:

A) Xeerarka lagu saleeyay Diyaarinta Xisaab-xirka

Muuqaalada Maaliyadeed ee darsan ee Dowladda Federaalka Soomaaliya (FGS) waxaa loo diyaariyay si waafaqsan Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 iyo Xeerarka Caalamiga ah ee Xisaabinta Hay'adaha Dawladda (IPSAS) – Cash Basis (2017).

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Qoraallada lifaaqa (notes) ee muuqaallada maaliyadeed waa qayb muhiim ah oo ka mid ah fahamka warbixinnada, waana in la isla akhriyaa si wadajir ah warbixinnada laftooda.

Warbixinnada waxaa lagu diyaariyay mabda'a sii-socoshada hay'adda (going concern), iyadoo siyaasadaha xisaabinta si joogto ah loo adeegsaday sannadka oo dhan.

Iyadoo la raacayo Cash Basis IPSAS, muuqaallada maaliyadeed ee aasaasiga ah waxaa ka mid ah kuwa soo socda, sida uu dhigayo Qaybta 1^{aad} ee heerkani:

- ✓ Warbixinta Lacagaha la qabtay iyo Kuwa la Bixiyey (Statement of Cash Receipts and Payments)
- ✓ Warbixinta Isbarbardhigga Miisaaniyadda iyo Dhabta ah (Statement of Comparison of Budget and Actual Amounts)
- ✓ Siyaasadaha Xisaabinta iyo Qoraallada Sharaxaadda (Accounting Policies and Explanatory Notes).

Warbixinnadan aasaasiga ah waxaa lagu xoojiyay soo bandhigid macluumaad dheeraad ah oo ku jira qoraallada lifaaqa, sida lagu sheegay Qaybta 2^{aad} ee Cash Basis IPSAS, isla markaana taageeraya u gudbidda mustaqbalka ee nidaamka accrual IPSAS. Macluumaadka dheeraadka ah waxaa ka mid ah:

- ✓ Lacagaha la sugayo (receivables) iyo kuwa lagu leeyahay (payables)
- ✓ Deynta guud ee dowladda (amaahyo iyo deymo)
- ✓ Macluumaad qaybsan oo ku saabsan kharashaadka shaqooyinka dawladda (segment information)

Si loo kordhiyo fahamka warbixinnada maaliyadeed ee isku-dhafaan, waxaa sidoo kale la bixiyay warbixinno dheeraad ah iyo jadwallo faahfaahsan oo ay ka mid yihiin:

- ✓ Warbixinnada isticmaalka miisaaniyadda ee ku saleysan qaab-dhismeedka ansixinta (appropriation structure)
- ✓ Warbixinta daymaha dib-u-dhaca ah ee kharashaadka (expenditure arrears)
- ✓ Warbixinta deynta guud ee dowladda

Guud ahaan, qaabkan soo bandhigidda warbixinnada wuxuu xoojinayaa daahfurnaanta, isla-xisaabtanka, iyo fahamka guud ee xaaladda maaliyadeed ee dowladda

B) Hay'ada warbixinta soo gudbisay

Hay'adda warbixintu khusayso waa Dowladda Federaalka Soomaaliya (FGS). Xafiiska Xisaabiyaha Guud ayaa diyaariyay warbixinnada maaliyadeed ee Dawladda Federaalka Soomaaliya, iyadoo la raacayo Qodobka 45(1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud (2019), kaasoo siinaya Xisaabiyaha Guud awoodda uu ku diyaarin karo warbixinnada maaliyadeed ee sannadlaha ah ee Dowladda Federaalka Soomaaliya.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Iyadoo la waafajinayo farqadda 1.4.8 ee Cash Basis IPSAS, warbixinnadan maaliyadeed waxaa ku jira dhammaan dhaqdhaqaaqada maaliyadeed ee la xiriira hay'adaha Dowladda Federaalka, mashaariicda, iyo kuwo kale sida lagu qeexay Sharciga Qoondaynta (Appropriation Act, 2022) iyo hay'adaha miisaaniyadda ee sannadkaas.

Warbixinnada maaliyadeed waxay si buuxda u daboolayaan Dowladda Federaalka Soomaaliya, sida ku cad Qodobka 45(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud 2019 iyo Qodobka 103 ee Xeer-nidaamiyaha 2022. Tani waxay ka kooban tahay:

- (i) Khasnadda (Treasury)
- (ii) Wasaaradaha, waaxyaha, iyo hay'adaha dowladda oo ay ku jiraan mashaariicda la xiriira
- (iii) Sanduuqyada gaarka ah
- (iv) Lacaga ka baxsan miisaaniyadda

Warbixinnada maaliyadeed ee isku-dhafaan waxay ku jiraan dhammaan hay'adaha ay dowladdu maamusho muddada sannadka. Liiska hay'adaha muhiimka ah ee hoos yimaada dawladda waxaa lagu soo bandhigay Lifaafa 1^{aad}.

Sidoo kale, hay'adaha ay dowladdu leedahay (State-Owned Enterprises) waxaa lagu tixgeliyaa hay'ado hoos yimaada dawaldda, balse laguma darin warbixinnada isku-dhafaan. Tani waxay sabab u tahay in xisaabaadkoodu ku saleysan yahay nidaam accrual (IFRS), taasoo ka duwan nidaamka Cash Basis ee ay adeegsato dowladda, sidaas darteed isku-darka xogtaasi ma noqon lahayn mid wax ku ool ah.

Dhammaan macaamilada gudaha ee u dhexeeya hay'adaha dowladda (intra-entity transactions), oo ay ku jiraan dakhliga iyo kharashaadka, si buuxda ayaa looga saaray marka la sameynayo isku-darka (consolidation).

C) Lacagta Lagu Saleeyey Xisaab-Xirka

Lacagta sida toos loogu diiwaangaliyo dhacdooyinka maaliyadeed ee Dawladda waa lacagta doolarka maraykanka (USD). Waxaa loo isticmaalaa soo aruurinta dakhliga Dawladda sidoo kale waxaa lagu bixiyaa kharashaadka Dawladda. Lacagaha lagu qabtay ama lagu bixiyo Shilin Soomaaliga waxaa loo bedalaa (sarifaa) Doolarka Maraykanka, maadaama miisaaniyaddu ay ku salaysantahay Dollarka Maraykanka.

D) Sannad Maaliyadeedka

Sannad Maaliyadeedka Dawladda Federaalka Soomaaliya waxa uu ka bilowdaa 1^{da} Janaayo waxa uu ku egyahay 31^{da} Disember. Hadaba, waxa jira xisaab xiro guud ee sannadka sida Xeerka Maaraynta Maaliyada Guud 2019 & Xeer nidaamiyaha maaraynta maaliyada ku cad sida Billaha & Saddex biloodle. Xisaab xirkan waxa uu soo bandhigayaa sannad maaliyadeedka 2025 ka bilaabayna 1^{da} bisha Janaayo kuna eeg Disember 31^{da} sidoo kale waxa uu is bar bar dhig ku samaynayaa sannad maaliyadeedka 2024.

E) Aqoonsiga Dakhliga

Lacag qabashada waxay ka tarjumaysaa lacag caddaan ah oo ay heshay Dawladda Federaalka Soomaaliya (FGS) intii lagu jiray sannadka maaliyadeed, Dakhliga dawladda ayaa ka kooban dakhliga canshuuraha, dakhliyada kale, deeqaha, iyo kaalmada dibadda.

Lacag qabashada waxaa la aqoonsadaa laguna daraa warbixinnada maaliyadeed oo keliya marka lagu helo lacag caddaan ah ama wax u dhigma lacag caddaan ah oo ay si toos ah u hesho Dawladda Federaalka Soomaaliya ama lagu helay iyada oo loo marayo dhinac kale oo ku matalaya.

(i) Dakhliga Canshuuraha

Waxaa la aqoonsadaa marka lacag caddaan ah ama wax u dhigma la helo. Lacagta waxaa loo tixgeliyaa in la helay marka la helo ogeysiiska gudbinta (remittance) ee canshuurta.

(ii) Dakhliyada Kale

Waxay ka tirsan tahay dakhliga gudaha oo ka kooban dakhliga hantida, libka badeecadaha iyo adeegyada, ganaaxyada, ciqaabaha, xayiraadaha (forfeits), khidmadaha dheeraadka ah (premium fees), iyo sheegashooyinka ka yimaada caymiska aan nolosha ahayn iyo nidaamyada dammaanadda.

Dakhliga kale waxaa lagu aqoonsadaa laguna daraa warbixinnada maaliyadeed marka lacag caddaan ah am wax u dhigma la helo.

(iii) Libinta Xarashka Hantida

Waxaa ka mid ah hantida la taaban karo, hantida aan la taaban karin, iyo badeecadaha (inventories), waxaa lagu daraa muqaalka lacag qabashada iyo bixinta marka la helo lacag caddaan ah ama wax u dhigma lacag caddaan ah.

(iv) Deeqaha Dibedda

Deeqaha waa wareejinno heshay dawladda, kana timaada unugyo kale oo dawladeed oo gudaha ama dibadda ah ama hay'adaha caalamiga ah, kuwaas oo aan buuxin qeexitaanka canshuur, kab (subsidy), ama tabarucaad bulsho.

Kuwaas waxaa ka mid ah wareejinno joogto ah iyo kuwo raasamaal ah oo laga helo dawladda shisheeye iyo hay'adaha caalamiga ah ee qaabka deeqaha dibadda. Deeqaha sidoo kale waxaa laga heli karaa ururrada aan dawliga ahayn (NGOs), shirkadaha, iyo shakhsiyaadka, iyaga oo ah noocyo kale oo kaalmo ah.

Deeqaha waxaa lagu daraa Muqaalada maaliyadeed ee lacag qabashada iyo bixinta lacagta caddaan ah, waxaana la aqoonsadaa oo keliya marka ay helaan hay'adaha hoos yimaad dawladda.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

(v) Deymaha

Amaahda iyo deymaha waxaa lagu diiwaangeliyaa saldhigga lacag caddaan ah (cash basis), waxaana ka mid ah amaahda iyo hormarinnada gudaha, iyo sidoo kale amaahda dibadda sida Special Drawing Rights (SDR).

F) Aqoonsiga Kharashaadka

Kharash Bixinta waxay ka tarjumaysaa lacag bixinta caddaan ah ama wax u dhigma oo ay sameyso Dawladda Federaalka Soomaaliya (FGS). Muuqaallada Maaliyadeed waxay aqoonsadaan kuna daraan dhammaan kharash bixinta marka lacag caddaan ah ama wax u dhigma la bixiyo, sida hoos ku xusan:

(i) Mushaarka Shaqaalaha

Mushaarka shaqaalaha waxaa ka mid ah mushaharka, gunnooyinka, iyo kharashaadka kale ee la xiriiira bixinta mushaarka shaqaalaha, waxaana faa'iidooyinkan lagu aqoonsadaa Muuqaallada maaliyadeed oo keliya marka lacag caddaan ah la bixiyo.

(ii) Isticmaalka Badeecadaha iyo Adeegyada

Kharashaadkaan waxaa lagu aqoonsadaa muuqaallada maaliyadeed marka lacag bixin caddaan ah ee la sameeyo muddadaas, ee ku saabsan agabka/adeegyada lasoo iibiyo ama la helo. Haddii aan la bixin marka agabka/adeegga la helo, waxaa lagu darayaa muuqaallada hantida iyo deymaha maaliyadeed (Balance Sheet) sida deymaha maaliyadeed, iyadoo lagu lifaaqayo jadwal faahfaahsan (faallooyin/sharaxaad dheeri ah).

(iii) Hantida, Qalabka iyo Agabka iyo Hantida

Waxay ka kooban yihiin dhul, dhismayaal, mashiinno, gaadiid, qalab, iyo hanti kale oo raasamaal ah oo ay maamusho FGS. Iyadoo la adeegsanayo habka xisaabaadka ee cash basis, iibsashada hantidan waxaa si buuxda loogu kharash gareeyaa sannadka la iibsaday. Si kastaba ha ahaatee, hantidan waxaa lagu diiwaangeliyaa Diiwaanka Hantida Dawladda (Asset Register) iyadoo lagu qoro qiimaha qaansheegta (historical cost) si xusuusin (memorandum record) ah.

(iv) Khidmadda Maalgashiga

Wuxuu la xiriiira kharashaadka amaahda, waxaana la aqoonsadaa marka la bixiyo lacag cadaan ah.

(v) Deeqaha

Waxay ka kooban yihiin wareejinno joogto ah iyo kuwo raasamaal ah oo ay bixiso dawladda, waxaana lagu aqoonsadaa warbixinnada maaliyadeed marka lacag caddaan ah ama wax u dhigma la bixiyo.

(vi) Faa'iidooyinka Bulshada

Waa wareejinno joogto ah oo ay helaan qoysaska si loo daboolo baahiyaha ka dhasha khataraha bulsho, sida cudur, shaqo la'aan, hawl-gabnimo, hoy, waxbarasho, ama xaaladaha qoyska.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Muuqaallada maaliyadeed waxay aqoonsadaan kuna daraan dhammaan faa'iidooyinka bulshada marka lacag caddaan ah ama wax u dhigma la bixiyo.

(vii) Kababka (Subsidies)

Waa wareejinno joogto ah oo aan laga helin wax magdhow ah (unrequited transfers) oo ay dawladda siiso shirkadaha si loo saameeyo heerka wax-soo-saarkooda, tirada ama qiimaha badeecadaha ama adeegyada ay soo saaraan, iibiyaan, dhoofiyaan, ama soo dejistaan. Muuqaallada maaliyadeed waxay aqoonsadaan kuna daraan dhammaan kababka marka lacag caddaan ah ama wax u dhigma la bixiyo.

G) Lacagaha Dheeraadka ah

Lacagaha ka baxsan miisaaniyadda (Extra-budgetary funds) waa lacag qabasho, bixin, iyo harraa xisaabaad oo ka baxsan Miisaaniyadda Qaranka, taasoo micnaheedu yahay inaan si rasmi ah loogu qoondeyn miisaaniyadda (not appropriated). Kuwaas waxaa la aqoonsadaa laguna daraa muuqaallada lacag qabashada iyo bixinta (primary financial statements), balse waa laga reebaa Muuqaallada Isbarbardhigga miisaaniyadda iyo natijada dhabta ah (statement of budget comparison with actuals), taas oo isbarbardhig ku samaysa miisaaniyadda iyo dhabta ah iyadoo loo eegayo saldhig isbarbardhig oo isku mid ah.

Liiska hay'adaha ka baxsan miisaaniyadda waxaa lagu soo bandhigay faahfaahinta lifaaqa 1^{aad} ee kor ku xusan.

Is-waafajin (reconciliation) u dhexeeya qulqulka lacagaha soo gala iyo kuwa baxa ee dhabta ah, sida lagu muujiyey muuqaallada isbarbardhigga miisaaniyadda iyo natijada dhabta ah, iyo qaddarka guud ee lacag qabashada iyo bixinta lacagta caddaan ah ee lagu soo bandhigay Muuqaallada lacag qabashada iyo bixinta lacagta caddaan ah, waxaa lagu bixiyey faahfaahinta 2 (i) ee hoos ku xusan.

H) Khasnadda Dhexe

Dawladda waxay leedahay Khasnad Dhexe (Treasury Single Account – TSA) oo leh hal akoon bangi oo weyn iyo akoonno ku-meel-gaar ah oo loogu talagalay dakhli uruurinta oo laga furay bangiyada ganacsiga. Marka akoon-hoosaad (sub-account) la furo, waxaa lagu xiraa xisaabta weyn ee TSA, sida xisaabaadka Mashaariicda.

Sidaas darteed, Dawladdu waxay ku shaqeysaa nidaam qasnadeed oo dhexe (centralized treasury function) oo maamula dhammaan bixinnada lacagta caddaan ah ee la sameeyo.

I) Lacagaha Cadaanka sama wax u dhigma

Lacagta caddaan ah ama wax u dhigma waxay ka kooban yihiin lacag gacanta lagu hayo (lacag warqad iyo qadaadiic), dhigashooyin bangi oo la heli karo marka la dalbado (call deposits) ee bangiyada ama hay'adaha maaliyadeed, maalgashiyo kale oo muddo-gaaban loo badali karo lacag cadaan (highly liquid), iyo casaynta xisaab bangi (bank overdrafts). Lacagta caddaan ah waxaa lagu aqoonsadaa qiimaheeda cadad ahaan (nominal amount).

J) Lacagaha Xaniban

Haraaga lacagta caddaan ah ee ku xiran xadidid dibadeed ama aan diyaar u ahayn in ay isticmaasho hay'addu, waxaa lagu muujinayaa qoraallada faahfaahinta (notes) ee muuqaallada maaliyadeed, iyadoo lagu lifaaqayo sharaxaad (commentary).

K) Isbarbardhiga ku talagalkii hore ee miisaaniyada iyo Natijada Dhabta ah

Miisaaniyadda la ansixiyay waxaa lagu diyaariyey isla saldhigga xisaabeed (cash basis), isla saldhigga kala-soocidda (classification), isla markaana isla muddada (laga bilaabo 1 Janaayo 2025 ilaa 31 Diseembar 2025) sida muqaallada maaliyadeed.

Si kastaba ha ahaatee, miisaaniyaddu kuma jiraan hay'adaha iyo/ama lacagaha ka baxsan miisaaniyadda (extra-budgetary units/funds) sida ay ugu jiraan muuqaallada maaliyadeed ee la isku daray (consolidated financial statements) – kuwaas oo lagu caddeeyey faahfaahinta lifaaqa ^{7aad}.

Miisaaniyadda asalka ah waxaa lagu ansixiyay go'aan sharci-dejin ah 04/11/2024, mana jirto miisaaniyad dheeri ah (supplementary appropriation). Ujeedooyinka iyo siyaasadaha miisaaniyadda asalka ah, iyo farqiga muhiimka ah ee u dhexeeya miisaaniyadda iyo natijadooyinka dhabta ah, waxaa lagu sharaxay faallooyinka maamulka (executive commentary) ee ku jira warbixinnadan maaliyadeed, sidoo kale faahfaahin dheeraad ah waxaa laga heli kartaa miisaaniyadda la ansixiyay ee lagu daabacay mareegtadaan:

<https://parliament.gov.so/wp-content/uploads/simple-file-list/Miisaaniyad/Miisaaniyadda-2025/Sharciga-Qoondada-Miisaaniyadda-2025.pdf>.

Macluumaadka waxqabadka ee la xiriira guulaha adeegyada ee ka dhashay isticmaalka miisaaniyadda loo qoondeeyay waxaa lagu bixiyey qaybta faallooyinka (commentary section) ee warbixinta maaliyadeed.

L) I) Is-waafajinta (reconciliation) dhabta ah ee saldhig isbarbardhig la mid ah miisaaniyadda, iyo qaddarka dhabta ah ee ku jira warbixinnada maaliyadeed

Muuqaallada maaliyadeed iyo dukumeentiyada miisaaniyadda waxaa loo diyaariyaa isla muddada. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira farqi dhinaca hay'adaha (entity difference): miisaaniyadda waxaa loo diyaariyaa qaybta miisaaniyadeed ee dawladda dhexe, halka Muuqaallada maaliyadeed ay isku darayaan dhammaan hay'adaha dawladda dhexe ee ay dawladdu maamusho, oo ay ku jiraan lacagaha ka baxsan miisaaniyadda (extra-budgetary fund).

Is-waafajin (reconciliation) u dhexeeya qulqulka lacagaha soo gala iyo kuwa baxa ee dhabta ah, sida lagu muujiyey warbixinta isbarbardhigga miisaaniyadda iyo qaddarka dhabta ah, iyo wadarta guud ee lacag qabashada iyo bixinta lacagta caddaan ah ee lagu soo sheegay muuqaalka lacag qabashada iyo bixinta ee sannadka ku dhammaaday 31 Diseembar 2025, ayaa shaxdaan hoose lagu soo bandhigayaa.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Faahfaahin	Lacag Qabasho	Lacag Bixin
	(US\$)	(US\$)
Lacagta Dhabta ah ee ku saleysan Saldhig Isbarbardhig, sida lagu soo bandhigay muuqaalka Isbarbardhigga Miisaaniyadda iyo Dhabta	958,295,700	995,524,552
Farqi dhanka Xeerka	-	-
Farqi dhanka Waqtiga	-	-
Farqi Dhanka Hay'adaha	5,324,641	5,269,788
Totals	\$963,620,341	1,000,794,340

Shaxdaan hoose waxaa lagu faahfaahinayaa farqiga ka muuqda shaxda iswaafajinta oo la sii faahfaahiyey, iyadoo loo soo bandhiygaayo noocyada kharashada ee muuqaalada maaliyadeed farqiga u dhaxeeya gaar ahaan, muuqaalada ugu muhiimsan ee xisaabxirka.

Faahfaahin	MUUQAALKA LACAG QABASHADA IYO BIXINTA	MUUQAALKA ISBARBARDHIG DHABTA IYO MIISAANIYADDA – 2025	FARQIGA
	US\$	US\$	US\$
Lacag Qabasho			
Deeq	498,900,341	496,941,218	1,959,123
Deeq Dhinacyo Badan	498,900,341	496,941,218	1,959,123
Dakhliyada Kale	127,000,051	123,634,534	3,365,518
Dakhliga Iibka Agabka iyo Adeegga	127,000,051	123,634,534	3,365,518
Total Receipts	625,900,393	620,575,752	5,324,641
PAYMENTS			
Mushaarka Shaqaalaha	372,218,681	371,063,711	1,154,969
Isticmaalka Agabka iyo Adeegga	256,720,241	253,882,318	2,837,922
Faa'iidooyinka Bulshada	19,123,000	19,110,000	13,000
Deeqaha	179,726,066	179,719,262	6,803
Kharashaadka Kale	52,199,445	52,147,684	51,761
Hantida aan Maaliyadda ahayn	75,841,603	74,636,271	1,205,332
Wadarta Lacag Bixinta	955,829,035	950,559,247	5,269,788
Saafiga			54,853

M) Dhacdooyinka maaliyadeed ee lacagaha qalaad

Macaamillada lacagaha qalaad ee lagu magacaabay lacagaha qalaad waxaa lagu diiwaangeliyaa Doollarka Mareykanka (US\$) iyadoo la adeegsanayo sicirka sarrifka ee dhaqan galay taariikhda macaamilka.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

Hadhaaga lacagta caddaan ah, hantida kale, iyo deymaha lagu magacaabay lacagaha qalaad dhammaadka sannadka waxaa lagu hayaa Doollarka Mareykanka (US\$) iyadoo la adeegsanayo sicirka dhexe ee xiritaanka (closing middle rate) ee Central Bank of Somalia, iyadoo faa'iidooyinka ama khasaaraha ka dhasha sarrifka (exchange gains/losses), haddii ay jiraan, lagu maareeyo sida qodob is-waafajin ah (reconciling item) iyada oo loo marayo isbeddelka hantida saafiga ah ama khasaaraha.

Muddada warbixinta gudaheeda, ma jirin wax hadhaag lacageed, hanti, ama deymaha lagu hayay lacagaha qalaad.

N) Sicirka Sarifka Lacagaha Qalaad

Maadaama lacagta loo isticmaalo dhacdooyinka maaliyadeed ee Dawladda ay tahay lacagta doolarka maraykanka, dhammaan xogta maaliyadeed ee ku xusan Xisaab-xirkaan waa in lagu soo bandhigaa doolarka Maraykanka USD. Sidaas darteed, dhammaan xogta maaliyadeed ee ku xusan xisaab-xirka sannad maaliyadeedka 2025 waxaa lagu saleeyay Doolarka Maraykanka USD.

Lacagta	2025 USD\$	2024 USD\$
Shillin Soomaali (SOS)	22,500	22,500

O) Kharashaadka iyadoo loo eegayo Hawlaha Dawladda

Sida ka muuqata faahfaahinada dheeriga ah, waxaa lagu soo bandhigay macluumaad ku saabsan kharashaadka dawladda oo loo kala saaray hawlaha dawladda, iyadoo la adeegsanayo kala-soocidda uu qeexay Government Finance Statistics Manual 2014 (GFSM 2014).

P) Balan-qaad kharash bixin (Commitments)

Deymaha kharashaadka (expenditure arrears) waa xisaabaad la bixinayo (accounts payable) haddii ay ka gudbay taariikhdiis bixinta, halka deymaha kale (other payables) ay la xiriiraan biilal wali taagan oo aan weli la gaarin waqtigoodii bixinta.

Deymaha kharashaadka iyo deymaha kale waxaa lagu soo bandhigayaa muuqaallada maaliyadeed marka loo xaqiijiyo lana ansixiyo.

Ma jirin wax qaansheeg ah oo taagan (outstanding bills) ah marka la xiray sannadka maaliyadeedkaan.

Q) Daymaha kharashaadka

Daymaha Kharashaadka waa qayb ka mid ah deymaha Dawladda ee aan weli la bixin. Deymaha kharashaadka ee la soo hubiyay sax ahaanshiyahooda waxaa lagu soo bandhigaya Muuqaalka Maaliyadeed ee Dawladda.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

R) Soo daynsashada dawladda

Wasaaradda Maaliyaadda waa hay'adda ugu saraysa ee ka mas'uulka ah amaah qaadashada Dawladda Federaalka Soomaaliya (FGS). Wadarta deymaha guud (public debt) ee taagan taariikhda warbixinta waxaa lagu soo bandhiyayaa muuqaallada maaliyadeed.

S) Lacagaha ay bixiyeen Hay'ado Kale

Dawladda Federaalka Soomaaliya (FGS) waxay sidoo kale ka faa'iidsan kartaa agab iyo adeegyo loo soo iibiyey iyada oo wakiil laga yahay, taasoo ka dhalata lacag bixinno caddaan ah oo la siinayo shirkada keenay agabka ama bixiyey adeega iyad la maraayo nidaamka lacag bixinta dawladda. Codsiyada bixinnada dhinacyada saddexaad waxaa lagu maareeyaa iyada oo la adeegsanayo nidaamyada dalka (country systems). Marka ay dawladdu codsato, deeq-bixiyuhu wuxuu si toos ah lacag ugu dirayaa dhinac saddexaad (tusaale, qandaraasle, ama lataliye) kharashaad u qalma. Tusaale ahaan, bixinnada tooska ah ee ay maamulaan World Bank iyo African Development Bank marka ay helaan codsi ka yimid FGS, kuwaas oo si rasmi ah loo ogeysiiyo loona xaqiijiyo dawladda, isla markaana lagu daro warbixinnada maaliyadeed.

Dhanka kale, iyada oo loo marayo fulin toos ah (direct execution), dhinacyo saddexaad—oo ay ku jiraan deeq-bixiyeyaasha—waxay bixin karaan lacagaha qandarasle dibadda iyaga oo ka baxsan nidaamyada dalka, isla markaana keenaya badeecooyin iyo adeegyo, oo ay ku jiraan deeqo nooca ah ee aan lacagta ahayn (in-kind donations), sida gargaar cunto, qandaraasyo waaweyn oo shaqo, gaadiid, qalab, taageero farsamo, ama adeegyo shaqaale.

Bixinnada ay sameeyaan dhinacyada saddexaad ee ka baxsan nidaamyada dalka laguma soodaro muuqaallada lacag qabashada iyo bixinta ay maamusho dawladdu, inkasta oo ay dawladdu ka faa'iidsato. Sidaa darteed, bixinta noocaan laguma soo daro muuqaallada maaliyadeed, balse waa la soo sheegayaa lana muujinayaa marka qiimaha maaliyadeed ee agabyada iyo adeegyada la helay si lagu kalsoonaan karo loo xaqiijin karo loona qiyaasi karo.

Muddada sannadka maaliyadeedka, lama soo sheegin wax macaamillo fulin toos ah (direct execution transactions) ah.

T) Dhacdooyinka xiga (Dhacdooyinka ka dambeeya taariikhda warbixinta)

Ma jirin wax dhacdooyin ah oo dhacay kadib dhammaadka sannadka maaliyadeed oo saameyn weyn ku yeeshay warbixinnada maaliyadeed ee sannadka ku dhammaaday 31 Diseembar 2025 ama u baahan in la shaaciyo.

U) Xilliga la ogolaaday shaacinta Xisaab-xirka

Si waafaqsan qodobka 45^{aad} faqradda 1^{aad} ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, 2019, wabixinta iyo Xisaabxirkaba waxaa ogoaaladay in loo diro Hantidhawraha Guud ee dawladda, 30-ka April 2026, *Mudane Maxamed Maxamuud Cabdulle*, Xisaabiyaha Guud ee Dawladda Federaalka Soomaaliya.

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

3.0 FAAHFAAHINO LA XIRIIRA MUQAALADA WARBIXINTA

3.01 Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada

Canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada waxaa laga qaadaa dakhliga soo gala qofka, waxaa laga qaadaa qofka dakhliga soo galay mudada la canshuuraayo. Waxaa ka muuqda shaxda hoose faahfaahinta canshuurta Dakhliga iyo Faa'iidada ee Dawladda soo galay sannadaha 2025 iyo 2024. Sidoo kale shaxda waxa ay soo badhigaysaa koroka iyo naaquska canshuurta ee labada sano.

Madaxa	Faahfaahin	2025	2024	%
		USD	USD	
111101	Canshuurta Mushaarka Shaqaalaha Dawladda	10,457,117	10,047,180	4%
111102	Canshuurta Mushaarka Shaqaalaha Gaarka ah	17,121,493	15,156,415	13%
111103	Canshuurta Dakhliga Shakhsi ahaaneed Ee Dakhliga Hantida	7,942,595	6,665,436	19%
111201	Canshuurta Faa'iidada Shirkadaha	9,272,536	4,301,643	116%
Wadarta Canshuurta Dakhliga & Faa'iidada		\$44,793,741	\$36,170,675	24%

3.02 Canshuurta Agabka iyo Adeega

Canshuurta Agabka iyo Adeega waa canshuur laga qaado ganaciyada dalka, waxaa ka mid ah canshuurta Iibka, canshuurta wado marista iyo nootaayada. Canshuurtaan waxay ku xiran tahay wax iibsiga, marka ganacsadaha wax iibiyo waxaa laga qaadaa 5% qalabka uu iibiyey ama adeega uu bixiyey.

Madaxa	Faahfaahin	2025	2024	%
		USD	USD	
114121	Canshuuraha Iibka - Hoteellada	566,312	2,024,022	-72%
114122	Canshuuraha Iibka - Isgaarsiinta	4,912,922	4,831,959	2%
114123	Canshuuraha Iibka - Shirkadaha Qalabka Korontada Iyo Korontada	349,319	1,061,775	-67%
114124	Canshuuraha Iibka - Tigidhada Diyaaradda	5,156,005	6,443,571	-20%
114125	Canshuuraha Iibka - Shirkadaha Adeegga Tv-Yada	-	2,674	-100%
114126	Canshuuraha Iibka - Warshadaha Yaryar	-	5,555	-100%
114127	Canshuuraha Iibka - Farmashiyaha	-	6,092	-100%
114128	Canshuuraha Iibka - Canshuuraha Kale Ee Iibka	20,131,525	4,325,060	365%
114129	Canshuuraha Iibka - Alaabta Kale Ee Dibadda Laga Keeno	27,018,658	28,126,574	-4%
114201	Canshuurta - Cabitaanada Fudud	-	10	-100%
114203	Canshuurta - Dharka Iyo Dharka	-	360	-100%
114206	Canshuurta - Korontada Iyo Qalabka Elektarooniga ah	-	27	-100%
114526	Canshuurta - Isticmaalka Waddo Marista (Tremistrale)	3,981,372	2,603,340	53%
114529	Canshuurta - Ururinta Nootayada	1,836,547	1,988,924	-8%
114531	Khidmadda Saxiixa	3,300,000	-	0%
Wadarta Canshuurta Agabka iyo Adeega		\$67,252,659	\$51,419,944	31%

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

3.03 Canshuurta Ganacsiga Dibadda

Canshuurta Ganacsiga dibadda waa casnhaar laga qaado badeecadaha kasoo daga dakadda iyo garoonka diyaaradaha. Waxaa ka muuqda shaxdaan hoose faahfaahinta canshuuraha kasoo xarooday sannadaha 2025 & 2024.

Madaxa	Faahfaahinta	2025	2024	%
		USD	USD	
115101	Canshuurta Quutul-Daruuriga	51,607,590	52,853,238	-2%
115102	Canshuurta Qalabka Dhismaha	20,318,793	20,020,892	1%
115103	Canshuurta Korontada Iyo Elektarooniga	5,999,091	8,892,417	-33%
115104	Canshuurta Baabuur Iyo Qalab Dayactirla	6,375,372	7,202,389	-11%
115105	Canshuurta Waxyaabaha La Isku Qurxiyo iyo Uduga	1,593,849	1,593,470	0%
115106	Canshuurta Qaadka	16,863,321	17,148,222	-2%
115107	Canshuurta Alaabta Sigaarka Iyo Tubaakada	2,081,699	3,177,288	-34%
115108	Canshuurta Shidaalka Iyo Oolyada	13,591,539	25,869,124	-47%
115109	Canshuurta Dharka Iyo Kabaha	13,676,889	12,390,799	10%
115110	Canshuurta Maqaarka Iyo Alaabaha Maqaarka Laga Sameeyo	272,851	-	0%
115111	Canshuurta Saabuunta	3,224,466	3,053,266	6%
115112	Canshuurta Alaabooyinka Caagagga ah Iyo Kuwa Caagga Laga Sameeyo	1,041,951	827,624	26%
115113	Canshuurta Alaabaha Kale Ee Soo Dejinta	1,322,912	245,426	439%
115114	Canshuurta Dahabka	87,385	3,536	2371%
115115	Canshuurta - Agabka guryaha lagu Isticmaalo	7,964,517	11,188,031	-29%
115116	Canshuurta - Dawada & Qalabka Caafimaadka	2,690,142	2,533,942	6%
115117	Canshuurta - Agab Xafiiseed	958,967	672,920	43%
115118	Canshuurta - Qalabka Waawayn	1,080,529	-	0%
115119	Canshuurta - Qalabka Madadaalada & Cayaaraha	157,837	-	0%
115120	Canshuurta Wax Soo Saarka Xoolaha	1,749,299	-	0%
115121	Canshuurta Wax Soo Saarka Beeraha	356,950	-	0%
115122	Canshuurta Cuntadda Badda	83,568	-	0%
115123	Canshuurta Beey'Ada Iyo Xabagta	52,403	-	0%
115125	Canshuurta Isticmaalka DFS	4,152,268	-	0%
115201	Canshuurta Wax Soo Saarka Xoolaha	51,099	145,707	-65%
115202	Canshuurta Wax Soo Saarka Beeraha	165,527	434,889	-62%
115203	Canshuurta Cuntadda Badda	29,310	22,399	31%
115204	Canshuurta Beey'ada Iyo Xabagta	26,661	24,342	10%
115205	Canshuurta Alaabaha Kale Ee Dhoofinta	818,691	575,429	42%
Wadarta Canshuurta Ganacsiga Dibadda		\$158,395,474	\$168,875,350	-6%

DAWLADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
WARBIXIN MAALIYADEEDKA SANNADKA KU DHAMAADAY
31^{DA} DISEMBER 2025

3.04 Canshuuraha Kale

Canshuuraha kale waxaa ka mid ah canshuuraha farankaboolada laga qaado furdooyinka, qandaraasyada ay dawladdu bixiso, qaansheegaha kharashaadka dawladda bixiso iyo badqabka gawaarida. Faahfaahintoodu canshuuraha kale ee la helay sannadaha 2025 iyo 2024 waxa ay ka muuqata shaxdaan hoose.

Madaxa	Faahfaahinta	2025	2024	%
		USD	USD	
116101	Canshuurta Farankaboolada Furdooyinka	3,364,098	3,541,590	-5%
116102	Canshuurta Badqabka Baabuurta - Galawito	298,634	242,215	23%
116103	Farankaboolada Qaansheegyada Iyo Qandaraasyada	6,574,388	5,005,896	31%
116104	Canshuurta Shaabada Alaabta Cuntada	-	1,508,246	-100%
	Wadarta Canshuuraha Kale	\$10,237,119	\$10,297,947	-1%

3.05 Deeqaha Dawladaha Shisheeye

Shaxdaan hoose waxaa ka muuqdo meelaha nagasoo galeen deeqaha dawladda ay dawladda heshya sannadaha 2025 iyo 2024.

Dawlahdaha	2025	2024	%
	USD	USD	
Turkiga	7,500,000	15,000,000	-50%
Imaaraatka Carabta	11,058,444	14,698,555	-25%
Wadarta Deeqaha Dawladaha Shisheeye	\$18,558,444	\$29,698,555	-38%

3.06 Deeqaha Hay'adaha Caalamiga ah

Deeqaha laga helo hay'adaha caalamig ah, waa deeq dawladda loogu deeqay oo badankeeda lagu maalgaliyo mashaariicda laga fuliyo dalka gudihiisa, waxaa ka muuqdo shaxdaan hoose hay'adaha caalamiga ah ee noogu deeqay sannadaha 2025 iyo 2024.

Hay'adaha	2025	2024	%
	USD	USD	
Bangiga Adduunka	453,782,985	490,090,601	-7%
Bangiga Hourmarinta Afrika	18,019,043	7,160,945	152%
Midowga Yurub	12,347,970	9,917,970	25%
Qaramada Midoobay	1,963,558	-	0%
Ha'yadda Iskaashaiga Waxbarashada (GPE)	10,827,663	3,463,856	213%
Wadamada Soo saara Shidaalka (OPEC)	-	3,030,000	-100%
Wadarta deeqaha Hay'adaha Caalamiga ah	\$496,941,218	\$513,663,372	-3%

